# DHISMAHA URURRADA BULSHADA SOOMAALIYEED

J.D.S. Wasaaradda Warfaafinta Iyo Hanuuninta Dadweynaha

X.G.U.S.S.

UDKS



Muqdisho 1978

# DHISMAHA URURRADA

# BULSHADA SOOMAALIYEED

Wasaaradda Warfaafinta & Hanuuninta Dadweynaha

Xafiiska Qoraalka Buugaagta

Muqdisho — 1978



Jaalle Maxamed Siyaad Barre
Xoghayaha Guud ee X.H.K.S.
Madaxweynaha J.D.S.

# HORDHAC

Tan iyo maalintii uu ka curta dalkeenna Kacaanka barakeysan ee Oktoobar 1969kii maalin walba tallaabuu qaaday ku saabsanayd kor u qaadidda garaadka siyaasadeed ee dadweynaha. Hor iyo abbaato waxa lagamamaarmaan noqotay in la helo meelo shacbiga degmooyinka ku kulmaan meelahaasoo loo baxshay golayaasha Hanuuninta dadweynaha oo kaddibna heer xaafadeed la gaarsiiyey: Golayaasha Hanuuninta dadweynaha waxa ka socon welina ka socda tababarro, doodo iyo wada tashi kor u qaadayay welina u qaadaya garaadka iyo wacyiga siyaasadeed ee qofka Soomaaliyeed. Fikraddaas weyneyd ee ifka u soo saartay qof Soomaaliyeed oo tayo leh, waxtarna ah, qiimeynaya dalkiisa, danaynayana horumarkiisa waxay dhabbaha u fashay in loo bislaaday dhismaha Xisbiga Hantiwadaaggaa Kacaanka Soomaaliyeed. Markii u dhashay Xisbigu lana doortay Golihiisii Dhexe iyo Guddiga Siyaasadda ee Xisbiga ayaa waxaa la arkay in ay lagamamaarmaan tahay in la dhiso ururro bulsho ee fuliya run jirta oo la taaban karana ka dhigaya go'aannada Xisbiga una tartamaya dhismaha iyo horumarinta dhaqaalaha dalka, diyaarna had jeer u ah daafacaadda dalkooda. Sidaas daraadeed ayaa ifka waxa u soo baxay Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, Ururka Dimuqraadiga Haweenka Sooomaaliyeed, iyo Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed.

Buuggan aynu isugu soo ururinnay xeerarka iyo barnaamijyada saddexdaas urur aynu kor ku soo xusnay wasaaraddu waxay uga dan leedahay in kaadirrada ururradaasi iyo dhammaan dadweynahuba ka bartaan xilka marxaladda cusub saaran dadkeenna iyo sida habboon ee loo gudanayo loona fulinayo xilalkaas.

Dr. Cabdulqaasim Salaad Xasan

Wasiirka Warfaafinta iyo Hanuuninta dadweynaha

# URURKA HAWEENKA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYEED



WAXAA SOO SAARAY

W. W. IYO HAN. UMMADDA

# XEERKA URURKA DEM. HAWEENKA SOOMAALIYEED

## ARAR

Ka xoreynta bulshada isku dulnoolaadka iyo sinnaan la'aanta ijtimaaciga ah suura gal ma noqon karto mana dhalaobi kareyso haddii aan si dhab ah loo xoreyn Haweenka oo aanay si run ah uga qayb gelin dhismaha nolosha cusub ee dalka.

Arrinta xoreynta Haweenka waxay ka mid tahay halganka guud ee la dagaallanka dibudhaca bulshada iyo abuuritaanka aasaaska dhismo mujtamac hantiwadaag ah.

Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, wuxuu ka mid yahay Ururrada Bulshada ah ee ku shaqeeya afkaarta hoggaaminta Xisbiga. ujeeddadiisa ugu weyni waxay tahay u dagaallanka hagaajinta nolosha bulshada ee haweenka, xoreyntooda xagga dhaqaalaha, daafacaadda xuquuqdooda iyo u dhiirrigelintooda ka qayb galka dhismaha cusub ee dalka.

Haweenka Soomaaliyeed waxay ku leeyihiin taariikh cad halgankii gobannimadoonka Ummadda Soomaaliyeed, iyagoo ragga garab taaganna waxay u soo halgameen xoraynta dalka laga xoraynaayey gumeysiga. Markii ugu horraysay taariikhda dalkeenna ayaa Kacaankii 21 Oktoobar wuxuu si dhab ah uga qayb geliyey dadweynaha maamulka siyaasadda iyo hoggaanka dalka, awood buuxdana u siiyey ka qayb galka horumarinta bulshada.

Sidaa darteed, ayaa haweenka Soomaaliyeed u noqdeen tiirka iyo gaashaanka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, taasna waxay caddeyneysaa tusaalihii Xoghayaha Guud ee XHKS. Jaalle Maxamed Siyaad Barre, ee uu yiri: «Haweenkeennu waa xoog uusan garan karin qofka maan-gaabka ahi, waxayna yihiin gaarhaye qiimo weyn leh».

Haweenku waa ay garawsan yihiin kaalinta ay kaga jiraan dhismaha ummadda, sidaa awgeed meel kasta oy joogaanba, waxay diyaar u yihiin inay buuxiyaan kaalintaas u bannaan, una halgamaan xoojinta iyo ilaalinta miraha Kacaanka.

Haweenka Soomaaliyeed waxaa horyaalla arrimo fara badan oo culculus, waxaa ka mid ah ciribtirka dhaxalkii gumeysiga iyo haraaga dhaqankii xumaa ee saameynayey nolosha haweenka si ay u noqdaan xubin buuxda ee mujtamaca ka mid ah door weynna ka qaata dhismaha nolosha cusub.

Si loo gaaro ujeeddadaas guud haweenkuna ay u hantaan kaalinta ay ku leeyihiin Qoyska iyo Bulshada, waxaa lagama maarmaan ah in la helo Urur ballaaran ee awood u leh in uu abaabulo kuna hoggaamiyo haweenka Soomaaliyeed jidka toosan iyo afkaarta Kacaanka. Ujeeddadaas weyn waxaa si dhab ah uga jawaabay «Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed.

## QODOBKA 1aad

### Magaca Xarunta iyo Calaamadda Ururka

Xarunta saldhigga Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, waa magaala-madaxda JDS. «Muqdisho», waxaana lagu magacaabaa «Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed». Calaamadda Ururku waa Calan laba midab ah casaan iyo bulug, dhexdana ay kaga sawiran yihiin Xiddig shan gees leh iyo Hooyo cunug sidata, labada gacmood kor ugu kala haysa Yaambo iyo Buntukh.

Micnaha Calaamadu waa :

1. Buluggu wuxuu tilmaamayaa Calanka Soomaaliyeed.
2. Casaanku waa astaanta halganka Kacaannimo.
3. Xiddigta shanta gees ah waa shanta Soomaaliyeed ee isticmaarku qaybsaday.
4. Hooyada waa waddanka.
5. Cunuggu waa Ummadda.
6. Yaambadu waa tacabka beeraha oo ah halbowlaha dhaqaalaha dalka.
7. Buntukha waa hubka difaaca dalka.



## QODOBKA 2aad

### Dabeecadda Ururka

1. Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed waa Urur ballaaran oo dimuqraadi ah oo isu keenaya haweenka Soomaaliyeed oo dhan, kuna dhisan mabda'a nidaamka hantiwadaagga ah, hawshiisana wuxuu ku fulinayaa dhammaan Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

   Waa Urur kulminaya, metelayana haweenka Soomaaliyeed oo ka kala socda Xubnaha Bulshada sida (Shaqaalaha, Dhallinyarada, Iskaashatooyinka, Ciidammada Qalabka Sida, Beeraleyda, Kalluumaysatada, Xoolo-raacatada, Guri-joogtada iyo inta kale oo horusocod'a ah). Wuxuu si hab Kacaannimo ah u mideynayaa dhammaan haweenka Soomaaliyeed oo ku jira halganka dabaqiga ah iyo dhismaha Beesha Cusub ee Hantiwadaagga.

2. Ururku wuxuu u bislaynayaa haweenka Soomaaliyeed ka qayb galka nolosha siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka, isla markaana hadafkiisu wuxuu yahay daafacaadda xuquuqda hooyada iyo barbaarinta dhallaanka, la dagaallanka jinsi kala sooca imberiyaaliyadda, gumeysiga nooc kastaba, midabtakoorka iyo sahyuuniyadda, u halgamidda gobannimada, midnimada, demuqraadiyadda, nabadda, horukaca iyo hantiwadaagga guud ahaan, gaar ahaanna u hiillinta haweenka adduunka oo ku jira halgankaas xaqa ah.

3. Ururku wuxuu ku tiirsan yahay saldhigga ujeeddadiisuna tahay hirgelinta himilooyinka Kacaanka 21ka Oktoobar iyo fulinta Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

## QODOBKA 3aad

### Ujeeddooyinka iyo waajibaadka Ururka

Iyadoo la cuskanayo Qodobka 2aad ee Xeerka Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, wuxuu xoggiisa saa-

rayaa fulinta ujeeddooyinka soo socda :

1. Mideynta soogagga Haweenka Soomaaliyeed, sare u qaadidda garaadkooda siyaasiga ah iyo niyaddooda waddaniga ah. U diyaarinta haweenka ka qayb qaadashada daafacaadda guulihii Kacaanka 21ka Oktoobar, barbaarinta da'da soo koraysa, xaqiijinta ujeeddooyinka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

2. La dagaallanka dhaqanka gaboobay ee hortaagan horukaca bulshadeenna kana soo horjeeda dhismaha bulshada cusub ee hantiwadaagga.

3. Dhisnaha iyo xoojinta qoys waafaqsan nolosha iyo anshaxa Hantiwadaagga.

4. Ka qayb galka haweenka nolosha siyaasadda, dhaqaalaha, dhaqanka iyo bulshada Soomaaliyeed, xaqiijinta xuquuqda sinnaanta ragga iyo haweenka iyo la dagaallanka cadaadiska guud ahaantiisba.

5. La dagaallanka jahliga, gaajada, iyo cudurka iyo sare u qaadidda aqoonta guud ee haweenka iyo garaadkooda siyaasiga ah.

6. Abuuritaanka iyo xoojinta Xarumaha Haweenka, sida kuwa farsamada gacanta, Iskaashatooyinka, Dugsiyada Dhaqaalaha Guriga, Xarumaha Xannaanada Dhallaanka, si ay ugu sahlanaato ka qayb galka haweenka hawlaha horumarinta dhaqaalaha waddanka.

7. Ka qayb qaadashada dejinta Reer Guuraaga Soomaaliyeed iyo horumarinta Beelaha Danwadaagaha, abuuritaanka kooxaha hanuuninta, fidinta caafimaadka iyo gargaarka gurmadka ee bulshada.

8. Iskaashiga iyo is-garabsiga Ururrada kale ee bulshada in si isku aragti iyo is waafaqsanaan loo wada guto xilka Qaranka.

9. Xoojinta saaxiibtinnimada iyo midnimada haweenka beesha hantiwadaagga, waddammada kale ee horusocodka ah iyo kuwa ku jira halganka gobannimadoonka.

## QODOBKA 4aad

### Habka soo gelitaanka

Qof kasta oo haweena oo Soomaali ah da'deeduna gaartay 18 sano, aqoonsan, oggolna Barnaamijka iyo Xeerka Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, way ka qayb geli kartaa Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed iyadoo raacaysa shuruudaha soo socda :

1. Waa inay soo qorataa arji gaar ah, iyadoo ku soo hagaajinaysa Guddiga Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Tuulada, Xaafadda ama Degmada, oo ay ku codsanayso inay ku soo biirto Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed.

2. Arrinta gelitaanka Ururka, waxaa lagu gooyaa go'aan ka soo baxa Shirka Guddiga, waxaana lagu guddoomin karaa marka dadka shirka ka soo qayb galay ay isku raacaan intooda badan.

4. Waa inay firfircooni dheeraad ah ka muujisaa meesha ay kaga nooshahay bulshada.

5. Waa inay dhowrtaa dishibliinka iyo asluubta Ururka, ilaalisaana sirta Qaranka Soomaaliyeed.

6. Waa inay ka soo qayb gashaa fadhiyada, kana dhiibataa ra'yigeeda.

## QODOBKA 6aad

### Xaqa Xubinta

Xubinta Ururka waxay xaq u leedahay :

1. In loo dooran karo waxna ka dooran karto Guddiyada iyo jagooyinka kala geddisan ee Ururka Dimuqraadiga

Haweenka Soomaaliyeed.

2. Inay si madaxbannaani ah uga dhiibato ra'yigeeda kulammada, shirarka iyo shirweynayaasha inta aan go'aan la gaarin.

3. Inay fadhiga dhexdiisa (heer kastaba) uu dhaliili karo Xubin kasta ee ka tirsan Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, ayadana la dhaliili karo.

## QODOBKA 7aad

### Xiriirka Ururka Dimuqraadiga Haweenka

### iyo Xisbiga iyo Ururrada Bulshada

1. Ururka Dimuqraadiga Haweenku wuxuu si buuxda uga qayb qaadanayaa fulinta awaamirta iyo go'aannada Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

2. Ururka Dimuqraadiga Haweenku wuxuu xiriir iyo wada shaqayn joogto ah la yeelanayaa Ururrada Bulshada ee la heerka ah. (Shaqaalaha, Dhallinyarada iwm).

## QODOBKA 8aad

Dhismaha Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed:

Dhismaha Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, waxaa aasaas u ah mabda'a Dimuqraadiga Guddoonka Dhexe, taas oo macnaheedu yahay:

1. Dhammaan doorashada Guddiyada Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed waa min hoos ilaa kor.

2. Waa inuu jiraa dishibiliin adag, halkaas oo tirada yari ay u hoggaansan tahay tirada badan.

3. Guddiyada Hoose waxaa khasab ku ah in ay fuliyaan go'aannada Guddiyada ka sarreeya.



## QODOBKA 9aad

Qaabka Dhismaha Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed waa sida soo socota :

1. Shirweynaha.
2. Guddiga Qaranka.
3. Xafiiska Fulinta.
4. Guddiga Gobollada, Degmooyinka, Xaafadaha iyo Tuulooyinka.

## QODOBKA 10aad

### Awoodda Shirweynaha

1. Hay'adda ugu sarraysa uguna awood weyn ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed waa SHIRWEYNAHA ee (3) Saddexdii Sanaba (1) HAL mar la qabanaayo waxaa isugu yeera, qabanqaabiyana Guddiga Qaranka ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed.

2. Hase yeeshee, waxaa la qaban karaa Shirweyne aan caadi ahayn haddii sidaas ay go'aan ku gaaraan Guddiga Qaranka ama codsasho ka timaadda intooda badan Guddiyada Gobollada iyo Degmooyinka

3. Shirweynuhu wuxuu awood u leeyahay :-

a) Inuu dhageysto kaddibna dhaliilo ama oggolaado Warbixinta Guddiga Qaranka.

b) Inuu jeexo khadka Siyaasadda guud ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed.

t) Inuu oggolaado ama wax ka beddelo Barnaamijka iyo Xeerka Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed.

j) Inuu xaddido inta ay noqonayso tirada Guddiga Qaranka:

x) Inuu doorto Xubnaha Guddiga Qaranka.

Wakiillada ka qayb galaya Shirweynaha waxaa soo dooranaya Guddiyada Gobollada iyo Degmooyinka, inta tiradoodu dhan tahayna waxaa jaangooynaaya Guddiga Qaranka iyadoo la tixgelinayo Gobol kasta iyo degmo kasta tirakoobtiisa Dadka iyo Dhaqaalahaba. Yeeritaanka iyo Ajeendada Shirweynaha waxaa la caddeeyaa muddo aan ka yareyn (3) saddex bilood ka hor maalinta Shirweynuhu billaabanayo.

## QODOBKA 11naad.

### Guddiga Qaranka

1. Waa Hay'adda ugu Sarreysa Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed muddada u dhaxaysa (2) Labada Shirweyne, oo laga soo dhex soocay Haweenka kuwa ugu kacaansan uguna hawlkarsan qayb wacanna ka soo qaatay Dhismaha Dalka iyo hirgelinta Siyaasadda Kacaanka.

2. Wuxuu jaangooyaa jidka guud ee saameeya Shaqada Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed. Tilmaamaa kana hortagaa waxyaabaha aasaasiga ah ee ka soo horjeeda go'aannadii Shirweynaha ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed.

3. Wuxuu baxshaa tilmaamo ku saabsan habka loo qabanaayo Shirweynayaasha Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, doorashada Guddiyada Ururka, Nidaamka Maamulka Lacagta. Warbixinta Xubnaha Ururka Iwm.

4. Wuxuu hoggaamiyaa Shaqada. Hanuuninta, Kicinta, Qoraalka iyo Barobogaandada Ururka.

## QODOBKA 12aad

### Habka Shaqada Guddiga Qaranka ee Ururka

Fadhiga Guddiga Qaranka waxaa lagu qaban karaa go'aanka Xafiiska Fulinta, waxaana la qabtaa ugu yaraan Sannadkii mar. Guddiga Qaranka marka la dhiso wuxuu ku doortaa fadhigiisa ugu horreeya:

1. Xafiiska Fulinta.

2. Guddiga Dhexe ee Anshaxa iyo Baarista.

3. Doorashada waxay ku ansixi kartaa Saddex dalool labo markay isku raacod.

4. Fadhiga Guddiga Qaranka waxaa la qaban karaa marka ay joogaan Xubnaha intooda badan.

5. Go'aanka Guddiga Qaranka waxaa la gaari karaa marka Xubnaha intooda badani ay isku raacdo.

6. Haddii ay isla ekaadaan codadka oggol iyo diiddan, waxaa lagu kala saaraa hadba Guddoomiyuhu meesha uu la jiro.

7. Guddiga Qaranku wuxuu awood u leeyahay in uu wax ka beddelo xafiiska fulinta iyo Guddiga Dhexe ee Anshaxa iyo Baarista haddii Xubnaha qaarkood ay ka soo bixi waayaan waajibaadka loo xilsaaray inta u dhaxeysa labada Shirweyne.

## QODOBKA 13aad

### Xafiiska Fulinta

Xafiiska Fulintu waxuu hoggaamiyaa hawl maalmeedka Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed muddada u dhaxaysa fadhiyada Guddiga Qaranka, wuxuu si joogta ah isugu duwaa hawsha laamaha ee Ururka. Wuxuu mas'uul ka yahay fulinta iyo socodsiinta hawlaha maamulka iyo isku dubbaridkooda.

Xafiiska Fulintu wuxuu ka kooban yahay :

1. Guddoomiyaha;
2. Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad:

3. Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad;
4. Xoghayaha Arrimaha Xoghaynta;
5. Xoghayaha Xannaanada Haweenka iyo Carruurta;
6. Xoghayaha Abaabulka;
7. Xoghayaha Hanuuninta iyo Barobogaandada.
8. Xoghayaha Waxbarashada iyo Tababarrada;
9. Xoghayaha Xiriirka Dibedda;
10. Xoghayaha Lacagta iyo Dhaqaalaha;
11. Xoghayaha Horumarinta Fanka iyo Suugaanta;
12. Guddoomiyaha Guddiga Anshaxa iyo Baarista;
13. Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Anshaxa iyo Baarista
14. Xubin Guddiga Anshaxa iyo Baarista.

QODOBKA 14aad

Guddoomiyaha Ururka

Guddoomiyaha waa hoggaamiyaha sare ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, waxaana saaran waajibaad siyaasi ah oo aan ka baxsanayn hadafka Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, himilooyinka Kacaanka iyo ilaalinta mabaadi'da siyaasiga ah ee XHKS. wuxuu isku xiriiriyaa hawlaha Ururka iyo Xiriirka kala dhexeeya Xisbiga, Dawladda iyo Ururrada Bulshada oo dhan, wuxuu hoggaamiyaa hawlaha taagan ee Xafiiska Fulinta iyo fadhiyada Guddiga Qaranka. Haddii dhibaato la gudboonaato Ururka dhexdiisa ama loo baahdo wuxuu awood u leeyahay inuu isugu yeero fadhi aan caadi ahayn Guddiga Qaranka.

Xilka iyo hawl qaybinta Xubnaha kale ee Xafiiska Fulinta waxaa lagu soo saari doonaa Xeer Nidaamiye uu soo saari doono Guddiga Qaranka ee Ururka Demoqraadiga ee Haweenka Soomaaliyeed.

QODOBKA 15aad

Guddiga Dhexe ee Anshaxa iyo Baarista

Guddiga Qaranka ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed. wuxuu doortaa Guddiga Dhexe ee Anshaxa iyo Baarista ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed oo



laga soo dhex xulay Xubnaha Guddiga Qaranka, Guddigu wuxuu ilaaliyaa fiiro dheerna u yeeshaa Xubnaha iyo shaqada Ururka caam ahaan, wuxuu kaloo ilaaliyaa nidaamka shaqadu u socoto, anshaxa Xubnaha Ururka. Wuxuu kaloo kormeer guud ku sameeyaa habka soo gelitaanka Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed. wuxuuna baaraa dhaqaalaha iyo hantida Ururka dhinac kastaba. Hadday lagama maarmaan noqoto Guddiga Qaranka ee Ururku wuxuu dib ugu noqon karaa go'aannada Guddiga Anshaxa iyo Baarista.

Tirada Xubnaha Guddiga waxaa lagu gooyaa fadhiga Guddiga Qaranka, waxaana hawshooda lagu faahfaahin doonaa Xeer Nidaamiyo u gaar ah.

QODOBKA 16aad

Guddiyada Ururka D. Haweenka ee Gobollada iyo Degmooyinka

Ururrada Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed waxay u qaybsamaan sida soo socota :

1. Guddiga Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Gobolka.
2. Guddiga Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Degmada.
3. Guddiga Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Tuulada.
4. Guddiga Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Xaafadda.

QODOBKA 17aad

Ururrada Hoose ee Ururka

Guddiyada Haweenka ee Gobollada iyo Degmooyinku, iyagoo ku shaqeynaya Barnaamijka iyo Xeerka Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, waxay ka qayb qaataan hawlaha soo socda :

1. Hawlaha la xiriira Siyaasadda iyo Abaabulka, fulinta go'aannada Hay'adaha sare ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, kicinta, hawlgelinta iyo xamaasad ku beeridda Xubnaha Ururka iyo Dadweynaha kaleba si nolosha loogu hirgeliyo waajibaadka bulshada ka saaran xagga dhismaha dhaqaalaha, waxbarashada, caafimaadka iyo hiddaha iyo dhaqanka toosan, iyadoo laga shidaal qaadanayo Barnaamijka XHKS.

2. Waxay warbixin hawleed u gudbinayaan Guddiyada Ururka Demoqraadiga Haweenka ee Sare.

QODOBKA 18aad

Xubnaha Hoggaaminta ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Gobolka

Hay'adda ugu sarreysa Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Gobolku waa shirka Ururka Demoqraadiga Haweenka ee Gobolka, muddada u dhexeysa shirarkana waa Guddiga Ururka ee Gobolka.

Shirka Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Gobolka, waxaa qabanqaabiya isuguna yeera ugu yaraan (3) saddexdii sanaba mar Guddiga Ururka Demoqraadiga ee Gobolka, wuxuu dhegeystaa warbixinta Guddiga Gobolka iyo Guddiyada Degmooyinka, wuxuu falanqeeyaa arrimaha kala duwan ee nolosha la xiriira, wuxuuna doortaa Guddiga Haweenka ee Gobolka.

Guddiga Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Gobolku waxay doortaan Xafiiska Fulinta iyo Wafdiga Gobolka uga qayb gelaya Shirweynaha. Guddiyaasha la doortay waxaa oggolaada Guddiga Qaranka ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, waxaana laga Diiwaan geliyaa Xarunta Dhexe.

Guddiga Haweenka ee Gobolku wuxuu yeeshaa fadhi ugu yaraan (6) lixdii biloodba mar, wuxuuna hoggaamiyaa Guddiyada Haweenka ee Degmooyinka iyo tuulooyinka, wuxuu ka-



loo guddoomiyaa oo xoojiyaana shaqada iyo hawsha Ururka. isla markaana dhegeystaa oggolaadaana warbixinta Guddiyada Degmooyinka la xiriira.

Qaabka dhismaha, habka maamulka iyo mideynta hawlqabadka Guddiyada Haweenka ee Gobollada iyo Degmooyinka, waxaa lagu caddeynayaa xeer nidaamiyo uu soo saaro Guddiga Qaranka ee Ururka.

QODOBKA 19aad

Hay'adaha Hoggaaminta Ururrada Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Degmooyinka

Hay'adaha u sarreeya ee Guddiyada Haweenka ee Degmooyinka waa shirka Ururrada Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Degmada. Guddiga Degmada ayaa ugu yaraan (3) saddexdii sanoba mar qabanqaabiya. isuguna yeera shirka Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, wuxuu dhegeystaa warbixinta Guddiyada Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Xaafadaha iyo Tuulooyinka, wuxuu dersaa arrimaha kala duwan ee saameeya dhismaha dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada ee haweenka degmada; wuxuu doortaa Guddiga Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Degmada. Guddigaasna wuxuu doortaa Xafiiska Fulinta iyo wafdiga wakiilka uga noqonaya shirka Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ee Gobolka.

Guddiga Degmada waxaa oggolaada Guddiga Ururka ee Dhexe. Guddiga Degmada wuxuu hoggaamiyaa Guddiyada Gobolka, waxaana laga diiwaan geliyaa Gobolka iyo Xarunta Haweenka ee Tuulooyinka iyo Xaafadaha, wuxuu dhegeystaa warbixintooda. Guddiga Degmada wuxuu fadhi yeeshaa ugu yaraan (1) hal mar bishiiba.

QODOBKA 20aad

Habka Anshaxmarinta

Gafafka iyo dembiyada ay galaan Xubnaha Ururka wa-

xaa lagu garan karaa waxyaalaha soo socda :

1. Ka soo bixid la'aanta waajibaadkii loo xilsaaray iyo fulin la'aanta go'aannadaa Hay'adaha Sare ee Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed. Gafkaasi iyo dembiyadaas waxay u keeni karaan :

a) Ururrada: Canaan, ama in la baabi'iyo Guddigaas dhammaantii oo Guddi cusub oo hawshiisa fuliya si ku-meel gaar ah loo dhiso.

b) Xubnaha : Haddii Xubin Ururka ka mid ah dembi ku sugnaato waxay mutaysan kartaa :

a) Digniin afeed ama mid qoran;

b) Canaan;

t) In laga fogeeyo madaxtinnimada ay ka hayso Ururka:

j) In laga saaro Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed.

2. Qofkii laga saaro Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed wuxuu dib ugu soo noqon karaa laba sano ka dib markii la hubsado inuu ka haray wixii horay lagaga saaray, taasna waxaa caddaynaya Guddiga meesha uu ku nool yahay, waxaana u oggolaanaya Gobolkiisa, Gobolkuna wuxuu ogeysiin u soo dirayaa Xarunta Dhexe ee Ururka. Mar labaad haddii laga saaro Ururka qofkii hore looga saaray dib dambe uguma soo laaban karo Xubinnimada Ururka.

QODOBKA 21aad

Dakhliga Ururka

Dakhliga Ururka wuxuu ka kooban yahay lacagta ka soo baxda Wargeysyada iyo Jaraa'idka Ururka, lacagta soo gelitaanka iyo dhigaalka joogtada ah, waxaa la qaadaa bil walba (1) hal mar, waxaana loo raacayaa habka soo socda :



1. **Haweenka Shaqeeya (2) shilin bishiiba.**

2. **Haweenka guri joogga ah (1) shilin bishiiba.**

**Lacagta Ururka soo gasha ee kor ku xusan waxaa lagu qabanayaa : Horumarinta haweenka, kordhinta garaadka siyaasiga ah, u abuuridda shaqada sida: Farsamada gacanta, daryeeliidda caafimaadka, kala dagaallanka jahliga, iskaashatooyinka, xarumaha xannaanada carruurta iwm.**

**Habka isticmaalka iyo kormeerka dakhliga, waxaa lagu faahfaahin doonaa xeer nidaamiye uu soo saari doono Guddiga Qaranka ee Ururka Soomaaliyeed.**




Jaalle Ismaaciil oo abaalgud siinaya Haweeney ka mid ah Haweenka Gobolka Banaadir ee qayb weyn ka qaadatay soo noolcynta Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaaliyeed.




Sidii waayihii hore haweeneyda Soomaaliyeed kuma ay eka gurigeeda oo qurra duniday booqataa, qaddiyadda dalkeedayna sharraxdaa. Waa la soo boogdaa oo horumarkey gaartay ayay tusaaleysaa.





Heegan weeye Hooyo oo kama baaqato Golayaasha Hanuuninta. Arrimaha dalkay falanqeysaa, arrini siday ku hagaagsan tahay ayay tusaaleysaa.



# XIRIIRKA URURRADA SHAQAALAHA SOOMAALIYEED

WAXAA SOO SAARAY

W. W. IYO HAN. UMMADDA

## XIRIIRKA URURRADA SHAQAALAHA SOOMAALIYEED

### Barnaamijka Shaqada

### I

Halganka shaqaalaha Soomaaliyeed oo maalinba maalinta ka dambeysa sii xoogeysanaya wuxuu astaan joogto ah ku reebayaa isbeddelka taariikhiga ah ee casrigaan aan ku jirno, ha ahaado dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada. Waxaa hubaal ah inayan shaqaaluhu fulin karayn hawlaha loo xilsaaray haddii aysan ka horrayn lafo-gurid cilmi ah ee ku saabsan waqtiga dhabta ah oo maanta adduunku marayo.

Haddaba, annagoo garowsan in shaqaalaha Soomaaliyeed uu ka mid yahay qaybaha adduunweynaha isbeddelkaasu saameynayo, waxaa nala gudboon inaan garanno waajibaadka iyo xilka naga saaran gaar ahaan dalkayaga iyo guud ahaan adduunweynaha.

Waxaynu wada ogsoonnahay in dhaqdhaqaaqyada Kacaanka ah ee adduunku ay jibaaxayaan hirar wata xaabo iyo xiisado, hase ahaatee, waxaa taariikhda aadamigu caddeneysaa in guushu ay ku dambaynayso xoogagga jecel horusocodka iyo hantiwadaagga, isla markaasna waxay muujinaysaa dib-u-gurashada iyo jahawareerka ku dhacaya imberiyaaliyadda caalamiga iyo xoogagga dibusocodka ah. Weerarrada foosha xun ee garmaqaatannimada ah ee ay ku hayaan dalalka iyo dadyowga nabadda jecel, waxay soo dhaweyneysaa soona dedejinaysaa geerida kama dambaysta ah ee imberiyaaliyadda iyo wixii la halmaala

Waxay xoogagga horusocodka ahi xaqiijiyeen in mabda'a xaqa ahi uu ka xoog weyn yahay hubka cusub iyo ciidammada faraha badan ee imberiyaaliyadda, taasoo sababtu tahay caddaalad la'aanta ay ku dhaqanto imberiyaaliyaddu oo marnaba aan u aabba yeelin xuquuqda bani'aadamka iyo iyadoo ay ka soo horjeeddo xoogagga aamminsan xaqa, xornimada iyo nabaddaba. Haddaba, inkastoo dharbaaxooyin lixaad leh loo geystay imberiyaaliyadda, haddana kama ayan waantoobin daandaansigeedii joogtada ahaa oo waxay weli ku haysaa dhibaatooyin dalal badan oo weli ka xoroobin gacanta gumeysiga oo ku jira cadaadis, ka-

deed iyo darxumo iyo kuwa dalalka xorta ah ee soo koraya intaba. Isla markaas waxay isku dayeysaa inay si toos ah isu hortaagto guulaha isdaba joogga ah ee xoogagga gobannimadoonka, ayadoo ku dhaqmaysa istiraatejiyad fool xun, had iyo goorna cusboonaysiinaysa tabaha addoonsiga iyo isku dulnoolaadka.

## II

Ummadda Soomaaliyeed waxay soo martay halgan dheer oo ay la wadaagto dadyowga adduunka, si ay u hanato xuquuqdeeda bani'aadaminnimo, xornimadeeda ummadnimo iyo madaxbannaanideeda dawladnimo, waxayna taariikhdeennu qoraysaa inay ummadda Soomaaliyeed ka hortagtay talisyadii isgaabar yarayd, waxaana taas marag ma doonto u ah halgannadii taariikhiga ahaa ee Axmed Gurey iyo kii Daraawiishta ee uu hoggaaminayey geesigii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan.

Markii uu soo shaac baxay 1943kii Xisbigii Dhallinyarada Soomaaliyeed (SYL) ee qaybta Koonfur iyo S.N.L. ee qaybta Waqooyi ee Soomaaliya ee hoggaaminayey halgankii gobannimadoonka, waxaa laf-dhabarkoodu ahaa intii yarayd oo ka hoos shaqaynaysay maamulkii gumeystaha, kuwaasoo aan ku tilmaami karno inay ahaayeen shaqaalihii markaas ugu garaadka roonaa dadka intiisa kale ayna ku dhici jirtay dhibaatadu, kana danqanayey cadaadiiskii gumeystuhu ku hayey ummadda Soomaaliyeed.

Sida aynu soo sheegnay taariikhda shaqaalaha Soomaaliyeed waxay ahayd mid la socotay halgankii ummadda Soomaaliyeed ugu jirtay gobannimo iyo madaxbannaani.

Xoogsatada Soomaaliyeed waxay waqtigaas u dhegataageysay isbeddelladii ka socday adduunweynaha oo ay ugu weynaayeen dagaalkii dunida ee labaad, waxaana dhaqdhaqaaqoodaas iyo himmadooda u halganka xornimo iyo madaxbannaani horumariyey sarena u dhigay dhalashada habka hantiwadaagga cilmiga, kaasoo gacanta u fidiyey dhaqdhaqaaqyadii xoogsatada adduunweynaha iyo dalalkii ku hoos noolaa gumeysiga iyo imberiyaaliyadda caalamiga ah si ay u hantaan xornimo buuxda.



xariis lahayn dagaal ugu qaaday ummadda Soomaaliyeed oo gobannimadeeda u halgamaysay gaar ahaan xoogsatada, oo ayadu ahayd xooggii ugu firfircoonaa, ugu aqoon roonaa si caddaan ahna ugu muuqdeen gardarradiisa iyo siyaasaddiisii foosha xumayd, waxayna dagaalladiisaasu isugu jireen: dhac, dil, xarig, masaafuris, isku dir iyo qalaanqal ka abuurid ummadda midnimadooda iyo u-ursanaantooda, asagoo fulinaya siyaasaddiisii ahayd «Qaybi oo Xukun».

Waxayse guuldarro u ahayd gumeysiga in cadaadiskaas iyo dagaalkaas naxariis darrada ahaa ee uu ku hayey dadkeenna ay noqdeen kuwo sii kiciyey hiyiga iyo shucuurta kuna sii baraarujinayey xoogsatada Soomaaliyeed iyo ummadda inteeda kale inay sii xoojiyaan halgankooda xaqa ah oo ay kula jiraan gumeysiga, sidii ay gobannimadooda u soo dhacsan lahaayeen, taasoo ay dhabowday 1960kii oo laba ka mid ah qaybihii gumeysigu u kala qaybiyey ummadda Soomaaliyeed ay is-raacday iskuna noqdeen «Jamhuuriyadda Soomaaliya».

## III

Markii la hantay gobannimadii ummadda Soomaaliyeed ay u soo halgamaysay qarniyaal badan, nasiib darro waxay noqotay inuu xukunka dalka gacanta u galay koox dibusocod ah, oo u shaqaynaysa danahooda gaarka ah una adeegeysa gumeysiga cusub iyo imberiyaaliyadda caalamiga ah, middaasna uu ku hakaday horukacii ummadda Soomaaliyeed tiigsanaysay, muddada dheerna u soo halgamaysay.

Muddadii uu taliska dibusocodka ahi ka jiray dalka, waxay xoogsatada Soomaaliyeed u soo joogtay dhibaatooyin fara badan oo ay ka mid ahaayeen: shaqo li'i, aqoondarro, caddaalad xumo iwm. Dhibaatooyinkaasina waxay u geeyeen xoogsatada, ayadoo bahaysanaysa xoogagga kale sida dhallinyarada, haweenka, iyo dadweynaha kale inay is hortaagto dagaalna la gasho taliskii dibusocodka ahaa, ayagoo dhigay bannaanbaxyo, shaqo ka fariisad, oo ay ku diidayeen xukunkaas foosha xun, oo ay u arkayeen inuu ahaa mid aan u cuntamin una daneyneynin ummadda Soomaaliyeed, isla mar ahaantaasna, waxaa u muuqatay inay lagama maarmaan tahay inuu isbeddel siyaasi

...Soomaaliyeed dhibaatooyinkii jiray.

Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 oo ay curiyeen Ciidammada Qalabka Sida, ee uu hoggaaminayey Jaalle Maxamed Siyaad Barre, ayaa dalka ka xoreeyey dulligii, qaskii iyo dawladxumadii ka jirtay, Kacaankaasoo ahaa mid ka tarjumaya, cabbirayana guud ahaan shucuurta dadweynaha Soomaaliyeed, gaar ahaanna midda xoogsatada.

Xoogsatada Soomaaliyeed waxay ahaayeen kuwii ugu hor reeyey oo si buuxda hiil iyo hooba isu garab taagay Kacaanka, ayagoo u arkayay inuu ayaga u curtay, kuna abuuray kalsooni, u soo celiyay xuquuqdii aadaamiga ahayd, kana saaray gunnimadii iyo dulligii ay ku noolaayeen.

Kacaanku wuxuu xoogsatada u jeexay khad siyaasi ah ee gaarsiinaya horumar degdeg ah una tilmaamaya kaalinta ay ka qaadanayaan dhismaha bulshada cusub ee hantiwadaagga ah oo ay udub-dhexaadka u yihiin, ahna midka keliya oo gaarsiin karaya xornimo, sinnaan, caddaalad iyo barwaaqo bulshannimo.

Kacaanka 21kii Oktoobar tan iyo markii uu curtay wuxuu si isdabajoog ah u qaaday tallaabooyin taariikh ah oo lagu daryeelayo danaha xoogsatada Soomaaliyeed, tallaabooyinkaasoo ay ka mid ahaayeen :

— Qaramayntii halbowlaha dhaqaalaha dalka oo lagu dhiigmiiran jiray shaqaalaha.

— Qoristii Af Soomaaliga oo sal iyo baarba u rogay waxbarashada iyo Kacaanka aqoonta.

— Xeerkii joogteynta shaqaalaha dawladda.

— Sharciga shaqo-bixinta, ayadoo ku dhaqankiisa laga qayb geliyey dadweynaha iyo Guddiyo ka kooban Hay'ado iyo Ururro kala duwan.

— Xeerkii shaqada, ayadoo habeyntiisa laga qayb geliyey lagana tixgeliyey dadweynaha.

— Dhismihii Guddiyada Shaqaalaha oo hadda gaarsiisan heer Ururro Shaqaale.



— Ololihii Horumarinta Reer Miyiga iyo Joogteyntiisaba.

— Dhismihii Guddiyada Garsoorka Shaqaalaha.

— Abuuristii Sanduuqa Shaqaalaha Qaranka.

— Tababarradii Siyaasadeed ee joogtada ahaa oo loo furay shaqaalaha, sidii garaadkooda siyaasiga ah kor loogu qaadi lahaa.

— Waxa kaloo xusid mudan sida weyn oo uu Kacaanku u xushmeeyey una maamuusay 1da Maajo Maalinta wey ee xuska Shaqaalaha Adduunka, taasoo aan dalkeenna Kacaanka ka hor tixgelin weyn aan ka jirin.

Xoogsatada Soomaaliyeed ayadoo fulineysa baaqii Kacaanka iyo tusaalooyinkii hoggaamiyahooda Jaalle Siyaad, waxay si muuqata uga soo dhalaashay hawlihii faraha badnaa oo lagu hormarinayey dalka oo isugu jiray :

1. Dhismihii isdabajoogga ahaa oo lagu hirgeliyey habka Iskaa wax u qabso, oo Dawladdu ugu baaqday dhaqaale fara badan oo lagu suurta geliyey hirgelinta mashruucyo kala duwan;
2. Hirgelinta Ololayaashii Ciribtirka Aqoondarrida iyo waxbarashada dadka waaweyn.
3. Hirgelinta Ololihii Horumarinta Reer Miyiga (OHRM).
4. U gurmadkii abaartii dabadheer oo waxyeellada u geystay dadka Soomaaliyeed.
5. Hirgelinta barnaamijkii raridda iyo dejinta dadkii abaarta ku tabaaloobay.
6. Ololayaashii isdabajoogga ahaa oo lagula dagaallamayey ciribtirka caadaadka gurracan iyo arrimaha dhaawacaya bulshada sida: qabiilka, musuqmaasuqa, gobollaysiga, eexda, laaluushka, la dagaallanka dibusocodka, gumeysiga iyo imberiyaaliyadda.
7. Hirgelinta dhismaha dhaqaalaha dalka guud ahaan, gaar ahaanna kobcintiisa dhanka beeraha, xoolaha iyo warshadaha.

8. Kacaanku asagoo aad u qiimeynaya una qaddarinaya sida muuqata oo ay xoogsatadu mar walba uga soo baxday kaalintii ay kaga jirtay dhismaha dalka, wuxuu ku abaalmariyey billado kala nooc ah, shahaado sharaf badan iyo deeq ah waxbarasho Jaamicadeed, wuxuuna Jaalle Siyaad ku tilmaamay inay xoogsatadu tahay «Lafdhabarkii Kacaanka».

IV

Halganka ay xoogsatadu muujisay tan iyo intii uu Kacaanku jiray iyo sida wacan oo ay uga soo baxday kaalinteeda waxaa suurto geliyey meelmarna ka dhigay doorkii weynaa ee Xafiiskii Siyaasadda MGSK ka cayaaray xoojinta shaqaalaha xagga uruurinta, isku dubbaridka, abaabulka, hanuuninta iyo kordhinta wacyigooda siyaasiga ah, ilaa uu ka soo gaarsiiyey heer ay xoogsatadu isku kalsoonaato iskeedana isu maamusho.

XSMGSK, si uu uga soo baxo xilkaas saarnaa wuxuu ugu horreyntii ku dhaqaaqay kicinta iyo baraarujinta shaqaalaha, asagoo si isdabajoog ah ugu qabanqaabinayey tabarro siyaasi ah oo lagu barayey mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ah, laguna tusaaleynayey faa'iidooyinka uu u leeyahay ummaddeenna iyo kaalinta laga doonayo shaqaalaha inay ka soo dhalaalaan. XSMGSK, wuxuu dabadeed u gudbay abaabulka iyo uruurinta shaqaalaha, ayadoo Gobol, Degmo iyo Hay'ad kasta ka dhex abuurtay Guddiyo Shaqaale, si ay xoogsatadu toos uga qayb gasho talada wax soo saarka, loona taabsiiyo kaalinta ay kaga jiraan kordhinta tacabka iyo guud ahaan horumarinta dhaqaalaha dalka.

Maadaama ujeeddada Kacaanku ay ahayd in abaabulka xoogsatada la gaarsiiyo ilaa heer dhismo Ururro Shaqaale, Xafiiska Siyaasadda MGSK, wuxuu qabanqaabiyey tababarro, shirar, shiweynayaal iyo aqoon-isweydaarsiyo lagu carbinayey looguna bisleynayey shaqaalaha isu diyaarinta, karti u yeelashada iyo u hubeysnaanta dhismaha iyo hoggaaminta Ururro Shaqaale, taasoo uu maanta lagu qori karo barnaamijkaan in la gaaray, amaanteedana uu leeyahay Taliska Kacaanka ee dhisay Xafiiskii Siyaasadda MGSK, oo si hufan oo xilkasnimo ah uga soo baxay xilkii ka saarnaa xoogsatada Soomaaliyeed xagga barbaarinta iyo hanaqaadkeeda intaba.

Sidoo kale, XSMGSK, wuxuu ku dadaali jiray asagoo fulinaya baaqii Kacaanka ee ahaa hirgelinta mabaadi'da caalaminnimada ee shaqaalaha, in uu isku xiro shaqaalaheenna iyo kuwa adduunweynaha gaar ahaan dalalka hantiwadaagga iyo kuwa horusocodka ah, isku xirkaasoo ku imaan jiray siyaabo fara badan oo ay ka mid yihiin :

1. Ka qayb qaadashada shirarka caalamiga ah.

2. Abaabulka aqoon isweydaarsiyo iyo booqashooyin shaqaalennimo oo aragti isbahaysi iyo isbarasho ku qotoma oo dhex mara shaqaalaheenna iyo kuwa horusocodka ah.

3. U habeynta shaqaalaheenna tababarro ay ku soo qaataan dugsiyada Ururrada Shaqaalaha aan is-bahaysanno, si ay u bartaan cilmiga shaqaalannimada oo ku habeysan mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ah.

Xiriirka wacan iyo isbahaysiga Jaallennimo uu Xafiiskii Siyaasadda MGSK ka dhex abuuray shaqaalaha Soomaaliyeed iyo kuwa adduunweynaha wuxuu noqday mid caalaminnimo magac iyo maamuus u soo jiiday xoogsatadeenna, sida wacan ee shaqaalannimadu ku dheehan tahay oo ay uga qayb qaateen shirarka caalamiga ah, kuwaasoo ay ka soo hooyeen guulo waaweyn oo ay ka mid yihiin :

1. Ka mid noqoshada Ururka Shaqaalaha Adduunka (WFTU).

2. Ka mid noqoshada Xubin Ururka Midaynta Shaqaalaha Afrika (O.A.T.U.U.), oo shirweynihiisii 2aad lagu qabtay Triboli, magaala madaxda dalka Liibiya, loona doortay Soomaaliya jagada Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee O.A.T.U.U.

3. Ka mid noqoshada U. Shaqaalaha Carabta (ICATU).

Hoggaanka Kacaanka 21kii Oktoobar si mowduuci ah

ayuu u muujiyey kaalinta laxaadka leh ee shaqaaluhu ka qaato dhismaha bulshada cusub, xoogsataduna awood aqoon iyo karti intaba waxay ku jahaynaysay inay gudato xilka ka saaran hoggaaminta falka si daacadnimo iyo xilkasnimo ah.

Biseelkaas siyaasiga ah ee Kacaanku gaarsiiyey xoogsatada iyo kooxaha kale ee bulshada, wuxuu suurta geliyey dhalashadii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, taasoo ah guul cusub oo ka mid ah guulihii waaweynaa ee ay xoogsatadu ku gaartay Kacaankii Oktoobar, Xisbigaasoo ay horseed u yihiin xoogagga horusocodka ah ee dalka.

Barnaamijka iyo Xeerka XHKS, waxaa ku qeexan inay xoogsatadu tahay Kaadarka, horseedka iyo xoogga Xisbiga hoggaanka u haya, isla mar ahaantaasna ay tahay tii si bareer ah nafteeda ugu hureysay daafacaadda iyo ilaalinta himilooyinka Kacaanka.

Haddaba, si ay xoogsatadu uga soo dhalaasho kaalinta laga doonayo ee dhismaha bulshada cusub ee hantiwadaagga ah maadaama ay ayadu tahay lafdhabarkii Kacaanka, waxaa lagama maarmaan ah in la cusbooneysiiyo Barnaamijka Ururrada Shaqaalaha laguna saleeyo mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ah, si halgankooda dabaqadeed u hanaqaado ayadoo ku tiirsan hoggaanka toosan ee XHKS si qummanna u fulinaysa Barnaamijkiisa iyo Xeerarkiisaba.

Sidaas darteed, waxaan Barnaamijkaan ku soo uruurinaynaa waajibaadka iyo arrimaha la gudboon Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed inay u guntadaan wax ka qabadkooda, si ay u buuxiyaan shaqaaluhu kaalinta ay kaga jiraan halganka dhismaha bulshada cusub ee Soomaaliya iyo dhaqdhaqaaqyada shaqaalaha adduunweynaha ee u horseedaya dhismaha bulsho hantiwadaag ah.

## I. - DHINACA BULSHADA IYO HIDDAHA

Si loo hirgeliyo ulajeeddada Kacaanka Oktoobar, waxaa lagama maarmaan ah in la is waafajiyo waayaha gaar ahaaneed ee dalka iyo mabda'a hantiwadaagga cilmiga ku dhisan oo ah waddada keliya ee horumar degdeg ah gaarsiin karta ummadda Soomaaliyeed. Arrintaasi waxay ku imaan kartaa in lagu dhex baahiyo shaqaalaha, raacatada, beeraleyda, ciidammada qalabka sida, iyo xoogagga kale ee Kacaanka la jira, barnaamijka XHKS, ayadoo kor loo qaadayo heerka halganka lagula jiro imberiyaaliyadda, gumeysiga, dibusocodka iyo xoogagga ku dul nool dhididka shaqaalaha. Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in lagu dhex baahiyo shaqaalaha hiddaha iyo waxbarashada hantiwadaagga ah, qiimaha shaqadana la garwaaqsiiyo. Arrimahaas wuxuu Xiriirka Ururrada Shaquuluhu ku fulinayaan hirgelinta ulajeeddooyinka hoos ku qoran, asagoo intooda badan la kaashanaya Xisbiga, Dawladda iyo Ururrada kale ee Bulshada :

1. Qabanqaabada tababarro, doodo, duruus hanuunin ah iyo aqoon isweydaarsiyo joogto ah.
2. Horumarinta garaadka shaqaalaha, shaqo jacaylka iyo xoojinta disibliinka.
3. Ka faa'iideysiga tababarrada uu soo qabanqaabiyo Xisbiga iyo xiriirka shaqaalaha, ayadoo la soo xulanayo xubnaha ugu firfirsoon oo kaddib u faa'iideyn kara shaqaalaha intooda kale.
4. Abaabulid maktabo shaqaale oo lagu kaydiyo buugagga iyo wargeysyada ku saabsan siyaasadda, bulshada iyo dhaqaalaha, oo ku qotoma mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ah.
5. Qabanqaabid doodo dhex mara shaqaalaha si ay u kala faa'iideystaan, una sahlanaato wax ka qabashada dhibaatooyinkooda, isla markaasna lagula socodsiiyo qorshaha tacabka.
6. Hawl kasta oo si wadajir ah loo fuliyo waxay leedahay ulajeeddadeeda, waxaana sidaas darteed heer sare la gaarsiinayaa Wargeyska «Codka Shaqaalaha» iyo waxyaalaha kale ee qoraalka ah.
7. Xoojinta isticmaalka qalabka isgaarsiinta, sida : af-laamta, idaacadda, wargeysyada, iwm, kuwaasoo ah siyaabaha ugu habboon ee shaqaalaha wax lagu bari karo, aqoontooda iyo garaadkooda sare loogu qaadi karo.

8. Dhismaha Dugsiyo Hiddaha iyo Waxbarashada Shaqaalannifada, oo ku habaysan carbinta hormoodyada Shaqaalaha, tababarro xirfadeedka iwm.

9. ka warbixin joogto ah ee ku saabsan hawlaha iyo dhaqdhaqaaqa Shaqaalaha, horumarka Dalka dhinac kasta iyo kaalinta Shaqaaluhu hadba uu ka qaato.

10. Isku-taxalujin hirgelinta Badbaadada Shaqaalaha iyo hubinta fulitaanka arrimahaas. sida:

b) daryeelidda buuxda ee caafimaadka shaqaalaha iyo xannaanadooda;

t) dhismaha guryaha xannaanada carruurta, siiba carruurta haweenka shaqeeya, si loogu fududeeyo haweenkaas gudashada hawlaha Qaranka;

j) dhismaha guryaha iyo Maktabadaha Shaqaalaha, dhiirrigelinta Fanka, iyo Isboortiga;

x) abaabulid iskaashatooyin, sida kuwa Quudka, Guryaha iwm iyo xoojinta kuwii horay u jiray.

II - Dhinaca abuurista Kaaderka (Hormoodyada)

Waxaa hubaal ah in qiimo weyn ay tahay marka la helo tiro badan ee shaqaale hanuunsan ee heegan u ah fulinta hawlaha dalka, taasoo xoojineysa abuurista talis wadajir ah oo garaad sare leh, lana socon kara isbeddelka taariikhiga ah ee shaqaalaha, si taas loo gaarona xiriirka wuxuu hirgelinayaa qodobbada soo socda :

1. Abuurid Dugsiyo Shaqaale, oo ka qayb gala si loo helo Kaader Shaqaale oo u diyaar ah hawlaha Xiriirka Ururrada Shaqaalaha ee kala geddisan.

2. Ka faa'iideysiga tababarrada dibedda oo loogu deeqo Xiriirka, ayadoo loo xulayo dad ku habboon, kuna xiran danaha shaqaalaha, heeganna u ah horumarka dalka.

3. La socodsiinta hawlaha kala duwan ee saameynaya nolosha dadweynaha iyo shaqaalahaba, loona qorsheeyo booqashooyin dhex mara Guddiyada Shaqaalaha iyo Ururradoodaba, si ay u kala kororsadaan aqoonta iyo waayo-aragnimada.



## III - DHINACA SHAQAALAHA

Ulajeeddada weyn ee halganka shaqaalaha Soomaaliyeed gaar ahaan waqtigaan hadda lagu jiro, waxa weeye sidii isbeddel Kacaannimo ah loogu sameyn lahaa qaabka dhismaha dhaqaalaha Qaranka, ee looga dhigi lahaa mid ku dhisan tacab soo saarid (Productive) si aan uga madaxbannaanaano cunaqabataynta imberiyaaliyadda iyo dibusocodka u adeega. Sidaa darteed, Xiriirku wuxuu u hawlgelayaa sidii si dhab ah looga faa'iideysan lahaa xoogga dadweynaha Soomaaliyeed, in sidii Kacaanka 21kii Oktoobar ugu tala galay loo fuliyo qorshaha shanta sano iyo kuwa soo socda, si loo abuuro dhaqaale ku dhisan farsamo, tacabka beeraha iyo warshadaynta dalka.

Haddaba, maadaama shaqaaluhu yahay lafdhabarka tacab soo saarka ee bulshada, si ay uga soo baxaan kaalintaas weyn, waxaa lagama maarmaan ah xoogsatada Soomaaliyeed inay fuliso qodobbada soo socda :

1. Fulinta Qorshaha Qaranka iyo mashaariicda kale oo lagu dhisayo xiriir dhaqaale cusub, taasoo dhalinaysa in tacab soo saariddu kor u kacdo, isla markaasna qayb weyn ay ka qaadato hagaajinta nolosha iyo caafimaadka shaqaalaha.

2. Ka qayb galka buuxa ee shaqaalaha maamulka iyo hoggaaminta goobaha shaqada, meelaha tacab soo saarka, ayadoo isla mar ahaantaas la hormarinayo aqoonta farsamada ee shaqaalaha, ha ahaato dhinaca beeraha, xoolaha iyo warshadaha.

3. Hirgelinta iyo ka qayb qaadashada joogtada ah ee hawlaha horumarinta dalka, gaar ahaanna Iskaa Wax U Qabso, J.O.H.R.M., waxbarashada dadka waaweyn.

4. Ka qayb gelinta buuxda ee Xiriirka Ururrada Shaqaa-

laha, habeynta Shuruuda, Xeerarka iyo Qorshaha Dhaqaalaha Dalaka.

## IV - DHINACA HALGANKA SIYAASADDA

Ururrada Shaqaalaha ee ku habaysan astaamaha Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan, halgankoodu wuxuu soo korayaa maalinba maalinta ka dambeysa, ha ahaato dhinaca dhaqaale, siyaasad iyo bulsho, ayadoo la higsanayo dhismo bulsho Hantiwadaag ah.

Taariikhda isdabajoogga ah ee aadamigu waxay sheegeysaa inayan suuragal ahayn in dal laga hirgeliyo hantiwadaag cilmi ah, haddii shaqaaluhu horseedka kowaad uuna ka ahayn, maba suurtoobi karto la'aantood in la hormariyo dimoqraadiyadda ballaaran ee dadweynaha. Waxaa kale oo la wada ogsoon yahay inaan aqoonta marnaba la horumarin karin dal iyo dad, haddii aan marka hore sare loo qaadin shaqaalaha iyo xilka hoggaaminta dalka. Sidaas darteed, waa lagama maarmaan Shaqaalaha Soomaaliyeed sidii ay horeba uga qaateen qayb haa hoggaaminta nolosha siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada. Shaqaalaha Soomaaliyeed sidiii ay horeba uga qaateen qayb weyn halgankii gobannimadoonka, ka hortagga talisyadii dibusocodka 1960, amaba hawlkarnimada iyo daacadnimada ay muu jiyeen waqtigaan Kacaanka ah, waxay heegan u ahaayeen, haddana u yihiin hirgelinta himilada Kacaanka 21kii Oktoobar iyo Barnaamijka XHKS, iyagoo ku dhaarsan kordhinta iyo hagaajinta tacab soo saarka, la dagaallanka iyo ka hortagga shirqoollada foosha xun ee imberiyaaliyadda, gumeysiga iyo dibusocodka gudahaba.

Haddaba, ayadoo shaqaaluhu aad u garanayo marxaladdaan kala guurka ah ee lagu jiro, waxay u arkayaan inay lagama maarmaan tahay inay daacad u ahaadaan Hoggaanka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, ayna waajib tahay in la adkeeyo isku xirnaanshaha Kacaannimada ah ee ka dhexeeya Dawladda Kacaanka iyo dhaqdhaqaaqa shaqaalaha.

## V - XIRIIRKA KA DHEXEEYA XIRIIRKA URURRADA SHAQAALAHA IYO DAWLADDA

Maadaama aan dhiseyno bulsho hantiwadaag ah, Xiriirka Ururrada Shaqaaluhu wuxuu u arkayaa inay asaga iyo dawladduba yihiin laba Hay'adood oo u wada horseedaya xoojinta iyo ilaalinta guud ahaan maslaxadda iyo wanaagga dadka iyo dalka Soomaaliyeed, maadaama ay xoogsatadu qudheedu tahay xoogga dawladda hoggaanka u haya, arrintaasoo si ballaaran loogu qeexay Barnaamijka X.H.K.S.



Goor kasta taageero buuxdey siiyaan go'aannada xaqa ah ee Xisbiga.

## XIRIIRKA KA DHEXEEYA XIRIIRKA URURRADA SHAQAALAHA IYO BEERALEYDA

Ayagoo fulinaya Siyaasadda Kacaanka iyo Mabaadi'da Hantiwadaagga Cilmiga ah, Shaqaaluhu gacan weyn bey ka geysteen kicinta, baraarujinta, kordhinta garaadkooda Siyaasiga ah iyo Ururinta Beeraleyda, oo ah xoogga labaad ee Kacaanka si ay labadooduba wadajir ugu halgamaan dhismaha Bulshada Cusub ee Hantiwadaagga ah.

Shaqaalaha iyo Beeraleydu waxay yihiin dabaqadihii aad loo soo silciyey Kacaanka ka hor, sidaas daraadeedna, waxay labaduba u arkayaan inay lagama maarmaan tahay Isbaxaysigoodu sidii ay meel qura uga soo wada jeesan lahaayeen ladagaallanka gumeysiga, gumeysiga Cusub iyo Imberyaaliyadda.

Sidaas awgeed, Xiriirku asagoo dareensiisan inay Beeraleydu yihiin dabaqadda wax soo saarka ugu xoog badan, wuxuu ka shaqeynayaa sidii uu u sii xoojin lahaa isbahaysiga dabaqi-

ga ah ee ka dhexeeya Shaqaalaha iyo Beeraleyda, asagoo isla mar ahaantaas hiil iyo hooba ku garab istaagan Beeraleyda xagga aqoonta farsamada iyo cilmiga Beeraha, qalabka Beeraha, urūurinta, isku-dubbaridka iyo mideyntooda sidii ay u qaadan lahaayeen dhammaantood qaab Iskaashatennimo.

## VIII-DHINACA MIDEYNTA XOOGAGGA HORUSOCODKA IYO KACAANYAHANNADA

Waxay waaya aragnimada dadyowga Adduunku muujisay in mideynta gudaha iyo iskaashiga xoogagga horusocodka ah ee dunida ay yihiin waddada keliya ee lagaga guuleysan karo cadowga, isla markaasna lagu gaari karo horumar iyo barwaaqo. Tusaale ahaan waxaynu aragnay waedaradihii iyo guulihii ay soo hooyeen dhaqdhaqaaqyada Gobannimodoonka Afrika, taasoo ku timid isbahaysiga iyo isku dubbnaanta xoogagga horusocodka. Xiriirku wuxuu u arkayaa inay lagama maarmaan tahay in Ummadaha Horusocodka iyo nabadda jecel ay wadajir u dejiyaan istaraatijiyad cad oo muujinaysa tabaha iyo siyaabaha ay uga wada hortegi lahaayeen Imberyaaliyadda, loono dabargooyo qalalaasaha iyo weerarrada qaawan oo ay ku soo qaadeyso dalalka iyo dadyowga adduunka jecel inay ku noolaadaan dimoqraadiyad, nabadgelyo iyo xasiloonaan. Waxaynuna u aragnaa in arrimahaan ku fulin karno marka la helo wada tashad, isbahaysi iyo xiriir joogto ah oo saameynaya dhinac kastaba, iyo in la abuuro nidaam dhaqaale cusub oo daryeelaya caddaaladda bani'aadanka iyo in la xoojiyo halganka loogu jiro dhimista hubka baabi'inta iyo heerarka loo sameystay, lana xoojiyo siyaasadda istixgelinta iyo nabad ku wada noolaanta dunida guudkeeda.

Shaqaalaha Soomaaliyeed waxay rumeysan yihiin una halgamayaan siday u sii xoojin lahaayeen Xiriirka Shaqaalenimo ee ka dhexeeya ayaga iyo Ururrada Shaqaalaha horusocodka ah ee Adduunka maadaama aayatiinkoodu isku xiran yahay xil weynina ka saaran yahay jebinta Imberyaaliyadda Caalamiga ayagoo ka duulaya garashadooda dabaqiga ah, isla markaana xog-ogaal u ah xaaladda uu maanta Adduunku ku sugan yahay.

Waxaa la wada ogsoon yahay in dhaqdhaqaaqa Shaqaalaha gaar ahaan kuwa doortay inay ka hanaqaadaan Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan, ayan marnaba iska indhasaabi karin waxyaalaha ku weegaaran noloshooda, kumana koobi karaan dhaqdhaaqaaqooda soohdinta Dalkooda oo keliya ee waa inay u gudbaan Adduunka qaybihiisa kale.

Ulajeeddooyinka Shaqaalaha iyo xuquuqdooda ma hirgeli karaan haddii aan la habaysan dhaqdhaqaaqyada Shaqaalaha ee Caalamiga ah ay isku ujeeddada iyo danta yihiin. Haddaba waxaa lagama maarmaan ah in loo hawlgalo sidii lagu rumayn lahaa waxyaalaha soo socda:-

1. In xididdada loo aaso lana xoojiyo xiriirka lala leeyahay Ururrada Shaqaalaha Afrikaanka, Carabta, Dalalka Hantiwadaagga iyo Adduunweynaha kale oo horusocodka ah dhinac kastaba, lana abuuro xiriir joogto ah ee ku habaysan Mabaadii'da innaga dhexeysa oo ah u halganka xuquuqda Shaqaalaha Adduunka oo dhan.

2. Adkeynta xiriirka lala leeyahay Ururrada Shaqaalaha horusocodka ah ee Adduunka oo aynnu isku danta nahay iyo oogidda xiriir cusub meelihii horey aan suurogal u noqon in xiriir la is-dhaafsado.

3. In lala yeesho Ururrada Shaqaalaha Dunida, gaar ahaan Dalalka Hantiwadaagga booqashooyin, ergooyin iyo is-dhaafsi Waaya aragnimo intaba iyo xoojin xiriirka Ururrada Shaqaalaha ee Caalamiga ah sida: Ururka Shaqaalaha Afrika (WFTU).

4. Abaabulidda heshiisyo gaar ahaaneed oo lala galo Ururrada Shaqaalaha Carabta, Afrikaanka, Dalalka Hantiwadaagga ah iyo kuwa Adduunweynahaba oo ulajeeddadeedu tahay si loo tababaro kaadir Shaqaale lagana faa'iideysto waaya aragnimada xagga aqoonta iyo farsamadeeda, si shaqaalaheennu ugu sahlanaato hawlaha iyo xilka waqtigan kacaanka ah iyo in la iska kaashado xagga dhismaha Machadyo Farsamadeed, Dugsiyo Waxbarasho Shaqaale, kuwaasoo wax weyn ka tari doona sare u dhigga aqoonta iyo garaadka Siyaasadeed ee Shaqaalaha.

5. Ka qaybgalka Shirweynayaasha Shaqaalaha Adduunka, si loo muujiyo dhaqdhaqaaqa Shaqaalaha Soomaaliyeed, muddadii ka dambeysay curashadii kacaanka 21kii Oktoobar iyo Aasaaskii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

6. Abuurista Hawlwadeenno loo carbiyey arrimaha dhaqdhaqaaqa Shaqaalaha, taasoo ku imaan karta in la helo Waxbarasho dheer kaddibna looga faa'iideysto ka qaybqaadashada horumarinta dhaqaalaha, siyaasadda iyo Bulshada intaba.

7. Iskaashiga Ururrada Shaqaalaha horusocodka, sidii loo mideyn lahaa shuruucda iyo Xeerarka Shaqaalaweynaha Adduunka, intii hadba suuroobi karta.

8. Qabanqaabin doodo dhexmara Ururrada Shaqaalaha ee Afrikaanka. Carabta, Dalalka Hantiwadaagga iyo Adduunweynaha horusocodka ah; gumeysiga cusub, Midabtakoorka, Sahyuuniyadda, iwm.

9. ku biiridda ama la xiriiridda Ururrada Shaqaalaha ee xirfadaha kala geddisan ee Caalamiga, ayadoo la tixgelinaayo hadba waxtarka ay u yeelan karaan iskaashiga Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo Dhaqdhaqaaqa Guud ee Xoogsatada Adduunka.

10. Ka qaybgalka Shirweynayaasha isbahaysiga dadweynaha oo ay abaabuleen Xoogagga Kacaanyahanka ah ee Adduunweynaha horusocodka ah ee u halgamaya horumarinta iyo xoojinta nabadda Adduunka, taageeridda iyo taakuleynta Dhaqdhaqaaqyada Gobannimadoonka, iwm.

11. U-dagaalanka xoreynta iyo mideynta Dalalka Soomaaliyeed oo weli ku jira gacanta gumeysiga, midab kastaba ha lahaadee. iyo ka-xaqiijinta caddaaladda qaddiyaddaas Shirweynayaasha iyo kulamada Shaqaalaha ilaa iyo inta ay ka gaarayaan ka talinta aayatiinkooda dambe.



## XEERKA XIRIIRKA URURRADA SHAQAALAHA SOOMAALIYEED

### A R A R

Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed waajibaadkiisu waa in uu hoggaamiyo abaabulana Shaqaale ku hubaysan afkaarta Hantiwadaagga Cilmiga ah oo hormood u noqda Bulshada inteeda kale sidii looga hirgelin lamaa Dalka Soomaaliya Bulsho Hantiwadaag ah oo hanatay hoggaanka Dhaqaalaha iyo Siyaasadda Dalka.

Ururrada Sh. Soomaaliyieed waxay aamminsan yihiin una arkaan lagama marmaan in la adkeeyo xiriirka iyo u hoggaansanaanta Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo isbahaysiga Ururrada kale ee Bulshada, sida: Beeraleyda. Haweenka, Dhallinyarada, Ciidammada Qalabka Sida iyo Indheergaratada Horusocodka ah, dhidiibbada loogu sii aaso Kacaanka Hantiwadaagga ah.

Xiriirka Shaqaaluhu waa Ururka Guud oo kulmiya Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed oo dhan (kuwa hadda jira iyo kuwa jiri doonaba). wuxuuna salka ku hayaa aragti dabaqi ah oo Shaqaalannimo, asagoo ka shidaal qaadanaya go'aammada isla markaasna fulinaya Barnaamijka XHKS.

### QAYBTA IAAD

### QODOBKA 1AAD

### MAGAC-BIXINTA IYO TILMAAMAHA

Magac-bixinta iyo tilmaamaha waxaa loola jeedaa in magacyada hoos ku qoran ay leeyihiin macnaha ku hor qoran:

Jamhuuriyadda :Waa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

XIRIRKA: waa Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Jamhuuriyadda ee Kulmiya dhammaan Ururrada Shaqaalaha.

URUR SHAQAALE: Waa Urur kulmiya Shaqaalaha oo xagga shaqada, xirfadaha ama wax soo saarka isgaga xiran, kana kala duwan.

GUDDI SHAQAALE: waa koox Shaqaale ee u dhisan hab shaqo iyo degaan intaba.

SHIRWEYNE: waa Shirweynaha Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

XOGHAYN GUUD: waa Xoghaynta Guud ee Xiriirka Shaqaalaha Soomaaliyeed.

## QODOBKA 2AAD

## XARUNTA IYO ASTAANTA XIRIIRKA

1. Xarunta Xiriirka waa Magaalamadaxda Jamhuuriyadda ee «Muqdisho»
2. Astaanta Xiriirku waa Calan cas oo dhexda ku leh Xiddig cad oo shan-gees ah iyo astaanta Shaqaalaha oo ah:

b) Qorrax soo baxaysa oo tilmaameysa xoogga Shaqaalaha oo soo kordhaaya.

t) Burris iyo Yaambo tilmaamaya Tacabka Warshadaha, Beeraha iyo Isbahaysiga ka dhexeeya Shaqaalaha iyo Beeraleyda.

j) Garaangar tilmaameysa ku xirnaanta Shaqaalaha Teknoloojiyada iyo himilada Warshadeynta Dalka.

## QODOBKA 3AAD

## XILKA XIRIIRKA

1. Inuu ku dhex baahiyo Shaqaalaha mabaadi'da Hantiwadaagga Cilmiga ah iyo falsafadda Kacaanka 21ka Oktoobar.
2. Inuu u halgamo mideynta shaqaalaha meel ka wada shaqeeyo, kuwa shaqadoodu isku dabeecadda tahay, kuwa Ururka ku wada jira ama guud ahaan Shaqaalaweynaha Soomaaliyeed ee gudaha iyo dibedda meel kasta ha joogeene.
3. Inuu safka hore ka galo ilaalinta miraha Kacaanka 21ka Oktoobar, daafacaadda, xornimada dalka iyo u dagaallanka dimeynta Ummadda Soomaaliyeed.
4. Inuu absabulo habka ugu habboon una kharaj yar ee tacabka dalka lagu kordhin karo.
5. Inuu la dagaallamo shaqo la'aanta asagoo shaqaalaha ku guubaabinaya tacabkordhinta, xannaanada qalabka shaqada iyo ilaalinta Hantida Dadweynaha.
6. Inuu si buuxda ugu doodo danaha shaqaalaha had iyo jeerna daryeelkooda daafaco sida dhaqaalahooda, caafimaadkooda, xuquuqdooda xagga fasaxa, nasashada, hoyga, gaadiidka, badbaadada, Waxbarashada iwm.

## Qodobka 4aad

## WAAJIBAADKA XUBINTA

Qof kasta ee shaqaale ah ee bixiya dhigaalka joogtada ah ee sanduuqa Shaqaalaha waxaa loo tixgelinayaa inuu xubin ka yahay Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed waxaana saaran waajibaadka soo socda:

1. Inuu u hoggaansamo go'aannada iyo awaamiirta Ururkiisa iyo Madaxda ka sarreysa.
2. Inuu si daacadnimo buuxda ku jirto iyo firfircoonaan u guto hawlaha Ururku u xil saaro.
3. Inuu u huro wakhtigiisa, aqoontiisa iyo awooddiisaba daryeelka danaha shaqaalaha.
4. Inuu xafido sirta Ururrada Shaqaalaha iyo tan guud ee Qaranka.

Qodobka 5aad

## XUQUUQDA XUBINTA

Qof kasta oo xubin Urur Shaqaale ahi wuxuu xaq u leeyahay in:-

1. La doorto ama uu wax doorto.
2. Uu ra'yigiisa si cad oo aan cabsi lahayn uga jeediyo fadhiyada Xubnaha Ururku ku kulmaan.
3. Uu jago kasta ka qabto xilka Ururka haddii loo doorto ama loo magacaabo.
4. Uu Ururku daafaco danahiisa xagga Shaqada iyo nolosha Bulshadaba.

## QAYBTA 2AAD

Qodobka 6aad

## QAABKA DHISMAHA URURRADA SHAQAALAHA

Ururrada Shaqaalaha Jamhuuriyaddu waxay u dhisan yihiin una qaybsamaan 2 (laba) hab oo kala ah:-

b) Hab wax-soo saarid, taasoo ah in Guddiyada Shaqaalaha Xarumaha Shaqada laysugu geeyo Urur Shaqaale, ayadoo loo tixgelinaayo waayaheenna laysugu raaciyey inta wax-soo-saarkoodu isku midka yahay ama isku xiran yahay amaba taladoodu isku meel ka soo wada fusho: iyo

t) Hab «Juqraafi» ama deegaan, taasoo ah in Ururrada Shaqaalaha Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka laysugu geeyo siday deegaan ahaan isugu dhow yihiin ama isu raaci karaan.



( Qodobka 7aad

## HABKA SHAQADA XIRIIRKA IYO URURRADA SHAQAALAHA

Dhismaha iyo shaqada Xiriirka iyo Ururrada Shaqaalaha waxaa saldhig u ah Mabda'a Dimuqraadiyadda Guddoonka Dhexe taasoo Micnaheedu yahay:

1. In dhammaan doorashada Guddiyadu ay tahay min hoos ilaa kor,
2. Inay Guddiyada Hoose toos u fuliyaan go'aannada iyo awaamiirta Guddiyada Sare.
3. Inuu jiraa Dhisibliin adag, halkaasoo tirada yari u hoggaansan tahay tirada badan.
4. In lagu maamulo hawlaha Xiriirka iyo Ururrada Shaqaalaha, si habsami, wadajir iyo wada tashi ah. Guddiyada fulinta Ururrada waxay awood u leeyihiin inay qaataan go'aanno haddii aysan khilaafsanayn ama ayan ka horimaneyn barnaamijka, Xeerka, go'aannada Guddiga Dhexe iyo kuwa Xoghaynta Guud ee Xiriirka.
5. Inuu dhismaha Xiriirku ku habeysan yahay qaab deegaan iyo mid tacab soo saar ayadoo laga abuurayo Guddiyo shaqaale xarumaha Shaqada, oo marka dambe hab Urur Shaqaale laysugu xirayo siday dabeecadda shaqadoodu isu raaci karto.
6. In Madaxda Xiriirka, Ururrada iyo kuwa Guddiyada Shaqaalaha ay si toos ah ugu xirmaan Shaqaalaweynaha, ayadoo ujeeddeedadu tahay ka dhaadhicidda Barnaamijka, Xeerka iyo Siyaasadda Xiriirka oo saldhig u ah Barnaamijka XHKS, iyo ka warqabidda iyo wax ka qabashada arrimaha la xiriira nolosha shaqaalaha iyo horukacoodaba.

## QAYBTA 3AAD

### Qodobka 8aad

### AWODDA HAY'ADAHA SARE EE XIRIIRKA SHIRWEYNAHA

1. Shirweynuhu waa Hay'adda ugu sarreysa uguna awood badan ee Ururrada Shaqaalaha, waxayna cabbirtaa niyadda, himilooyinka iyo waajibaadka Xiriirka iyo Ururrada Shaqaalaha, waxaana qabanqaabiya isuguna yeera Guddiga Dhexe ee Xiriirka.

   Shirweynuhu wuxuu dhacaa saddexdii sanaba mar. Guddiga Dhexe ee Xiriirku wuxuu awood u leeyahay haddii loo baahdo inuu isugu yeero Shirweyne aan caadi ahayn, waana inuu ajeendada u gudbiyaa xubnaha bil ka hor inta aan la isugu imaanin Shirweynaha, wuxuuna meelmar yahay marka ay joogaan saddex dalool labo ergooyinka Shirka.

2. Shirweynuhu wuxuu tilmaamaa jidka Guud ee Siyaasadda gudaha iyo dibedda ee Xiriirka,isla markaasna, wuxuu oggolaadaa amaba wax ka beddelaa Barnaamijka iyo Xeerka Xiriirka; wuxuu oggolaadaa warbixinta Guddiga Dhexe wuxuuna intaas kaddib doortaa Xubnaha Guddiga Dhexe ee Xiriirka.

3. Shirweynuhu wuxuu ka koobmaa Ergooyinka Ururrada Shaqaalaha, waxaana tiradooda lagu gooyaa fadhiga Guddiga Dhexe ayadoo la tixgelinaayo tirada dadka iyo xaaladda dhaqaale ee Urur kasta iyo Gobol kasta.

### Qodobka 9aad

### GUDDIGA DHEXE

1. Guddiga Dhexe waa Hay'adda ugu sarreysa Xiriirka muddada u dhexeysa labada shirweyne, wuxuuna ka kooban yahay 56 qof oo ka kala imaanaya Guddiyada Fulinta ee Ururrada Shaqaalaha ee Gobollada iyo Shaqaalaweynaha kalaba.

2. Xubnaha G. Dhexe ee matalaya Guddiyada Fulinta ee **Ururrada Shaqaalaha**, waa Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Urur kasta, kuwa matalaya Gobolladana waa Guddoomiyaha Ururka Shaqaalaha Gobol kasta. Xubnaha kale waxaa laga soo dhex xulayaa Shaqaalaha kuwa ugu kacaansan, hawkarsan, qayb wacanna ka soo qaatay dhaqdhaqaaqa Shaqaalaha, dhismaha dalka iyo hirgelinta Barnaamijka XHKS.

3. Guddiga Dhexe ee Xiriirku wuxuu tilmaamaa jidka Guud ee saameeya shaqada Xiriirka, Ururrada iyo Guddiyada Shaqaalaha, wuxuuna fuliyaa go'aannada Shirweynaha. Guddigu wuxuu shiraa sannadkiiba mar, waxaana suuragal ah in uu qaato fadhi aan caadi ahayn waxaana iska leh awoodda isku yeeriddiisa Xoghaynta Guud amaba codsi ka yimaadda Xubnaha Guddiga Dhexe intooda badan.

4. Shirarka Guddiga Dhexe waxaa Shir-Guddoomiye ka noqda Guddoomiyaha Xiriirka.

### Qodobka 10aad

### XILKA IYO AWOODDA GUDDIGA DHEXE

1. Guddiga Dhexe wuxuu doortaa:-

   b) Guddoomiyaha Xiriirka

   t) Xoghaynta Guud ee Xiriirka

   j) Guddiga Anshaxa iyo Baarista

   Wuxuuna mas'uul ka yahay:-

   b) La xisaabtanka Xoghaynta Guud ee Xiriirka iyo kala doodideedda wixii hawl ah oo la xiriira xilkeeda ama ay lagama maarmaan ugu muuqato.

   t) Diyaarinta Xeer-nidaamiyaha Xiriirka Shaqaalaha iyo habeynta habka la-xiriiridda Gobollada iyo dalka dibeddiisaba.

   j) **Kordhinta ama dhimista** waaxyaha ay Xoghaynta

Guud ka kooban tahay hadba sida ay ku habboon tahay.

x) Mideynta Qaabka Dhismaha Ururrada Shaqaalaha iyo nidaamiinta habka hawlgelintooda.

2. G. Dhexe wuxuu awood u leeyahay inuu xiriir la yeesho Ururrada Shaqaalaha Dalalka Dibedda iyo Ururrada Bulshada ee Dalka, wuxuuna la geli karaa heshiisyo ku saabsan iskaashi iyo wax wada qabsi.

3. Wuxuu Guddiga Dhexe fadhiyadiisa hore ku dhammeeyaa tirada Miisaaniyadda (qiyaas ahaan) ee ku saabsan kharajka iyo Maalgelinta loo baahan yahay ayadoo la raacayo Xeerka u degsan Sanduuqa Shaqaalaha Soomaaliyeed.

1. Xoghaynta Guud waxaa doorta gooyana tirada Xubnaha, Guddiga Dhexe waana Hay'adda ugu sarraysa muddada u dhexeysa Shirarka Guddiga Dhexe.

2. Xoghaynta Guud waxay qabanqaabisaa Shiraarkeeda waxayna u Shirtaa si caadi ah toddobaadkiiba mar ama in ka badan; waxaa kaloo ay si joogto ah ula shirtaa Guddiyada Fulinta ee Ururrada Shaqaalaha. Guddoomiyayaasha Ururrada Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay si joogto ah uga qayb galaan Shirarka iyo doodaha Xoghaynta Guud, hase yeeshee, cod kama dhiiban karaan go'aannada.

3. Xoghaynta Guud waxay mas'uul ka tahay:

b) Qabanqaabada fadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn ee Guddiga Dhexe.

t) Fulinta go'aannada Shirweynaha iyo kuwa Guddiga Dhexe waxayna awood u leedahay inay soo saarto awaamiir ay u gudbinayso Ururrada Shaqaalaha iyo kuwa Gobollada.



j) Qoraallada iyo soo saaridda Wargeyska «Codka Shaqaalaha» iyo wixii la xiriira daabacaadda saameysa Shaqaale-weynaha.

x) Magacaabidda iyo qoris Shaqaale lagu fuliyo xilka Xiriirka iyo Ururrada Shaqaalaha.

Qodobka 12aad

## WAAXYAHA XOGHAYNTA GUUD

Waaxyaha Xoghaynta Guud waxay ka kooban tahay 13 Xubnood waxayna kala yihiin :

1. Guddoomiyaha Xiriirka
2. Guddoomiye ku-Xigeenka koowaad ee Xiriirka
3. Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Xiriirka
4. Xoghayaha Arrimaha Maamulka
5. Xoghayaha Xiriirka Dibedda
6. Xoghayaha Abaabulka iyo Kicinta
7. Xoghayaha Aydiyoloojiyada iyo Warfaafinta
8. Xoghayaha Qorshaha iyo Tacabka
9. Xoghayaha Shuruucda iyo Danaha Shaqaalaha
10. Xoghayaha Fanka iyo Isboortiga
11. Xoghayaha Lacagta iyo Dhaqaalaha
12. Xoghayaha Waxbarashada iyo Tababar-Xirfadeedka
13. Xoghayaha Guryaha Shaqaalaha.

Qodobka 13aad

## GUDDOOMIYAHA XIRIIRKA

1. Guddoomiyuhu waa Hoggaanka Sare ee xiriirka waxana doorta Guddiga Dhexe wuxuuna xiriirka wakiil uga yahay sharci ahaan, Hay'adaha Dawladda, Shirkadaha, Ururrada Bulshada Dalka Gudahiisa iyo Dibeddaba

2. Guddoomiyaha waxaa xilkiisu yahay:

b) Inuu habeeyo iskuna xiriiriyo hawlaha Xiriirka Urur-

rada Shaqaalaha iyo kuwa Gobollada.

t) Inuu hoggaamiyo hawlaha taagan ee Xoghaynta Guud, fadhiyada Guddiga dhexe iyo hawsha Guddiga Anshaxa iyo Baarista.

j) Wuxuu si toos ah mas'uul uga yahay xoojinta xiriirka ka dhexeeya Ururrada Shaqaalaha iyo XHKS.

Qodobka 14aad

## GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA KOOWAAD.

Guddoomiye Ku-Xigeenka Koowaad waxaa doorta Guddiga dhexe, wuxuuna qabanayaa jagada Guddoomiyaha marka uu Guddoomiyuhu maqan yahay ama uu xilkiisa gudan kari waayo, wuxuuna Guddoomiyaha wakiil uga yahay arrimaha Siyaasadda, Xiriirka Dibedda, Aydaloojiyada iyo Warfaafinta, Waxbarashada, Tababarrada. Abaabulka iyo Kicinta, Sharciyada iyo Danaha Shaqaalaha, Fanka iyo Isboortiga wuxuuna xiriiriyaa kormeeraana hawlaha xoghayayaasha Xoghaynta Guud u qaabbilsan waxyaabahaas oo iyaga toos ugu xirmaya.

Qodobka 15aad

## GUDDOMIYE KU-XIGEENKA LABAAD

Guddoomiye ku Xigeenka 2aad waxaa doorta Guddiga Dhexe, wuxuuna qabtaa xilka Guddoomiyaha marka ay maqan yihiin ama ay gudan kari waayaan xilkooda Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad. Wuxuu ka kaaliyaa Guddoomiyaha arrimaha la xiriira, Maamulka, Qorshaha iyo Tacabka, Lacagta iyo Dhaqaalaha iyo Guryaha Shaqaalaha, wuxuuna xiriiriyaa hawlaha Xoghayayaasha Xoghaynta Guud u qaabbilsan waxyaabahaas oo isaga toos ugu xirma.

Qodobka 16aad

## WAAXDA ARRIMAHA MAAMULKA

Waaxdani waxay ka kooban tahay Xoghaynta Arrimaha Maamulka oo Xoghaye ka ah iyo xubin kaaliye ah oo ay Xoghaynta Guud ka magacawday Xubnaha Dhexe wuxuuna xilkiisu yahay:



1. Socodsiinta hawlaha Maamulka Xoghaynta Guud.

2. Habeynta iyo faafinta go'aannada iyo awaamiirta Guddiga Dhexe iyo gaarsiintooda Ururrada Shaqaalaha, kuwa Gobollada, Guddiyada Shaqaalaha iyo meelihii kale ee ay khuseeyaan.

3. Qorista. doodaha shirarka Xoghaynta Guud iyo Guddiga Dhexe iyo la-saxeexa Guddoomiyaha buugga qoraalladaas.

4. Ururinta. keydinta. meeleynta galalka hawlkareennada Guddiyada Shaqaalaha, qoraalka shirarka Xoghaynta Guud iyo Guddiga Dhexe. iyo xafidaadda dokumeyntooyinka iyo qoraallada Xoghaynta Guud.

Qodobka 17aad

## WAAXDA XIRIIRKA DIBEDDA

Waaxdani waxay ka kooban tahay Xoghaynta u qaybsan Xiriirka Dibedda oo ka ah Xoghaye iyo xubin kaaliye ah oo ay Xoghaynta Guud ka magacawday Guddiga Dhexe. wuxuuna xilkiisu yahay:-

1. Inuu habeeyo kana shaqeeyo xoojinta cilaaqaadka ka dhexeeya Xiriirka iyo Ururrada Shaqaalaha Caalamiga ah (WFTU) Ururka Dawliga ee Shaqaalaha Carabta (ICATU) iyo Ururka Mideynta Shaqaalaha Afrika (OATUU).

2. Inuu xoojiyo xiriirka dabaqiga ah ee Ururrada Shaqaalaha ee dalalka Hantiwadaagga ah iyo Ururrada Shaqaalaha Horusocodka ah ee Dalalka kale.

3. Inuu socodsiiyo hawlaha dibedda ee Xiriirka u gaarka ah, asagoo u habaynaaya ka qaybgalka Shaqaalaha Jamhuuriyadda Shirarka Shaqaalaha ee Caalamiga ah.

4. Inuu abaabul adag u dhigo isku xirnaanta Xiriirka Ururrada Shaqaalaha iyo Shaqaalaha Soomaaliyeed ee Dibedda ka xoogsada.

5. Inuu la socdo xaaladda nolosha, duruufta shaqada iyo badbaadada Shaqaalaha Dibedda ka xoogsada, una lebiyo akhbaarta dalka guud ahaan iyo dhaqdhaqaaqa Shaqaalaha Soomaaliyeed.

### Qodobka 18aad

### WAAXDA ABAABULKA IYO KICINTA

Waaxdu waxay ka kooban tahay xoghaye u qaybsan Abaabulka iyo kicinta iyo xubin kaaliye ah oo ay Xoghaynta Guud ka magacawday xubnaha Guddiga Dhexe, wuxuuna xilkiisu yahay:-

1. Abaabulka, kicinta iyo xaamaasad-gelinta shaqaalaha
2. Qorshaynta, la-socodka iyo kormeerka shaqooyinka Qaranka ee lagu fuliyo habka Iskaa Wax u qabso.
3. Diyaarinta Hawlkareennada ku caan baxay Hawlaha Qaranka
4. Qabanqaabinta iyo abaabulka Bannaanbaxyada Shaqaaluhu sameeyaan, markay munaasabadi jirto.
5. Xiriirka Gobollada iyo Degmooyinka
6. Xiriirka Xisbiga iyo Ururrada Bulshada.

### QODOBKA 19aad

### WAAXDA AYDOLOOJIYADA IYO WARFAAFINTA

Waaxdani waxay ka kooban tahay Xoghaye u qaybsan Aydolocjiyada iyo Warfaafinta oo ka ah Xoghaye iyo xubin kaaliye ah oo ay Xoghaynta Guud ka magacowday xubnaha Guddiga Dhexe wuxuuna xilkiisa yahay:-



1. Baahinta iyo fidinta Siyaasadda Xiriirka iyo Ururrada Shaqaalaha.
2. Ka-dhaadhicinta Shaqaalaweynaha guud ahaan iyo dadweynaha ahmiyadda ay leeyihiin iyo kaalinta ay Ururrada Shaqaaluhu kaga jiraan dhismaha dalka guud gaar ahaanna darveelka danaha Shaqaalaha
3. Ku-abuuridda shaqaalaweynaha shucuurta shaqaalanimo iyo la dagaallanka waxyaabaha foosha xun ee Bulshada dhibaato iyo kadeed u soo jiidaya.
4. La-xiriirka farsamooyinka warfaafinta Shaqaalaha sida: Wargeyska «Codka Shaqaalaha». Madbacadda, Filimada, Masawirrada iwm.
5. La-Socodsiinta Shaqaalaweynaha dhaqdhaqaaqyada maalin walba ka socda Shaqaalaweynaha Adduunka.
6. Abaabulka hawlaha ku saabsan xulitaanka, diyaarinta iyo kala qaybinta kaadarka Shaqaalaha.
7. Kor u qaadidda garaadka siyaasiga ee Shaqaalaweynaha, baaridda iyo faafinta mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ah.
8. Ka hortagga dacaayadda imberiyaaliyadda iyo dibusocodka Liddiga ku ah mabaadi'da hantiwadaagga cilmiga ah;
9. U hiilinta iyo garabsiinta xagga qoraallada iyo afkaarta dhaqdhaqaaqyada horusocodka ee adduunka iyo dhaqdhaqaaqa Gobannimadoonka.
10. Ka qaybqaadashada hirgelinta «Kacaanka Aqoonta» iyo la dagaallanka caadooyinka haaraaga ah iyo afkaarta gurracan ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin mabaadi'da hantiwadaagga, aqoonta iyo siyaasadda kacaanka, sida Qabiilka. Gobolleysiga, Eexda, boroqraadinnimada, quraafaadka, laaluushka, shaqo nacaybka, iwm.

Qodobka 21aad

## WAAXDA SHURUUCDA IYO DANAHA SHAQAALAHA

Waaxdani waxay ka kooban tahay Xoghayaha u qaybsan shuruucda iyo Danaha Shaqaalaha oo Xoghaye ka ah iyo xubin kaaliye ah oo ay xoghaynta Guud ka magacawday xubnaha Guddiga Dhexe, wuxuuna xilkiisu yahay:-

1. La-socodka Shuruucda dalka u degsan iyo kuwa had iyo jeer soo baxa gaar ahaan kuwa danaha Shaqaalaha saameeya.
2. Diyaarinta, soo jeedinta iyo lafagurka shuruucda saameysa dhaqaalaha.
3) La-xiriirka iyo ku xirnaanta hay'adaha shuruucda iyo maamulka arrimaha Shaqaalaha iyo Bulshada ee Dalka.
4) La-socodka iyo wax ka qabadka guud ahaan arrimaha ku saabsan danaha Shaqaalaha.

Qodobka 22aad

## WAAXDA WAXBARASHADA IYO TABABAR XIRFADEEDKA

Waaxdani waxay ka kooban tahay Xoghaye u qaybsan Waxbarashada iyo tababar-xirfadeedka oo xoghaye ka ah iyo xubin kaaliye ah oo ay Xoghaynta Guud ka magacawday xubnaha Guddiga Dhexe, wuxuuna xilkiisu yahay:

1. Ciribtirka jahliga siyaasiga ah iyo wax qoris akhris la'aanta Shaqaalaweynaha dhexdiisa.
2. Inuu Tababarro iyo Seminaarro joogta ah oo kala duwan dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba u qorsheeyo shaqaalaweynaha.
3. Inuu doodo isweydaarsi ah had iyo jeer u qabanqaabiyo Ururrada Shaqaalaha iyo Guddiyada Gobollada.



4. Inuu fidiyo aqoonta guud ahaaneed iyo tan xirfadeed ee Shaqaalaha iyo Beeraleyda, ayadoo loola jeedo in la abuuro Shaqaale iyo Beeraley aqoonsan ahmiyadda farsamada iyo qiimaha waxbarashada.
5. Diyaarinta kaadarka Shaqaalaha.

Qodobka 23aad

## WAAXDA FANKA IYO ISBOORTIGA.

Waaxdani waxay ka kooban tahay Xoghaye u qaybsan fanka Isboortiga oo Xoghaye ka ah iyo xubin kaaliye ah oo ay Xoghaynta guud ka magacawday Guddiga Dhexe, wuxuuna xilkiisu yahay:

1. Inuu Shaqaalaha ku fidiyo fanka iyo suugaanta horusocdka ah.
2. Inuu Ururrada Shaqaalaha u qabanqaabiyo Ciyaaraha Isboortiga oo nooc kasta ah sida: kubadda cagta, Laliska iyo Koleyga, Dabaasha, Orodka, Xarig-jiidka, Ciyaaraha Fudfudud, iwm.
3. Qabanqaabada Riwaayadaha iyo Maadeysyada.

Qodobka 24aad

## WAAXDA LACAGTA IYO DHAQAALAHA

Waaxdani waxay ka kooban tahay Xoghaye Lacagta iyo Dhaqaalaha oo Xoghaye ka ah iyo xubin kaaliye ah oo ay Xogheynta Guud ka magacawday Guddiga Dhexe, wuxuuna xilkiisu yahay:-

1. Uruurinta iyo kaydinta dakhliga Xiriirka.
2. Maamulka kharajka iyo xisaabaadka Xiriirka
3. Diiwaangelinta, dayactirka, xannaanada iyo ilaalinta hantida Xiriirka.

4. Inuu kala taliyo Xoghayayaasha Lacagta iyo Dhaqaalaha ee Ururada Shaqaalaha iyo kuwa Gobollada xagga habka maamulka Sanduuqa Shaqaalaha iyo abuurista ilo dhaqaale oo cusub.
5. Maamulka Sanduuqa Dhexe ee Shaqaalaha
6. Inuu tilmaamo tabaha ugu fiican ee lagu maalgelin karo hantida Xiriirka

Qodobka 25aad

GUDDIGA ANSHAXA IYO BAARISTA

1. Guddiga Anshaxa iyo Baarista waxaa doorta Guddiga Dhexe, magacaabana Guddoomihiyiisa iyo Xoghayihiisa, wuxuuna ka kooban yahay 5 (shan) xubnood si toosana wuxuu ula shaqeeyaa Guddoomiyaha Xiriirka.
2. Guddigu wuxuu mas'uul ka yahay:
   b) Fulinta Barnaamijka u degsan Kormeeridda Ururrada Shaqaalaha
   t) La-socodka hawlaha Guddiyada Kormeeridda ee Shaqaalaha.
   j. Wax ka-qabashada dhibaatooyinka ka dhasha hawlwadeennada Ururrada iyo fududeynta dhibaatooyinka ka horyimaada kormeerka.
   x) U soo gudbinta Guddoomiyaha Xiriirka ama Ururrada Shaqaalaha talooyin ku saabsan anshaxmarinta qofka ka tallaabsada hawlaha iyo Barnaamijka Guddiga Anshaxa iyo Kormeerka.
   kh) Qabanqaabinta Guddiyada Kormeerka dabeecadda iyo ilaalinta sicirka alaabta.

Qodobka 26aad

WAAXDA GURYAHA SHAQAALAHA

Waaxdani waxay ka kooban tahay Xoghaye u qaybsan Guryaha Shaqaalaha oo Xoghaye ka ah iyo xubin kaaliye ah



oo ay Xoghaynta guud ka magacawday Guddiga Dhexe, wuxuuna xilkiisu yahay:

1. Maamulka guud ee Guryaha Shaqaalaha, dayactirkooda, ijaarkooda, xannaanada qalabkooda, shaqaalahooda iwm.
2. Inuu u diyaariyo qorshe dhismo Guryo Shaqaale ee cusub oo lagu baahi tiro dhibaatada hoy-yaridda taagan, asagoo la kaashanaya Xoghayaha Qorshaha iyo Tacabka ee Xiriirka.
3. Inuu la socdo, kormeero, warbixinno iyo talooyinna ka soo jeediyo xaaladda guud ee kirooyinka guryaha shaqaalaha iyo dadweynaha fulitaanka Sharciga kirada Guryaha.
4. Inuu la socdo hubiyana hirgelinta go'aankii Shirweynaha 1aad ee Ummadda 1975, iyo kii Kalfadhigii 3aad ee Golaha Dhexe XHKS ee faraayey dhammaan Hay'adaha Dawladda iyo Shirkadaha gaarka ah in ay shaqaalahooda u dhisaan Guryo.

Qodobka 27aad

XIL GUDASHO LA'AANTA

1. Qofkii ka mid ah Guddiga Dhexe, Xoghaynta Guud, ama Guddiga Anshaxa iyo Baarista oo ka fariista xilka ama laga fariisiyo, waxaa Xoghaynta Guud awood u leedahay inay si kumeel-gaar ah jagadaas u buuxiso, ansaxidna u weydiisato Xubnaha Guddiga Dhexe intooda badan (ama qoraal ama shir).
2. Guddoomiyaha Xiriirku haddii uu xilkiisa gudan waayo geeri ku timid awgeed, jirro ama uu ka fariisto waxa xilkiisa si toosa ula wareegaya Guddoomiye Ku xigeenka 1aad ee Xiriirka kumeel gaar ahaan.

   Xoghaynta Guud waa inay isugu yeertaa fadhi aan caadi ahayn Guddiga Dhexe muddo 30 beri gudahood si loo doorto Guddoomiye cusub.
3. Qofkii ka mida Guddiga Fulinta ee Ururrada iyo Gud-

divada Ururrada Shaqaalaha oo xilkiisa ka soo bixi waaya waxa Xoghaynta Guud awood u leedahay inay buuxiso jagadaas xubin u qalanta, ayadoo tixgelinaysa talada Xubnaha hoggaaminta Ururrada Shaqaalaha ee uga hooseeya hawshaas.

### Qodobka 28aad

### DHISMAHA XIRIIRKA GUUD EE URURRADA SHAQAALAHA EE GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

Dhismaha Xiriirku wuxuu u qaybsamaa sida soo socota:

1. Guddiga Ururka Shaqaalaha ee Gobolka:
2. Guddiga Ururka Shaqaalaha ee Degmada:
3. Guddiga Ururka Shaqaalaha . ee Tuulada:
4. Guddiga Ururka Shaqaalaha ee Xaafadda;

### Qodobka 29aad

### URURRADA HOOSE EE XIRIIRKA GUUD

Guddiyada Xiriirka ee Gobollada iyo Degmooyinka ayagoo ku shaqaynaya Barnaamijka iyo Xeerka Xiriirka, waxay ka qabtaan hawlaha soo socda:-

1. Hawlaha la xiriira siyaasadda iyo abaabulka, fulinta go'aannada hay'adaha sare ee Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha. Kicinta, hawlgelinta iyo xamaasad-kuberidda Shaqaalaha.
2. Tusmeynta qorshe kordhin dhaqaale iyo wax soo saar oo shaqaalaha lagu hawlgeliyo.
3. Guddiyada Ururrada Shaqaalaha ee Gobolladu waxay toos ugu xiran yihiin Xoghaynta Guud.



### Qodobka 30aad

### XUBNAHA HOGAAMINTA URURRADA SHAQAALAHA EE GOBOLLADA

Hay'adda ugu sarreysa ee Ururka Shaqaalaha ee Gobolku waa shirka Ururka Shaqaalaha muddada u dhexeysa labada Shirweyne.

Shirka Ururka Shaqaalaha ee Gobolka waxaa qabanqaabiya isuguna yeera Guddiga Ururka Shaqaalaha ee Gobolka labadii sanaba mar: wuxuuna falanqeeyaa arrimaha kala duwan ee la xiriira, wuxuuna doortaa Guddiga Ururka Shaqaalaha ee Gobolka.

Guddiga Ururka Shaqaalaha ee Gobolku wuxuu doortaa Guddiga Fulinta iyo Wafdiga uga qeybgelaya Shirweynaha Xiriirka. Guddiyaasha la doortay waxaa oggolaada Guddiga Dhexe ee Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha, waxaana laga diiwaan geliyaa Xarunta Dhexe.

Guddiga Ururka Shaqaalaha ee Gobolku wuxuu shiraa 1taa biloodba mar.

### QODOBKA 31aad

### XUBNAHA HOGGAAMINTA URURRADA SHAQAALAHA EE DEGMOOYINKA

Hay'adda u sarreysa ee Guddiyada Ururka Shaqaalaha ee Degmooyinka waa Shirka Ururka Shaqaalaha ee Degmada oo la qabto 2dii sanaba mar, inta ka horreysa Shirka Ururka Gobolka; wuxuuna dhegeystaa warbixinta Guddiga Shaqaalaha ee Degmada, Tuulooyinka iyo Xaafadaha.

Wuxuu darsaa arrimaha kala duwan ee saameeya dhismaha Shaqaalaha, Siyaasadda iyo danaha Shaqaalaha, wuxuu doortaa Guddiga Ururka Shaqaalaha ee Degmada. Guddiga Ururka Shaqaalaha ee Degmadu wuxuu doortaa Guddiga Fu-

Guddiga Degmada waxaa oggolaada Guddiga Ururka ee Gobolka waxaana laga diiwaan geliyaa Gobolka iyo Xarunta Dhexe.

Duddiga Degmadu wuxuu fadhi yeeshaa ugu yaraan bishiiba hal mar.

Qodobka 32aad

## XEER NIDAAMIYE


Qaabka dhismaha habka maamulka iyo mideynta hawlqabadka Guddiyada Ururrada Shaqaalaha iyo hawlwadeennada, wixii aan ku caddayn Xeerkan, wuxuu G. Dhexe awood u leeyahay in uu ka soo saaro Xeer-Nidaamiye lagu socodsiiyo Shaqada muddada u dhexaysa labada Shirweyne.



Burrus iyo Yaambay Shaqaaluhu gacan ku sitaan marna Bnuduqey wataan oo dalkoodey daafacaan.




Way ka qayb qaataan Shaqaaluhu talooyinka lagu horumrinayo dalka.



Doodo iyo tababarro isdabajoog ah ayaa loo qabanqaabshaa shaqaalaha soomaaliyeed si tayadooda iyo wax soo saarkoodu kor ugu kaco.




Shaqaalaha Soomaaliyeed waa hubiyeyaasha horumarka dhaqaale ee dalka, waana gaashaanka ka daafacaya dalka cadawga ku soo duula.






Mar waxbay bartaan Shaqaaluhu, oo doodey sameeyaan, marna warshadahey joogaan, dhididkoodey dahab u beddelaan dhaqaale horumarsan ayay doonayaan.





Mar kastaba shaqaaluhu wuxuu ka doodaa darsaana Xeerka, Barnaamika iyo go'aannada X. H. K. S.



Garaad weyn ee siyaasadeed ayaa Shaqaalaha Soomaaliyeed uu muujiyay. Mahad waxaa ku leh arrintaas Kacaankii Oktoobar ee 1969kii.



## DIB U CUSBOOSAYSIINTA DHISMAHA XIRIIRKA SHAQAALAHA SOOMAALIYEED

### MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad, tan 2aad iyo midda 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969:

ISAGOO ARKAY Shareiga lamb. 40 ee 26 Maarso 1972

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 19 ee 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan ku wareejin Xukunka iyo awoodda Dalka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed:

ISAGOO ARKAY Horukaca uu gaaray Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed xagga garaadka Siyaasiga. qaabka dhismaha. abaabulka iyo firfircoonida uu ka muujiyey Shirarka iyo hawlaha heer Qaaradeed, heer Gobol iyo heer Caalami intaba:

ISAGOO TIXGELINAAYA Guulihii waaweynaa uu Kacaanku ka gaaray abaabulidda iyo diyaargareynta hawlkareen Shaqaalaha diyaar iyo daacadba u ah ku hoggaaminta hawlaha iyo xilka Ururrada Shaqaalaha ruuxa Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Falsafadda Kacaanka 21 Oktoobar 1969:

ISAGOO AQOONSADAY In ay tahay lagamamaarmaan in dib loo habeeyo Barnaamijka, Xeerka iyo Qaabka Dhismaha Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed si uu u noqdo mid qaab iyo dhuux ahaanba ugu habaysan fulinta Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo gudashada waajibaadka laga filsaaray xilligaan cusub:

MARKUU DHEGEYSTAY Go'aankii Golaha Wasiirrada:
MARKUU ARKAY Oggolaanshaha Guddiga Siyaasiga ee Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

## WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA:

### Qodobka 1aad

Marka laga billaabo 11ka Jannaayo 1977ka waxaa dib loo habeeyey Dhismaha Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

### Qodobka 2aad

Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed Xaruntiisu waxay noqonaysaa Muqdisho. wuxuuna sa furan karaa laamo Gobollada, Degmooyinka, Tuulooyinka iyo Xarumaha Shaqada oo dhan.

### Qodobka 3aad

Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed isagoo fulinaya Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ayaa hawlihiisa ugu waaweyn oo loo xilsaaray noqonayaan kuwa soo socda:-

1. Difaaca Waddanka iyo ilaalinta guulihii Kacaanka 21ka Oktoobar 1969. isagoo tixgelinaaya dhibaatooyinkii Dalka yiilley Kacaanka ka hor gaar ahaan kuwii haystay Shaqaalaha iyo sidii uu Kacaanku ugu hawlgalay xallintooda.
2. Kordhinta tacab soo saarka, xannaaneynta iyo ilaalinta hantida Ummadda. daryeelidda. badbaadinta iyo horumarinta danaha Dadweynaha iyo Shaqaalaha Soomaaliyeed.
3. U hoggaansanka. adkaynta iyo ilaalinta Shuruucda Dalka iyo Go'aannada Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo kor u qaadidda garaadka Siyaasiga, aqoonta farsamada iyo Xirfadda Shaqaalaha.
4. Ururinta iyo mideynta Shaqaalaha meel ka wada shaqeeya, kuwa shaqadoodu isku dabeecadda tahay iyo guud ahaan Shaqaalaha Soomaaliyeed. si loogu kasmo shaqaalennimo, shaqo jacayl iyo Dishibliin adag.
5. La dagaallanka cadawga Ummadda. Mabda'a Kacaanka iyo caadooyinka gurracan sida anshaxa iyo asluubxumida bulshada, dhaqan rogga hiddaha iyo astaanta soomaalinnimo. iwm.
6. Isku xiridda shaqaalaha Soomaaliyeed iyo shaqaalaha dalalka Hantiwadaagga ah iyo Ururrada Shaqaalaha ee Horusocodka ah ee Adduunweynaha.
7. Abuuridda saldhig Dhaqaale lagu fulinaayo laguna horumarinaayo hawlaha iyo Dhaqdhaqaaqa Ururka Dalka gudihiisa iyo dibeddaba iyo abaabulidda shir kulammo iyo Aqoon-is-weydaarsi, iwm.
8. Ka qayb qaadashada ku habaysan maskax caddaaladeed. sinnaan iyo hufnaanba maamulka Dawladda. talada wax soo saarka iyo kormeerka goobaha si uu xogogaal ugu noqdo habka iyo heerka fulitaanka qorshaha Qaranka iyo hirgelinta Barnaamijka Xisbiga.

### Qodobka 4aad

Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu abaabulaa hawlihiisa. wuxuuna yeelanayaa Barnaamij iyo Xeer muujinaaya himilada iyo ujeeddadiisa guud. qaabka dhismihiisa iyo habka maamulka arrimahiisa oo tixgelinaaya isbeddelka guud ee Dalka ka dhacay curashadii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka soomaaliyeed kaddib, kuna ballanqaadi kara fulinta Barnaamijka Xisbiga iyo ka lib keenidda himiladiisa dambe oo ah dhismaha Bulsho cusub oo Hantiwdaag ah.

### Qodobka 5aad

Xubnaha Xoghaynta Guud ee Xiriirka Ururrada shaqaalaha. Xubnaha Guddiyada Fulinta ee Ururada shaqaalaha iyo Guddoomiyayaasha Guddiyada shaqaalaha ee Gobollada waxay u gacan banaan yihiin xilka iyo hawlaha la xiriira Dhaqdhaqaaqa iyo Abaabulka iyo Ururrada raacsani waxba iska dhimi mayso xaaladdooda dhaqaale iyo horukacaba oo sidoodii hore ayey ugu tiirsanaan doonaan Hay'adihii ay ka shaqaynayeen.

### Qodobka 6aad

Xiriirka Ururrada shaqaalaha waxay ku yeelanayaan Wasaaradaha, Wakaaladaha, Warshadaha, Shirkadaha iyo Laamaha Madaxtooyada J.D.S. Xarumaha Mashaariicda dhismaha

iyo meel kastoo laga shaqeeyo Guddiyaal shaqaale oo ka fulinaaya goobahooda Barnaamijka iyo Xeerka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

- Hab abaabuleedka iyo qaabka dhismaha Guddiyaasha waxaa lagu caddeyn doonaa barnaamijka iyo Xeerka Gudaha Urrurrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Qodobka 7aad

Guddiyada Shaqaaluhu waxay awood u leeyihiin in ay si buuxda uga qayb galaan wax soo saarka iyo Maamulka Hay'adaha ay ka tirsan yihiin Gaar ahaan waxay awood u leeyihiin in ay:

1. Si joogto ah uga qayb galaan Guddiyada qandaraaska, qorshaha tacabka iyo fulintiisa iyo diyaarinta Miisaaniyadda sannadka ee Hay'adahooda.
2. Si wax ku ool ah uga mid noqdaan Guddiyada Diisibiliinka, Dallacaadda, Abaalmarinta, Kormeerka, Tababarada iyo deeqaha Waxbarashada, Qorista, Dhimista, Beddelaadda iyo kala qaybinta Shaqaalaha, sameyska Meeleynta iyo wax kasta oo la xiriira nolosha iyo maamulka Shaqaalaha iyo horumarinta Shaqada intaba.

Qodobka 8aad

Xeer hoose oo lagu sii faahfaahinaayo Sharcigan laguna horumarinaayo hirgelintiisa, waxaa soo saari doona Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 9aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda Sharcigan ama aan la socon karin ujeeddadiisa waa la baabi'iyey.

Qodobka 10aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynuhu waxaana lagu soo saarii doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

**Muqdisho, 3 Febraayo 1977.**

W/S MADAXWEYNAHA JSD,
Jaalle Maxamed Siyaad Barre



## BARNAAMIJKA URURKA DIMOQRAADIGA HAWEENKA SOOMAALIYEED.

Socodka Taariikhdu waxay maraysaa Qarnigii 20aad Rubicii ugu dambeeyey, wuxuuna ahmiyad iyo qiimo gaar ah u leeyahay dadyowga iyo dabaqadihii dulmanaa, kuwaasoo ka xoroobay gunnimadii iyo isku dulnoolaadkii lagu hayey.

Waxaannu maraynaa casri maamulka ay gacanta ku dhigeyaan xoogsatada, casri ay horseednimada Dunida isaga soo horjeedaan laba hab oo dhaqan-dhaqaale. Qarnigani wuxuu caan ku noqday oo lagu magacaabay casrigii Kacaannada oo ah kuwa saameeya Xiriirka Bulshadeed iyo Aqoon iyo Teknoloojiyada intaba.

Inkastoo ay kacaamo bulshadeed meelo badan oo dunida ahi ka curteen, cilmiguna uu noo awood siiyey sahminta hawada sare, ka baadi goobka Xiddigaha Cirka nolol aadamigu u qalanta, haddana waxaa weli jira dhibaatooyin badan oo aan weli xallin quman loo helin, kuwaasoo ay ka mid tahay dhibaatada haysata Haweenka oo Dadka Dunida ku nooli kala baroo bar ay iyagu yihiin.

Laga bilaabo markay Bulshadu u qaybsantay mid wax leh iyo mid aan wax lahayn, Haweenku waxay ahaayeen kuwa loogu liidka badan yahay oo aan ka duwanayn hantida ragga tirsanayo, waxaana la dafiray kaalintii ay kaga jireen beddelaadda dabeecadda iyo halganka nolosha.,

Waxaa la billaabay in iyaga iyo dhallaankooduba la dhiigmiirto, waxaana halkaas ka dhashay Haweenkii oo ka welwada sare, ka baadi goobka Xiddigaha Cirka nolol aadamiga waxaana ku abuurmay dhaqdhaqaaq, xammaasad iyo ruux halgan iyaga oo garabsanaya Dadka u dagaallama had iyo jeer xuquuqda Aadamiga.

Culimadii waddada u sii xaartay, bilowdayna afkaarta Hantiwadaagga Cilmiga ah, ayaa dhab ahaan u deristay in Haweenku yihiin cudud aan la dafiri karin, waxayna caddeeyeen: «Bisaylka Bulsho kasta waxaa muujiya heerka ay ka taa-

gan tahay tixgelinta xuquuqda Aadamiga.

Aragtida Hantiwadaagga waxay qabtaa in aan guul laga gaari karin dhismaha Bulshada cusub haddii aan Haweenka loo helin xurnimo buuxda.

Habkii dhaqan-dhaqaale ee dunida soo martay oo mid walba la soo baxayey horusocodnimadiisa uu kan kale kaga horusocodsanaa, is-beddelladaas waxaa saldhig u ahaa wax soo saaridda maadiga ah iyo koritaanka garaadka Siyaasiga ee Bulshada, Haweenkuna iyagoo u arkaya inay yihiin saldhigga nolosha berrito iyo aayatiinka dambe ee is-beddelkeeda Bulshadaas, waxay halgan qaraar kula jireen Dabaqadihii wax dulmayey ee Hababkii Dhaqan-dhaqaale. is-addoonsigii Dhulgoosigii, Hantigoosigii, goob kasta iyo Shir kastana waxay uga doodi jireen kana soo jeedin jireen fikradahooda lidka ku ahaa Dabaqadihii wax dhiigmiiranayey ee hakinayey socodka Taariikhda iyo Horumarka Bulshooyinkaas ay hayaanka u ahaayeen.

Shirweynihii Shaqaalaha Adduunka ee lagu qabtay magaalada Baariis 1872kii. waxaa fikrad ka soo jeedisay gabar la yiraahdo Kalaara Zetkiin waxayna codsatay in Shirweynuhu uu soo saaro go'aan loo aqoonsado Haweenka xuquuq la siman midda ragga.

8dii Maarso 1910kii ayaa Haweenku gaareen guushii ugu weyneed halgankooda, waxayna qabteen Shirkoodii ugu horreeyey ee lagu dhigay magaalada Kobanheegan: oo ay ka soo qayb galeen Wufuud ka socotay Ururrada Haweenka Horusocodka ee Dunida, waxaana la isku raacay in ay noqoto loona aqoonsado 8da Maarso Maalintii Haweenka Adduunka.

Go'aannadii Shirkaas ka soo baxay waxay ku baaqayeen in kor loo qaado Aqoonta Haweenka, in la kordhiyo lana xoojiyo ka qayb galka Haweenka hawlaha Bulshada iyo Siyaasadda Adduunka, in ay si muuqata uga qayb qaataan dagaalka ay Xoogsatadu kula jiraan rajciyadda iyo Hantigoosiga, una halgamaan Sinnaanta iyo xuquuqda Aadamiga ay leeyihiin.

8da Maarso waa Maalin weyn oo Dunidoo dhan laga xuso, waa Maalin astaan u ah billowga guushii ay soo hooyeen Dumarka ifka ku nool markaa oo la aqoonsaday xaqoodii muddada dheer la duudsiiyey.

Haweenka Adduunka halgankoodu wuxuu ahaa mid aan kala go' lahayn, Sanadihii 1915-1972kii waxaa la qabtay Shirar fara badan oo Haweenka Horusocodka ahi kaga xaajoonayeen danahooda, 30meeyadii Qarnigan Labaatan markii fashiismadii ka dhalatay dalalka qaarkood, Haweenku waxay ka qayb galeen dagaalkii lagaga hortagayey. waxay ka mid ahaayeen xoogaggii cuuryaamiyey Hantigoosigii iyo fashiismadii oo doonayey inay majaxaabiyaan Ummadihii Horusocodka ahaa ee Dunida waqtigaas, waxaa ku xigay in dagaalkii labaad ee Dunida intuu socday ay Haweenku abaabuleen Ururro hor leh si kaalintooda ay uga qaataan ciribtirka fashiismada, gumeysiga, Hantigoosiga iyo dagaalka gardarrada ah.

Waxaa lagu aasaasay bishii Noofember 1945kii Magaalada Baariis Ururka Haweenka Mimuqraadiga Adduunka (WIDF). Duluceda iyo ulajeeddada Ururkaas wuxuu ahaa in si wadajir ah Haweenka Adduunka ay ugu halgamaan, uguna qayb galaan burburinta fashiismada, xoogaggii gumeysiga iyo dibusocodka iyo inay kaalin buuxda ka qaataan nabadda, deganaanshada, daafacaan xuquuqda Sinnaanta iyo Dhaqaalaha Haweenka iyo xoojinta isbahaysiga iyo wax wada qabashada ka dhexeeya Haweenka Adduunweynaha ku kala baahsan.

Maantadatan waxaa ku jira Ururka WIDF in ka badan 250 (Malyuun) oo Haween ah oo ay abaabuleen Ururrada ka kala socda in ka badan 100 waddan, wuxuuna mideeyaa iyadoon loo fiirin midabka, qowmiyadda, Diinta, siyaasadda Haweenka Adduunka ku nool oo dhan.

Qodobbada aasaasiga ah ee Ururka Haweenka Dimuqraadiga Adduunka-UHDA- (WIDF) waxaa ka mid ah:-

1. In la mideeyo Haweenka Adduunka.

2. In la mideeyo danaha ka dhexeeya Haweenka adduunka.

3. In dagaal cad lagu qaado, lana dabargooyo gumeysiga iyo Imberyaaliyadda.

4. In loo galo nolol horusocod iyo aayatiin wacan leh.

5. In la aqoonsado lana dhowro xuquuqda Haweenka.

Halganka iyo dagaalka cad oo Haweenka Adduunku soo galeen wuuxuu gaarsiiyey inay qayb libaax ka qaataan halganka ay dadwoyga Adduunku kula jiraan gumeysiga cusub, Imberyaaliyadda, iyagoo la kaashanaya Urурrada Caalamiga ah, sida Golaha Ummadaha Midoobay, waxaana loo aqoonsadey Sannadkii 1975 (SANNADKII Haweenka Adduunka), taa oo ahayd in la abaabulo ololе ballaaran oo lagu baraarujina yo Haweenka, lagu daryeelayo xuququdooda, laguna hirgelinayo Caddaaladda iyo Sinnaanta Aadamiga.

Qaaradda Afrika iyo dunida Carabta waxay ka mid yihiin Qaaradaha, iyo Dalalka gumeysigu dib u dhaca weyn ku riday xagga Dhaqaalaha, Siyaasadda iyo Bulshada, welina uu u hanqal taagayo inuu ku soo rogaal celiyo, isagoo ku soo gabbanaya wejigiisa ah gumeysiga cusub.

Dadyowga Afrika iyo Carabtaba waxay dagaal qaraar oo aan kala go' lahayn kula jiraan gumeysiga, gumeysiga cusub iyo Imberyaaliyadda Caalamiga waxayna u halgamayaan siday Qaaradda Afrika uga xoroobi lahayd xagga Dhaqaalaha, Siyaasadda iyo Bulshada.

Dagaalkaas isaga ah waxay Haweenka Afrika iyo Carabta ee horusocodka ahi uga jiraan safka hore, iyagoo ka soo horjeeda Imberyaaliyadda Caalamiga iyo xoogagga dibusocodka ah.

Ka hor intii Dadyowga Afrika iyo Dunida Carabta Gobannimadooda aanay gaarin, Haweenka Afrika iyo kuwa Carbeedba waxay ahaayeen kuwo aad uga xaqiran, xagga ka qayb galka Siyaasadda, Waxbarashada, Dhaqaalaha, iwm. Haweenka kuma aanay lahayn Mujtamaca wax xuquuq ah, loomana aqoonsanayn kamana ay qayb qaadan jirin hawlaha lagu horumarinayo Waddanka, hase yeeshee doorkoodu wuxuu ku ekaa hawlaha Guriga oo kaliya.

Gobannimada kaddib, Haweenka Carabta iyo kuwa Afrika, gaar ahaan kuwa Horusocodka ah, waxay gaareen xuquuq la siman tan ragga, waxay ka qayb galaan wax soo saaridda, Waxbarashada, doorashada, jagooyinka sare ee Maamulka iyo difaaca Dalkooda.

Dhaqdhaqaaqyada Gobannimadoonka ee Dunida Carabta iyo waddammada Afrika ee aan weli gaarin xornimadooda, Haweenku waxay qayb weyn ka qaataan dagaalka joogtada ah oo lagu baadi goobayo madaxbannaanida iyo xurnimo buuxda, Waxaan la illoobi karin oo xusid mudan halganka adag oo ay ku jiraan Haweenka Falastiin, Naamiibiya, Simbaabwe, Suud Afrika oo aannu hubno in ay ka libkeeni doonaan gumeysiga, Sahyuuniyadda iyo midabtakoorka foosha xun, kuna soo biiri doonaan iyagoo xur ah safka xoogagga Dimuqraadiga ee jecel Midnimada iyo Nabadda Adduunka.

Haweenka Soomaaliyeed sida Haweenka Adduunweynaha waxay soo galeen Halgan Taatiikhi ah oo soo taxnaa muddo dheer. Halganka Haweenka Soomaaliyeed wuxuu ku leeyahay astaan aan tirtirmeyn Taariikhda Bulshada Soomaaliyeed.

Haddaan dib u raacno Taariikhda Ummadda Soomaaliyeed oo aasaaskeedu ka soo unkamay nolosha Miyiga oo ahayd mid aad u adag ma suurto gasheen haddii aan Haweenka Soomaaliyeed ahayn kuwii majaraha u hayey, taas oo si cad uga muuqatay nolosha Qoyska Soomaaliyeed ee Reer Miyiga, ha ahaato xagga Dhaqaalaha, Shaqada, Xannaanada Qoyska, Dhismaha iyo Qalabka Guriga, Xannaanada Xoolaha iyo dhan kastoo noloshaas ku taxalluqa.

Soomaaliya waxay ahayd weligeed Ummad gumeysiga neceb, taasoo tilmaan cad ka bixineysa Kacaannadii is-dabajoogga ahaa oo ay Ummadda Soomaaliyeed tan iyo Maalintii ugu horreysay gumeystuhu cagaha soo dhigtay ayey dagaal qaraar ku qaadeen iyadoon u kala harin taliska gumeysiga, kaddib markii ay xaqiiqsadeen in ay xornimadooda halis ku jirto, waxayna weligood heegan u ahaayeen difaaca iyo badbaa-

dinta Midnimada iyo Xornimada Soomaaliyeed.

Halganka Gobannimadoonka Soomaaliyeed wuxuu ka mid ahaa una xirnaa halgannadii Gobannimadoonka ee Ummadaha Reer Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ay ugu jireen si ay u soo dhacsadaan Gobannimadooda.

Taariikhda halganka Gobannimadoonka Soomaaliyeed marxalado kala duwan ayey soo martay hadbana heer ayey joogtay, hase yeeshee waxay ahayd mid aan kala go' lahayn, gumeystaha marnaba uma suura gelin inuu Dalka Soomaaliyeed nabadgelyo iyo xasillooni ku xukumo.

Haddaba waxaa marna been laga sheegi karin lana qarin karin kaalintii ay Haweenka Soomaaliyeed ka soo qaateen Dhaqdhaqaaqyadii Gobannimadoonka ee muddadaas dheer soo taxnaa.

Markaan tusaalooyin iyo tilmaamo ka bixinno ay Haweenkeennu ka qaateen Kacaannadii Axmed Gurey, Sayid Maxamed Cadulle Xasan iyo Halgankii Xisbigii Leegada (SYL) waxay ahayd mid kaga jirta Taariikhda Ummadda Soomaaliyeed baal Dahab ah.

Aayadoo ay kaalintooda marna ay dhimayn si laxaad leh-na uga soo horjeeday gumeystaha iyo gumeyste kalkaaliyaha. Haweenkeennu waxay dhabar jebin jireen, sirtoodana soo bandhigi jireen cadowga Ummadda Soomaaliyeed, waxayna hiil iyo hooba u geysan jireen geesiyaashii Soomaaliyeed ee u dhimanaayey Gobannimada iyo Madaxbannaanida Dalka.

Markii aan xusno dagaalladii qaraaraa ee lala galay gumeystayaasha muddadii u halganka socday, Haweenka Soomaaliyeed waxay si cad uga muuqan jireen goobaha dagaalka si gaar ahna waxaan u soo qaadaynaa xusidna naga mudan Jaalle Xaawo Cusmaan Taako, oo ahayd gabar ka mid ah geesiyaashii Waddanka u dhimatay markii lagu jiray Kacaankii 3aad ee Ummadda Soomaaliyeed, taas oo muujinaysa dowrkii lama illaawaanka ahaa ee gabdhaha Soomaaliyeed ka soo qaateen halganka Gobannimadoonka.



1960kii laba qaybood oo ka mid ah Dalkeenna ayaa Madaxbannaani iyo midnimo gaaray, hase yeeshee waxaannu ka warqabnaa in tabta gumeystuhu ay tahay inuu abuuro dal u fuliya danahiisa markuu waddan xornimadiisa siiyo, kaasoo ah waxa loo yaqaan gumeysiga cusub.

Daggaalkii Haweenka Soomaaliyeed wuxuu noqday mid aan lagu abaalmarin, hiyikacoodiina mid ay ku hungoobeen, noloshoodiina wax muuqda iskama beddelin.

Haweenka Soomaaliyeed dhibaatooyinkaas faraha badan kuma niyad jabin ee waxay ku jireen halgan cad oo ay kaga soo horjeedaan Dawladihii dibusocodka ahaa, waxayna ku muujin jireen suugaanta Buraanburradooda, iwm waxay ka qayb gali jireen Bannaanbaxyadii lidka ku ahaa Dawladihii Dibusocodka ahaa ee dalka u talin jiray, waxayna ku hamiyi jireen in mar uun is-beddey Siyaasadeed ka dhaco hoggaanka Dalka.

Qalalaasihii Dhaqaalaha, Siyaasadda iyo Bulshada ee soo jiray Dalka muddo ku dhow 9 (sagaal) sano, waxaa u adkaysan waayey Ciidammada Qalabka Sida uu hormoodka u ahaa Jaalle Siyaad, waxayna curiyeen Kacaankii 21 kiiOktoobar 1969kii.

Layrtii Kacaanka 21ka Oktoobar iyo baaqii 1aad ee Kacaanka waxay Dumarka ka qaadday xanuunkii iyo cadaadiskii, waxayna ka gilgishay habaaskii, ciilkii iyo qamuunyadii ay la caabburnaayeen, waxaana daboolka laga qaaday xaqoodii muddada dheer aasnaan jirey.

Haweenka Soomaaliyeed waxay ka mid noqdeen xoogaggii ugu weynaa ee Kacaanka taageeray, qayb libaaxna-ka qaatay hirgelinta Siyaasaddiisa iyo dagaalka lagula jiray dibusocodka Dalka gudihiisa iyo dibedda intaba.

1971kii Kacaanka wuxuu u dhisay xusuustii Xaawo Cusmaan Taako Taallo qurux badan, wuxuuna guddoonsiiyey Haweenka Soomaaliyeed Billad Geesinnimo ah.

Sannadguuradii 3aad ee dhalashadii Kacaanka ka soo wa-

reegtay. Haweenka Soomaaliyeed waxay muteysteen Billad lacag ah, ayadoo loo aqoonsaday lana ammaanay Hawshii Lixaadka lahayd oo ay ka soo qaateen Dhismaha Dalka.

11kii Jannaayo 1975kii oo ahaa Sannadkii Haweenka Aabbaha Ummadda Soomaaliyeed wuxuu shaaca ka qaaday go'aankii ku saabsanaa Sinnaanta buuxda ee Ragga iyo Haweenka.

Jaalle Siyaad, wuxuu yiri: «Haweenku waa xoog uusan garan karin qofka maangaabka ahi waana gaar haye aad u qiimo badan».

Ku dhawaaqaas waxaa ka dhashay dib u habeyn nolosha Qoyska Soomaaliyeed, kaasoo ku noolaa Kacaanka ka hor jahawareer, isla markaasna waxaa la soo gaaray Xeerka Qoyska oo ah Saldhigga aasaaska Qoyska Soomaaliyeed ee cusub.

Tan iyo intii Xeerka Qoysku soo baxay waxaa dhashay xiriir cusub iyo isbeddel weyn oo saameeyey Dalka Soomaaliyeed: Ixtiraamka iyo Sinnaanta Ragga iyo Haweenka, Xajinta nolosha Ubaxa yaryar, Hirgelinta iyo Dhismaha Xaas xor ah dhan kasta oo laga eego Dhaqaalaha, Siyaasadda, Tacliinta iyo Maskaxda intaba.

Xeerka Qoysku, wuxuu xaddiday sidii loo cirib tiri lahaa mashaakilka la xiriira Guurka badan iyo Furiinka aan xadka lahayn, wuxuu kaloo taabtay arrimo badan oo saameynayey Qoyska sida : Dhaxalka, Hantida ka dhexeysa labada qof oo isqaba, iwm.

Abuuritaanka Xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada Golaha Sare Kacaanka (XSMGSK), wuxuu ka mid ahaa tallaabooyinkii laxaadka ahaa ee Kacaanka 21kii Oktoobar ku horumarinaayey danaha Ummadda Soomaaliyeed, wuxuu kaalin buuxda ka qaatay kor u dhigidda garaadka Siyaasiga ee Ummadda, wuxuuna lahaa Xafiis u qaabbilsan una gaar ah danaha Haweenka Soomaaliyeed. Taasoo ahayd Laanta Haweenka ee Xafiiska Siyaasadda MGSK: kaalintoodana waxay ahayd fulinta arrimaha saameeya Haweenka Soomaaliyeed:



1. Kor u qaadidda garaadka Siyaasiga ah ee Haweenka.
2. Isku-dubarridka iyo abaabulka xoogga Haweenka.
3. Diyaarinta Dhismaha Ururka Haweenka.
4. Hirgelinta iyo dhidib u aasidda Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan.
5. Baahinta Xeerka Qoyska.
6. Suura gelinta kobcinta Dhaqaalaha.

Laanta Dhexe ee Haweenka, waxay xiriir Jaallanimo la lahayd Ururrada Haweenka ee Adduunka, gaar ahaan kuwa Horusocodka ah, waxaana ka mid noqonnay Ururrada Caalamiga ee soo socda:-

1. Ururka Haweenka Dimuraadiga ee Adduunka (W.I.-D.F.)
2. Ururka Haweenka Afrika:
3. Ururka Haweenka Carabta.

Haweenka Soomaaliyeed waxay qiimo iyo shafar gaar ah ku leeyihiin Shirarka Caalamiga ah ee Adduunka, taasoo ugu dambeyntii Haweenka Soomaaliyeed loo doortay 1975kii inay ka mid noqdaan Xoghaynta Sare ee Ururka Dimuqraadiga ee Adduunka (W.I.D.F.)

«Billadda Naadiya Kuruubiskaya ee Ciribtirka Aqoondarrida waxan UNESCO (N.N.E.S.CO.) guddoonsiiyey Ururka Haweenka Dimuqraadiga ee Adduunka, si loo siiyo Dalalka soo koraya ciddii ku guulaysata Ciribtirka Aqoondarrida lagu qabtay Magaalada (LISBOON) 1976 waxaa la isla gartay in Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed uu galay kaalintii koowaad (1) ee Ciribtirka Aqoondarrida. Sidaa awgeed waxaa Ururka Haweenka Adduunku guddoonsiiyey Billadda Maarta ah ee Naadiya Kuruubiskaya ee Ciribtirka Aqoondarrida».

Haweenka Soomaaliyeed ayagoo ka mid ah xoogga ugu weyn ee ka qayb qaata fulinta iyo hirgelinta Mabaadi'da Ka-

caanka, waxay si Sharaf leh u muteysteen. mudanti iyo tixgelin xagga shaqo hixinta. taas oo meel eber ku dhow laga soo qaaday. lana gaarsiiyey heer fiican oo loo riyaaqi karo.

Bulshada Soomaaliyeed iyadoo ka guureysa habkii muddada dheer taynaa oo ku hayey kadeedka. isku dulnoolaashada iyo dhiigmiiradka, una hayaamaysa nidaam u ballan qaadaaya Sinnaan, Barwaaqo, Nabadgelyo iyo Horumar. Waxaa u furmay baal cusub ee Taariikhi ah kaasoo ahaa Dhismaha Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ee nooca Cusub.

X.H.K. Soomaaliyeed. asagoo tixgelinaaya qiimaha weyn ee Haweenka Soomaaliyeed, wuxuu Barnaamijkiisa ku muujiyey inay Haweenku yihiin Ururiyaha ugu firfircoon iyo saldhigga Bulsho taafimaad qabta.

Haweenka Soomaaliyeed farxad iyo reyn bay u tahay dhalashada X.H.K.S., waxayna ballan qaadeen in ay dagaalkooda sii wadaan. ayagoo arkaya tixgelinta iyo dowrka ay ku leeyihiin mujtamaca Soomaaliyeed. taasoo ay maanta ka mid yihiin Xubnaha Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

Haweenka Soomaaliyeed waxay ballan qaadeen inay noqdaan kuwa safka hore dagaalka uga jira una taagnaa goor walba iyo goob kastaba Hawlaha lagu horumarinayo Bulshada Soomaaliyeed.

Waxaa lama huraan ah inuu jiro Urur Haween oo saldhiggiisu yahay aragtida Cilmiga ah ee Maarkiisim-Leeniniism. Korna u qaada garaadkooda Siyaasiga ah. gaarsiiyana heer sare si halgankooda xaqa ahi uu banaqaado.

Ururkaasoo ka dabqaadanaya fulinaayana isagoon waxna dhimin waxna dhaafin Barnaamijka iyo Xeerka X.H.K.S.

## BARNAAMIJKA HAWEENKA SOOMAALIYEED

### Arrimaha Dhaqaalaha

Ururka isagoo aaminsan in xoogsatadu tahay horseedka dhismaha Dhaqaalaha isla markaasna u arkaya inaan la gaari karin horumar Bulshadeed, iyo horumar Dhaqaale. ayaa wuxuu waajib isaga dhigayaa, xilweynna iska saarayaa kobcinta. ballaarinta iyo ilaalinta Dhaqaalaha Dalka. Si waajibkaasi loo guto. Ururku wuxuu Mabda'a shaqabulkiisa ka dhiganayaa:

1. In si dhab ah uu u fuliyo dowr muuqda a ka qaato qorshaha guud ee Dalka, dhan kastaba.
2. In uu ku baraarujiyo tuna dareensiiyo Haweenka siday u daryeeli lahaayeen Dhaqaalaha Qoyska ee ah saldhigga Dhaqaalaha Guud ee Ummadda.
3. In la abuuro lana habeeyo Iskaashatooyinka yaryar, korna loo qaado barashada iyo xirfadaha kala duwan (Warshadaha, Far-haxanka, Farsamada-Gacanta Iskaashatooyinka iwm), iyo in la xoojiyo Tacabka Beeraha. Xannaanada Xoolaha, Horumarinta Warshadaha iwm. ahmiyad gaar ahna la siiyo hawl gelinta Haweenka Xubnaha Dhaqaalaha.
4. Ugu dambeystii waxaa lagama maarmaan ah in Ururka saldhig dhaqaale loo abuuro, si ay ugu sahlanaato gudashada waajibaadka iyo fulinta Hawlaha ku aadan.

## ARRIMAHA GULAHA

1. Ujeeddada ugu weyn ee Ururka waa hirgelinta Xeerka iyo Barnaamijka Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed:-

   a) Inuu ku baahiyo Haweenka Soomaaliyeed barashada Barnaamijka iyo Xeerka Ururka Dimuqraadiga Haweenka Soomaaliyeed. isagoo ka shidaal qaadanaaya isla markaasna fulinaaya Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, gaarsiinaayana meel kasta ee waddanka (Gobol, Degmo, Xaafad iyo Tuulo).

   b) In tallaabo kasta oo Ururku qaadaayo uu noqdo mid ka tarjumaaya ujeeddooyinka Barnaamijka iyo Xeerka Ururka Haweenka Dimuqraadiga Soomaaliyeed.

2. Ururku wuxuu mideynayaa xoogga Haweenka Soomaaliyeed.

a) Wuxuu xoojinayaa mideynta maskaxda iyo muruqa Haweenka Soomaaliyeed.

isla markaasna wuxuu u tilmaamayaa in ay meel uga soo wada jeestaan hirgelinta himilooyinka Kacaanka.

b) Wuxuu dareensiinayaa Haweenka Soomaaliyeed faa'iidada ay leedahay Midnimada isla markaana wuxuu tilmaamayaa dhibaatooyinka ka imanaya firirsanaanta iyo kala daadsanaanta.

3. Ururku waa aasaasaha, barbaariyaha, abaabulaha Haweenka Soomaaliyeed.

a) Ururku wuxuu kor u qaadayaa garaadka Siyaasiga ee Haweenka Soomaaliyeed;

b) Wuxuu ku abuurayaa jacaylka Qarannimada;

t) Wuxuu ku abaarayaa kuna baraarujinayaa xilkasnimada iyo u dhaga nuglaanta gudashada Shaqada;

j) Wuxuu ku abuurayaa kuna baraarujinayaa xilkasdarka loo xulanaayo X.H.K. Soomaaliyeed.

x) Wuxuu hirgelinayaa kuna faafinayaa guud ahaan Dadweynaha Soomaaliyeed, gaar ahaanna Haweenka barashada Mabda'a Hantiwadaagga cilmiga ah.

4. Ururku wuxuu daafacayaa ilaalinayaana miraha Kacaanka 21kii Oktoobar.

a) Wuxuu baarayaa dhibaatooyinkii Dalka ka taagnaa Kacaanka ka hor gaar ahaan kuwii haystay Haweenka Soomaaliyeed:

b) Wuxuu taabsiinayaa, tusaaleynayaa guulihii waa weynaa ee uu soo hooyey Kacaanka, gaar ahaan wuxuu u qabtay Haweenka;

t) Wuxuu baarayaa lana dagaallamayaa cadowga gudaha iyo kan dibeddaba.



j) Wuxuu u foojignaanayaa kana hortagayaa barobagaandada, shirqoollada iyo xeeladaha imberyaaliyadda iyo dabadhilifyadooda ee ka soo horjeeda horumarka Ummadda.

5. Ururku wuxuu heegan u yahay daafacaadda Qarannimada iyo Midnimada Ummadda Soomaaliyeed.

a) Wuxuu cashar adag ka siinayaa dhibaatooyinka gumeysiga uu ku hayo Ummadaha ku hoos nool:

b) Wuxuu ku beerayaa, barayaana waxyeellada foosha xun uu Ummadda gaarsiiyey gumeysiga intuu Dalka haysta:

t) Wuxuu adkeynayaa kuna dadaalayaa waajibaadka ka saaran xoreynta Dalalka Soomaaliyeed ee gumeysiga ku hoos nool:

j) Wuxuu tilmaan cad iyo xus mudnaan ka bixinayaa geesiyaashii Soomaaliyeed ee u geeriyooday Gobannimadooda;

x) Wuxuu barayaa tabaha iyo xeeladaha dagaalka si ay qayb muuqata uga qaataan difaaca Dalka.

6. Ururku wuxuu xoojinayaa is-bahaysiga iyo wada shaqeynta Jaallanimo ee Ururrada Bulshada Dalka.

a) Wuxuu ku dhiirri gelinayaa waxtarka ay wada shaqayntu leedahay asagoo u tilmaamaya in la'aanteed ay tahay dhabar jabka hawlaha iyo horumarinta Dalka:

b) Wuxuu ka reebayaa ugana digayaa iska-horimaadka, been ka sheegga iyo quursiga Ururrada kale ee kor ku xusan;

t) Wuxuu aqoonsanayaa, tixgelinayaa Jaalle kasta oo ka mid ah Ururrada kale ee Bulshada oo ka geysta waxtar dheeraad ah hirgelinta hawlaha Ururka.

7. Ururku wuxuu la dagaalayaa qabiilka, gobollaysiga, biroqraadiyada, afmiinshaarnimada, laaluushka, eexda, xatooyada hantida maamul xumada iwm;

a) Wuxuu bixiyaa hanuunin joogto ah oo lagu ciribtirayo arrimaha kor ku xusan; ,

b) Wuxuu si cad oo aan gabbasho lahayn u hor istaagayaa kooxdii ama qofkii isku daya inuu waxyeeleeyo horukaca Ummadda;

t) Wuxuu xoojinayaa xaqiijinta isku fillaanshada qofka iyo ku xirnaanshada bulshadiisa horusocodka ah;

j) Wuxuu baabi'inayaa kali tashiga, wuxuuna hirgelinayaana Mabda'a Dimuqraadiyadda Guddoonka Dhexe.

## SIYAASADDA DIBEDDA

1. Ururku wuxuu ku shaqaynayaa Mabaadi'da Caalaminnimada:

a) Wuxuu ku baaqayaa midnimada iyo Urursanaanta Dawladaha iyo Ururrada Caalamiga ah meel uga soo wada jeedda sidey uga bixi lahaayeen isku dulnoolaadka, dhulgoosiga, cadaadiska, caddaalad-darrida iwm;

b) Wuxuu hirgelinayaa sinnaanshada guud ahaaneed ee Dawladaha Adduunka kaasoo saldhig u ah Bulsho ay hoggaaminayaan Xoogsatada;

t) Wuxuu u dagaalayaa xuquuqda Haweenkaa;

j) Wuxuu dagaal aan naxariis lahayn ku qaadayaa imberyaaliyadda Caalamiga ah, gumeysiga cusub, midabtakoorka, Sahyuuniyadda, iwm.

2. Ururku wuxuu xoojinayaa xiriirka iyo is-bahaysiga u dhexeeya Haweenka Soomaaliyeed iyo Haweenka Horucodka ah ee Adduunka gaar ahaan kuwa Dalalka Hantiwadaagga:

a) Wuxuu diyaar u yahay qabanqaabada Shirarka heer Qaaradeed (Afrika), iyo kuwa Caalamiga ah iyo dalka gudihiisa;

b) Wuxuu xoojinayaa is-dhaafsiga wufuudda iyo ka qayb qaadashada firfircoon ee Shirarka iyo kulannada Caalamiga;

t) Wuxuu hirgelinayaa fikradaha xaqa ah ee ka soo baxa Shirarka Haweenka Adduunka ee Horusocodka ah.

3. Ururku wuxuu hiil iyo hooba siinayaa Dhaqdhaqaaqyada Gobannimodoonka Soomaaliyeed.

a) Wuxuu si cad oo aan gabbasho lahayn ku garab taagan yahay fikradaha xaqa ah ee Dhaqdhaqaaqyada kor ku xusan;

b) Wuxuu goob kasta, shir kastaba ka qaadanayaa in la siiyo xornimo buuxda oo aan Shuruud lahayn Dalalka Soomaaliyeed ee gacanta gumeysiga ku jira;

t) Wuxuu si bareer ah uga hortagayaa in lagu faragеliyo ka tashiga aayahooda dambe.

4. Ururku wuxuu si ballaaran oo buuxda u taageerayaa halganka xaqa ah ee Dhaqdhaqaaqyada Gobannimadoonka ah ee Dadyowga Dunida Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika.

a) Wuxuu gacan u geysanayaa una fidinayaa taageero Siyaasadeed oo joogto ah iyo mid Dhaqaale intaba;

b) Wuxuu diidan yahay midabtakoorka iyo dhul ballaarsiga ka socda Namiibiya, Koonfurta Afrika iyo Simbaabwe, wuxuuna leeyahay Dadka u dhashay ha u taliyaan Dalkooda, xukunka cadaadiska ah ee inta yar haysato si degdeg ah ha uga baxo;

t) Wuxuu si caalami ah ugu baaqayaa una taageersan yahay inay xuquuqdooda Shareiga ahi helaan Ummadda Reer Falastiin oo sida geesinnimada leh ugu howshoon in ay ka lib keenaan gardarrada sahyuuniyadda, xoogagga dibusocodka iyo imberiyaaliyadda Caalamiga ah.

1. Ururku wuxuu adkeynayaa hirgelinta barashada Xeerka Qoyska :

   a) Wuxuu xoojinayaa dhismaha qoys caafimaad qaba oo wada tashada kuna kala dambeeya danaha qoyska:

   b) Wuxuu horumarinayaa kuna baraarujinayaa Haweenka Soomaaliyeed ka hortagga cudurrada faafa iyo daryeelka Xannaaneynta Hooyada iyo Carruurta;

   t) Wuxuu taabba gelinayaa dhismaha Dugsiyada Xannaanada Carruurta M.C.H iyo Farsamada Dhaqaalaha Guriga.

   j) Wuxuu kobcinayaa maskaxda Dhallaanka soo koraya kuna barbaarinayaa fikradaha ah jaceylka Waddanka iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed.

   x) Wuxuu ka qayb qaataa, daryeelayaa uruurinayaana dhallaanka dayacan;

   kh) Wuxuu dareensiinayaa qoyska Soomaaliyeed inay baabi'iyaan dhibaatooyinka ka imaanaya daris xumada isagoo u tilmaamaya inay dhaliyaan wada shaqayn iyo is-garabsi Jaallannimo xagga degaanka.

2. Ururku wuxuu adkeynayaa hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed :

   a) Wuxuu la dagaallamayaa caadooyinka xun xun oo dib u dhigaaya horumarka Bulshada cusub ee Hantiwadaagga ah (sida mingiska, booranaha, khamaarka, khamriga, qaadka, iwm);

   b) Wuxuu qorayaa baahinayaana suugaanta Soomaaliyeed (heesaha, buraanburrada, gabayada, iwm);

   t) Wuxuu habeynayaa, dhiirri gelinayaa ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka;



   j) Wuxuu la dagaallamayaa ciribtirayaana dhaqanmada xun ee shisheeyaha ee lagu khalkhal gelinayo Dhaqankeenna toosan.

3. Ururku wuxuu u diyaarinayaa Haweenka Soomaaliyeed ka haqabbeelka Waxbarashada.

   a) Wuxuu xoojinayaa fulinayaana Joogtaynta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga (J.O.H.R.M.);

   b) Wuxuu taabba gelinayaa una gudbinayaa aqoon xirfadeed;

   t) Wuxuu qab weyn ka qaadanayaa Dhismaha Dugsiyada khasabka ah;

   j) Wuxuu Dhallaanka soo koraya ku baraarujinayaa waxtarka weyn ee ay leedahay Waxbarashada.

4. Ururku wuxuu abuurayaa Haween u bisil fanka iyo isboortiga, isla markaana ka ilaalinayaa xirfad ka dhigashada :

   a) Wuxuu ka hortagayaa dhuuni raaca ku danaysta Fanka iyo Isboortiya, wuxuuna taageerayaa in ay ahaadaan Fanka iyo Isboortiga mid ku baahsan dadweynaha;

   b) Wuxuu u horseedayaa Dhismaha Garoomo Cayaaro iyo Guryo Fanka lagu barto xoojinaayana barashada Miyuusiga (Muusikada);

   t) Wuxuu Haweenka ku dhiirri gelinayaa ka qayb qaadashada tartammada Caalamiga ah ee Ciyaaraha iyo Fanka;

   j) Wuxuu uruurinayaa, habeynayaa, tababarayaana hobollada iyo Ciyaartoyda Haweenka.

5. Ururku wuxuu ballan qaadayaa kor u qaadidda Caafimaadka Guud ee Bulshada :-

a) Wuxuu daryeelayaa fiira gaar ahna siinayaa nadaafadda guud iyo Xannaanada dheellitiran:

b) Wuxuu qayb wacan ka qaadanayaa dhismaha Isbitaallada:

t) Wuxuu ka qayb qaadanayaa diyaarinta kalkaaliyayaal iyo gargaartayaal Caafimaad.


Ururka Demoqraadoga Haweenka Soomaaliyeed, waxaa horyaalla arrimo fara badan oo culculus, kuwaasoo ah horumarinta iyo daryeelka arrimaha Haweenka ayagoo fulinaya Barnaamijka iyo Xeerka u degsan Ururka, kana tusaale qaadanaya khadka cad ee uu jeexay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Ururku wuxuu kala soo horjeedaa dagaal adag oo aan naxariis lahayn dib-u-socodka gudaha iyo kan dibedda, gumeysiga, gumeysiga cusub, oo had iyo jeer u soo hanqal taagaya hakiska horukaca Ummadda Soomaaliyaad ee hayaanka u ah Barwaaqo, Hoomar, Sinnaan, Midnimo iyo Caddaalad.







Haweeneyda [illegible] xoogfal ee nid ah cududada kobciya dhaqaalaha.



Hooyo waxay isku mashquulisaa kana dooddaa tabaha iyo siyaabaha [illegible] caruurta.



Haw geeyda Soomaaliyeed dhinac kastee nolosha way jibaaxday, [illegible]irkan waxaan ku aragnaa iyadoo Warshadihii ku duushay



[illegible] [illegible]eedda naleoga keeni jiray lacag adagna innoo- [illegible] [illegible]alaha soomaaliyeed ay maanta dalka gudahii-



# URURKA DHALLINYARADA KACAANKA SOOMAALIYEED




WAXAA SOO SAARAY

W. W. IYO HAN. UMMADDA

# URURKA DHALLINYARADA KACAANKA

# SOOMAALIYEED

## BARNAAMIJKA URURKA DHALLINYARADA

## II



Dhallinyaradu waa hubka lagama adkaadaanka ah ee Kacaanka

Waxaa la galay marxalad cusub oo Taariikhi ah. Marxaladdaas xilku wuxuu saaran yahay guud ahaan xoogsatada horusocodka ah oo u dagaallameysa xaqiijinta iyo xoojinta aragtida cilmiga iyo dhisidda Bulsho Hantiwadaag ah, taas oo u [illegible] bulshada inteeda badan, baabi'ineysana midnimada gumeysiga iyo isku dulnoolaadka. Halgankaas muddada dheer soo taxnaa oo dabaqadda shaqaaluhu u horseedeysey uguna jiray inay gaarto madaxbannaani Siyaasadeed iyo dhaqaale waxay dhallinyaradu ka mid ahayd kooxaha ugu firfircoon oo [illegible] siyaasadeed ee Kacaannimo.

[illegible] waxay soo maray shan hab dhaqan dhaqaale oo mid walibana wuxuu la soo baxay wajigii horusocodnimo isbeddelladaas waxaa saldhig u ahaa wax soo saaridda maaddiga ah iyo koritaanka garaadka siyaasadeed ee Bulshada. Dhallinyaradu iyagoo arkay in ay yihiin faca ugu firfircoon saadaalinta nolosha berrito iyo aayatiinka dambe ee isbeddelka bulshada, waxay halgan aad u qaraar oo aan kala go' lahayn la soo galeen isku dulnoolaadka ee dhaqan dhaqaale, halgankooduna waxaa ku samaysnaa horukac dhaqaale oo sugaysa nolol, barwaaqo iyo caafimaad ku dhisan isbeddel siyaasadeed oo nabad iyo Dimuqraadiyad u horseeda iyo guuleysiga badeecadda uumiyadda ku wareegsan.

Dhallinyaradu uma ayan arkeen gaarista arrimahaas aan kor ku soo sheegnay inay ku imaanayaan halku-dhigyo iyo iska dheh, balse waxay ka dhiiban jireen fikradahooda cad-cad, waxayna qayb wacan ka qaateen dagaalladii lagaga hortagaayey Talisyadii Fashiistiga iyo Imberyaaliyadda intaba.

Taariikhda iyo noloshaba waxay caddeeyeen xaqiimada iyo habboonaanta halganka dhallinyarada, kaddib markay ay [illegible] Kacaano Hantiwadaag ah ay horseed u yihiin dabaqadaha [illegible] una sugayo dhallinyarada himilooyinka ay [illegible] badan tiigsanayeen, fulinayaan halkudheggii Hantiwadaagga ee ahaa (Dhallinyaradu ha fahamto kala duwanaanshaha habka siyaasadeed, inta aanay dooran jihada siyaasadeed [illegible] ah). Kacaannada Hantiwadaagga ah uma [illegible] dhallinyarada arrimaha aan kor ku soo sheegnay [illegible] awood ballaaran u siiyeen Abaabulka Ururro Dhallinyaro [illegible] Caalami ah iyo kuwo Qaranba, oo ujeeddadoodu tahay inay kaga baxaan dulliga kala firirsanaanta iyo dhibaatooyinka faraha badan ay ka dhaxleen habkii isku-dulnoolaadka ku dhisnaa iyo dhaqammadoodii xumaa, ayna ka gaaraan [illegible] buuxda oo dhinac kasta ah.

[illegible] Dhallinyarada Adduunweynaha ka iftiin qaadaa [illegible] habka Hantiwadaagga iyo burburka habka Hantiwadaagga [illegible], isla markaasna muujinaya kaalinta kaga [illegible] mujtamaca, waxay garteen kaddib markii la [illegible] [illegible] fashiistiga in si dhab ah loo dhiso Urur Caalami ah oo u dhexeeya Dhallinyarada Adduunka oo dhan, iyadoo loo eegin qowmiyad, midab, diin iwm.



Iyadoo danta iyo ujeeddada abaabulka Ururkaasi uu ahaa:

1. In la mideeyo Dhallinyarada Adduunka;
2. In meel la isugu keeno danaha ka dhexeeya Dhallinyarada ku nool Dalalka kala duwan;
3. In dagaal cad lagu qaado lana dabargooyo gumeysiga gumeysiga cusub iyo Imberiyaaliyadda Caalamiga;
4. In loo hawl galo nolol horukac iyo aayatiin wacan ku dhisan;
5. In la aqoonsado lana dhowro xuquuqda Dhallinyarada Adduunka;
6. In la siiyo gacan taageero inta nabadda, horukac iyo xornimada u dagaallamaysa.

Himiladaasi waxay ka dhabeeyeen Dhallinyarada Bishii Noofember 1945 oo dhidibbada loo aasay Ururka Demoqraadiga ee Dhallinyarada Adduunka oo awood u siiyey Dhallinyarada Adduunweynaha in ay qabanqaabiyaan Toban (10) fesrada Caalami ah, isla markaasna ay soo saaraan go'aanno [illegible] oo Caalami ah, isla markaasna ay soo saaraan go'aanno dhaxal gal ah oo ku baaqaya Nabad, Horukac Caalami ah, Dimuqraadiyad iyo isbahaysi, waxayna taageero buuxda siiyaan inta u dagaallamaysa xornimo iyo Madaxbannaani buuxda.

Qaaradda Afrika sida la ogsoon yahay waxay ka mid ahayd Waddammadii dhawaan ka xoroobay gumeysiga, oo Afrika dhaxashiisay dib u dhac badan ee saameeya dhaqaalaha, Siyaasadda iyo Bulshada. Kaddib markay Afrika Madaxbannaanideeda Siyaasadeed ay qaadatayna, nasiib darro waxay ahayd in gumeysigii cusbaa ka soo galo dariishadda [illegible] [illegible] jab iyo tiiraanyo ku noqotay Dhallinyarada Adduunweynaha dhibaatadooduna aysan ka duwaneyn middu guud [illegible] Bulshadooda, waxay si cad oo aan nasasho lahayn uga qayb qaateen halgankii dadkoodu ugu jireen xaqiijinta xornimo buuxda iyo ka tirtiridda raadadkii gumeysiga Qaaradda Afrika, waxaa kale oo ay isu diyaariyeen ka hortagga [illegible]

celinta qaababka kala duwan ee gumeysiga iyo Imberiyaaliyadda.

Dhallinyaradu waxay ugu dambeystii himiladoodu ku qotontaa u halganka iyo huridda naftooda Dimuqraadiyadda, Xornimada, Sugidda dhismo duni cusub. Nabad iyo Horukac. Si taasi loo gaarana dhallinyaradu waa hirgeliyaha iyo toosiyaha socodka taariikhda, waana xilka maanta ee dhallinyarada, iyadoo hub ka dhiganeysa kagana miro dhallinaysa ujeeddooyinkaas hirgelinta Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan oo ah midka keliya oo ugu dambeysta gaarsiinaya mujtamaca Adduunka Caddaalad, Sinnaan, Xornimo, Nabad iyo Horukac aayatiin wacan leh.

III.

Ummadda Soomaaliyeed waxay soo martay halgan dheer oo ay ugu horseedaysay gobannimo, midnimo iyo sharafta aadamiga. Halgannadaasi waxaa markastaba hogggaaminayey Dhallinyaro Soomaaliyeed. Dhallinyarada Soomaaliyeed ee gumeysiga nabcayd uuna hoggaanayey Geesigii Axmed Garaad Ibraahim (Axmed Gurey) waxay la dagaallameen Boqortooyadii Xabashida oo doonaysey in ay ku luga fidsato Dalka Soomaaliyeed, Addoonsato Dadkiisa, Khayraadkiisana boobto. kaddib markay ogaatay Xabashidu in aan la loodi karin halganka xaqa ah ee Ummadda Soomaaliyeed, ayaa Dawladda Burtuqiisku iyo Dawlado kaleba u soo direen Xabashida Ciidammo badan oo hub cusub wata, iyagoo isku bahaysanaya Siyaasadda Gumeystinnimo iyo aragtida diineed intaba, taasoo keentay inay joojiso jebitaankii ugu dambeeyey ee Ciidammada Xabashida, halgankaas waxaa ku hakaday Kacaankii 1aad ee Ummadda Soomaaliyeed, waqtigaasna wuxuu ku beegnaa xoogeysiga Burjuwaasiyadda Caalamiga.

Dawladihii gumeysiga ee reer Yurub markay soo galeen waddanka Soomaaliyeed, waxay ku debbeleen inay dhaqanka iyo caadada Ummadda Soomaaliyeed, waxaase si weyn uga gilgishay dagaalna kaga hortagay Dadweynaha Soomaaliyeed ee uu hoggaaminayey Geesigii Dhallinyarada Daraawiishta (SAYID Maxamed Cabdulle Xasan). Dagaalkaas wuxuu gumeystayaasha gayeysiiyey inuu goobo fara badan kala kulmaan guuldarro, taas oo keentay in Dalka Soomaaliyeed uu noqday waddankii ugu horreeyey ee Qaaradda Afrika oo Diyaarado lagu soo weeraro, markii ay loodin karin waayeen xooggii dhallinyarada Soomajeestayaasha ahaa ee Daraawiishta. Inkastoo la jabiyey Ciidammadii gobannimadoonka ee Daraawiishta, misna halkaa kuma joogsan ee wuu sii socday Dagaalkii Gobannimadoonka Ummadda Soomaaliyeed. Iyaga oo ka faa'iideysanaaya waaya-aragnimadii uga kordhay 2dii Kacaan ee ka horreeyey iyo jabkii ku dhacay Fashiismadii Jarmalka, waxaa dhaqdhaqaaqii Gobannimodoonka halkiisa ka sii waday Dhallinyaradii Soomaaliyeed ee aasaastay Xisbigii S.Y.L. ee ka curtay geesta Koonfureed 15kii Maajo 1943kii. Ujeeddadii ay lahaayeen Dhallinyaradaasu waxay ahayd in Ummadda Soomaaliyeed Gobannimo dhab ah la gaarsiiyo, in la mideeyo Ummadda Soomaaliyeed in la baabi'iyo wax kasta ee is-hortaaga danaha Dadweynaha Soomaaliyeed.

Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed. iyagoo fulinaaya Barnaamijkooda, waxay ka dhaadhiciyeen in gumeysigu yahay cadawga kan ugu weyn ee hortaagan madaxbannaanidooda iyo horumarkooda, waxay diyaariyeen xoog lixaad leh oo si cad uga hortaga cadaadiska gumeysiga, waxayna 1947kii dadyowga horusocodka ah iyo Jamciyadda Qoruumaha ka dhexaysa u bandhigeen dhibaatooyinka gumeysiga uu ku hayo Ummadda Soomaaliyeed, waxay abaabuleen dagaallo badan ee lagaga hortagaayo kadeedka gumeysiga, waxayna ugu dambeyntii taasi keentay in 1dii Luuyo 1960kii ay xoroobeen ka dibna midoobeen Laba qaybood oo ka mid ah qaybihii uu gumeystuhu u kala qaybiyey Ummadda Soomaaliyeed.

Dhallinyaradu iyagoo si bareer ah u fulinaayaan mabda'a Kacaanka iyo tusaalooyinka Jaalle Siyaad waxay halgankooda ku mujiyeen, qayb lixaad lehna ka qaateen ilaalinta iyo daafacaadda miraha Kacaanka, hirgelinta dhismaha dalka Gaar ahaan, waxay door weyn ka qaateen Billad Dahab ahna ku muteysteen, guulihii waaweynaa ee laga soo hooyey Ololaha H.R. Miyiga iyo Barnaamijka Raridda iyo Dejinta Dadkii abaaruhu waxyeeleeyeen, waxaana marnaba la hilmaamii karin kaalinii ay ka qaateen kicinta dadweynaha iyo barashada mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan. Dhallinyaradu iyagoo hal-

gankooda si joogto ah u wada ayaa waxaa kaloo lagu abaal mariyey inay qayb wacan ka kaateen aasaasidda XHKS. Taasi kuma dhalan si sahal ah ee waxay ku timid dcorkii uu ka ciyaaray XSMGSK. xagga uruurinta, hanuuninta, kicinta, isku-dubaridka iyo hawlgelinta kaalinta bulshadeed ee dhallinyarada Soomaaliyeed, isagoo u sameeyey waax u gaar ah arrimaha Dhallinyarada.

Laanta Dhallinyarada XSMGSK. waxay billawday sidey xoogga dhallinyarada Soomaaliyeed u mideyn lahayd, waxayna si ballaaran ugu fidisay dhammaan Gobollada iyo Degmooyinka hawlaheeda, kana abuurtay Guddiyada dhallinyarada oo heer kastaba leh, isla markaasna waxaa barbar soconaayey abaabulidda Ubaxa Kacaanka, taasoo ay Laantu guul wacan ka soo hoysay.

Sidoo kale si dhallinyarada loo garansiiyo loona taabsiiyo kaanlinta ay uga jiraan wax soo saarka, waxaa laga abuuray hay'adaha shaqada Guddiyada Dhallinyarada shaqeysa iyadoo ahmiyad gaar ah la siiyey duruuftooda gaarka ah iyo ku xirnaanshaha qalabka wax soo saaridda. Iyadoo ujeeddada dheer ee Kacaanku ahayd u gogol xaaridda dhismaha Urur Dhallinyaro, waxa XSMGSK. Abaabulay kulammo, shirar iyo shirweynayaal oo lagu gaaray go'aanno dhaxal gal ah oo saamaynaaya dhaqdhaqaaqa Dhallinyarada Soomaaliyeed.

Hawsha Laanta Dhallinyarada ee XSMGSK. kuma koobnayn waajibaadkeeda soohdinta Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxayse door ka qaadatay fidinta Mabaadi'da Caalaminnimada:

Waxaa xiriir iskaashi adag la yeelanay Ururrada Dhallinyarada Horusocdka ah ee Adduunka, gaar ahaan kuwa Hantiwadaagga;

Waxaa qayb firfircoon ka qaadanay hawlaha Ururrada Caalamiga iyo kuwa heer gobolka annagoo si cad afkaarteenna uga dhiibanay mashaakilka adduunweynaha ka taagan;

Waxaan ka mid noqonay xubnaha Xoghaynta iyo Hay'ada-



ha fulinta ee Ururrada soo socda: Xiriirka Dhallinyarada Adduunka ee Dimuqraadiga ah (WFDY) iyo Ururka Ardayda Caalamiga ah (AUS), waxay kaloo Dhallinyarada Soomaaliyeed wakiil uga noqoto Xoghaynta qaybta Afrikada Bari ee isutaga Ururka Ardada Afrika (AASU), waxay kaloo dhallinyarada Soomaaliyeed ka qayb qaateen si firfircoonna uga muuqdaan Ururka Dhallinyarada Dimoqraadiga Afrika (PAYM), Ururka Dhallinyarada Carabta iyo Ururro kale. Dhallinyarada Soomaaliyeed waxay lib lama iloobaan ah ka soo hooysay Festifaalkii dhaqdhaqaaqa Dhallinyarada Afrika ee lagu qabtay Tunis 1973kii.

Iyadoo Laanta Dhallinyarada ee XSMGSK, si fiican uga muujisay fadhiyada shirarka iyo Festifaalada Dhallinyarada Adduunka kaalinta Dhallinyarada Soomaaliyeed ka qaadatay horumarka Dalkooda, habka abaabulka iyo qaabka dhismahooda, waxay dhalisay in shirar Caalami ah lagu qabto Dalkeenna oo ka mid ahaa Shirkii lagu cambaaraynayey Imberyaaliyadda, gumeysiga, gumeysiga cusub, Sahyuuniyadda iyo Midabtakoorka Bishii Abriil 1975 halkaas oo dhallinyarada Adduunku ku guddoonsiisay Hoggaamiyaha Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Siyaad Geesinimo oo uu ku muteystay la dagaalanka Imberiyaaliyadda Caalamiga iyo u hiillinta nabadda adduunka iyo dhaqdhaqaayada Gobannimadoonka.

Maanta Bulshada Soomaaliyeed waxay ka hayaamaysaa habkii muddada badan ku hayey kadeedka, dhiigmiiradka iyo cadaadiska joogtada ah, waxayna ku hanaqaaday habka Hantiwadaagga Cilmiga ah oo u ballan qaaday nabad iyo horumar barwaaqo leh, waxayna foodda la gashay marxalad taariikhi ah oo uu hoggaaminayo Xisbi nooca Cusub.

XHK Soomaaliyeed oo Barnaamijkiisa iyo Dastuurkiisaba lagu caddeeyey in dhallinyaradu tahay kaydka iyo kaaliyaha ugu firfircoon ee Xisbiga waxay ka markhaati kacaysaa waajibka weyn oo maanta horyaal Dhallinyarada Soomaaliyeed.

Dhallinyarada oo bartilmaameed loogu hagaago kaga jirtay halgannadii Ummadda Soomaaliyeed soo martay, maanta oo ay ku soo kobacday garashada Siyaasadeed Xilligaan Kacaanka ah, hanatayna Tusaalooyinkii Xoghayaha Guud

ee Xisbiga HKS, Jaalle Siyaad uu ku baraarujin jiray dhallinyarada, oo ku abuurtay qiiro waddaninimo, geesinnimo, hawlkarnimo, firfircoonaan iyo afkaar horusocodka ah, waxay xaqiiqsan yihiin in Xisbigu yahay xiqiijiyaha himilada iyo aayatiinka wacan ee Ummadda Soomaaliyeed waxayna hubaan inay ka guuleysan doonaan marxaladdaan adag iyaga oo hub ka dhiganaya Tusaalooyinkii Xoghayaha Guud iyo Golaha Dhexe ee Xisbiga waxayna ogsoon yihiin in fulinta waajibkaas uusan ahayn mid ku imaanaya hadal iyo dhalanteed, ee waa mid u baahan hawl adag oo saldhiggeedu yahay qorsho abaabulan.

Sidaas darteed, waxaa lagama maarmaan ah inuu jiro Urur Saldhiggiisu yahay Mabaadii'da Hantiwadaagga ah ee Hawlgeliya dhallinyarada Soomaaliyeed, abaabula, iskuna-dubarrida garaadkooda Siyaasadeed, gaarsiiyana heer sare, si halgankooda koox ahaaneed u hanaqaado, isagoo ka tusaale iyo tilmaan qaadanaaya Hoggaanka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu fulinayaa Barnaamijka soo socda:

## SIYAASADDA GUDAHA:

Ururka wuxuu ku shaqaynayaa Barnaamijka XHKS, isaga oo ka hirgalinaaya Dhallinyarada J.D.S. dhexdooda, fulinaayana xilka iyo waajibka cusub ee xagga Siyaasadda, Dhaqaalaha iyo Bulshada oo lagu horumarinaayo Dadweynaha Soomaaliyeed. Wuxuu midaynayaa sarena u qaadayaa kartida iyo aqoonta siyaasiga ee dhallinyarada, si loogu wada jiheeyo dhammaantood halganka loogu jiro dhismaha Hantiwadaagga iyo difaacidda guulaha kacaanka Oktoobar.

Wuxuu dhallinyarada u diyaarinayaa daafaca qarannimada iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed, isaga oo u abaabulay kuna barbaarinaya dhallinta afkaarta iyo aragtida Hantiwadaagga Cilmiga ah, tixgelinaayana waayaha gaar ahaaneed ee Bulshadeenna.

Iyada oo la fulinaayo himilada iyo istaraatiijiyada Kacaanka, waxa Ururku is-hordhigayaa waajibaadka iyo xilka taariikhiga ah ee ka saaran taabagelinta dhismaha dhallinyargda iyo dagaal gelintooda, wuxuuna ku abuurayaa ficillo Kacaannimo iyo garaad dabaqi ah, isaga oo baraya Cadawga dhabta ah ee Ummadda Soomaaliyeed iyo guud ahaan Cadawga xoogagga adduunka ee horusocodka kuna beeraya la dagaallanka iyo ciribtirka Imberyaaliyadda Caalamiga ah Gumeysiga Cusub si cadna ula dagaallamaya Qabyaaladda, Biriqraadiyadda, Gobollaysiga iyo Borobagaandada rajciyadda, gudaha iyo Dibadda isaga oo la kaashanaya ururrada kale ee Bulshada iyo xoogagga horusocodka ee Dadweynaha Soomaaliyeed.



Ururku si uu u fuliyo himiladiisa dambe una xaqiijiyo waajibaadkiisa guud wuxuu xubnahiisa iyo dhammaan dhallinyaradeenna ku baraarujinayaa lagama maarmaannimada Barashada Cilmiga Hantiwadaagga iyo ku faafinta Bulshada dhexdeeda.

Wuxuu si joogto ah ugala dagaallamayaa dhallinyarada dhaqammada iyo caadooyinka gurracan ee ay ka mid yihiin shaqo nacaybka, isla-weynida, anshax-xumada, ku dayashada caadooyinka iyo calaamadka dibusocodka, isaga oo ku barbaarinayo da'aadda soo koraysa Waddaninnimo, Kacaannimo, shaqo-jacayl, isku-kalsooni iyo Anshax Hantiwadaagnimo, si uu dhismahiisa Urur ahaan isu ebyo, isla markaana kaalin weyn uga qaato dhismaha beesha Cusub ee Hantiwadaagga iyo xoojinta difaaca midnimada Ummaddeeda.

## SIYAASADDA DIBEDDA:

Ururku isagoo ka shidaal qaadanaya Siyaasadda Xisbiga wuxuu ku shaqaynayaa Nabadda, Caalaminnimada, wuxuuna xoojinayaa Siyaasadda Dibedda ee J.D.S. taasoo waafaqsan nabad ku wada noolaanshaha Ummadaha Adduunka iyo in Ummad kastaba ka taliska aayaheeda dambe, meelna loogu soo wada jeesto dhibaatooyinka khatarta u ah horumarka iyo jiritaanka oo ay hurinayso Imberyaaliyadda Caalamiga ah.

Ururku wuxuu xoojinayaa isbahaysiga iyo xiriirka ka dhexeeya dhallinyarada Soomaaliyeed iyo dhallinyarada waddammada Hantiwadaagga ah, Ururrada dhallinyarada ee

Horusocodka ah iyo xoogagga jecel Nabadda iyo Dimuqraadiyadda Adduunweynaha.

Ururku wuxuu si joogto ah u taageerayaa dhaqdhaqaaqyada Gobannimodoonka iyo xoogagga horusocodka ah ee u halgamaya Madaxbannaanidooda iyo iska dulqaadka kadeedka gumeysiga, isku dulnoolaadka jaad ay tahayba, wuxuu si buuxda u taageerayaa qaddiyadda Ummadaha Afrika, Aasiya, iyo Laatiin Ameerika.

Ururku wuxuu taageerayaa isla markaana garab buuxa siinayaa dhallinyarada Soomaaliyeed ee ku hoos nool weli gacanta Gumeysiga una halgamaysa xornimo iyo madaxbannaani, isaga oo u hawlgalaaya sidii qaddiyaddaas loogu xiri lahaa kuwa caalaamiga ah.

Ururku wuxuu ku shaqaynayaa Siyaasadda toosan ee ka soo horjeedda Siyaasadda gurrancan ee Imberyaaliyadda, wuxuuna kaalin weyn ka qaadanayaa kor u dhigidda dhaqdhaqaaqa iyo halganka dhallinyarada Afrika iyo Carabta ay ugu jiraan sidii Ummadahooda horumar loo gaarsiin lahaa. Ururku isagoo buuxinaya kaalintiisa Caalamiga iyo dhaqdhaqaaqa dhallinyarada ee adduunka, wuxuu si buuxda ahmiyad weyn u siinayaa Feestifaallada iyo Kulanmada Caalamiga ah ee dhallinyarada, isaga oo adkeynaya isbahaysiga, saaxiibtinnimada iyo xiriirka Caalaminnimo ee dhallinyarada adduunka, xoojinaayana magaca iyo haybadda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya ku leedahay Adduunweynaha.

## DHAQAALAHA:

Dhaqaalaha waa aasaaska jiritaanka bulsho kasta iyo tiirka horumarka aadamiga iyo abuuridda barwaaqada nolo©leed ee gees kasta ah, gaar ahaan Bulshada Hantiwadaagga iyo xoojinta dhismaheeda wuxuuna la xiriiraa hadba inta horumar laga sameeyo xagga Farsamada, Aqoonta Cilmiga, Sayniska iyo Teknolojiyada la xiriirta kobcinta dhaqaalaha iyo hagaajinta xaaladda nolosha Dadweynaha.

Ururku wuxuu aad u qiimeynayaa horumarkii uu Kacaanku gaaray iyo isbeddelkii aasaasiga ahaa ee uu ka riday



dhinaca dhaqaalaha iyo horumarinta xoogagga wax soo saaridda, taas oo sii gogol xaartay abuuritaanka xiriir bulsho oo ku fadhiya lahaansha guud iyo abuuridda garaad cusub ee Ummadeed.

Sidaas awgeed Ururku isaga oo heegan u ah himilada fog ee Kacaanku ka leeyahay Warshedeynta Dalka kuna shaqaynaya Barnaamijka Xisbiga, ayaa wuxuu adkaynayaa u qaadidda iyo ballaarinta warshadaha, wuxuuna joogsare teynayaa kobcinta iyo horumarinta wax soo saarka beeraha, iyo Warshadaha, isagoo adeegsanaya aqoonta cilmiga iyo Teknolojiyada. Ururku wuxuu kaloo si buuxda oo aan hakasho lahayn u fulinayaa Qorshaha 5ta sano ee hadda socda iyo qorshahe walba ee Dalka loo samayn doono, isagoo saldhig uga dhigaya Mabda'a ku tartanka shaqada Hantiwadaagga iyo kor u qaadidda awoodda wax soo saarka Dalka.

Ururku isaga oo xusuusan horumarka uu Kacaanku ka sameeyey dhinaca Beeraha, Iskaashatooyinka iyo Mashaariicda Cuntada Degdegga ah oo kaalin weyn ka qaatay kobcinta dhaqaalaha iyo hagaajinta nolosha dadweynaha ayaa wuxuu ku dhiiri gelinayaa dhallinyarada Iskaashatooyinka, sidii ay sare ugu qaadi lahaayeen kordhinta tacabka iyo aqoonta farsamada, wuxuuna hirgelinayaa himilada Xisbiga oo ah dejinta dadka Reer Guuraaga ah iyo gaarsiinta Iskaashatooyinka ku isticmaalka Teknolojiyada cusub iyo ku baahinta Beeraleyda, Reer Guuraaga iyo guud ahaan dadweynaha waxbarashada guud, xoojinta iyo joogteynta Kacaanka Aqoonta.

## XAGGA BULSHADA:

Horumarkii iyo isbeddelkii dhaqaale ee Kacaanku wuxuu suurto geliyey abuuridda dhaqan bulsho ee gees kasta ah, maxaa yeelay saldhigga dhaqaaleedka cusub wuxuu soo ifbaxay dhaqan aqooneed oo saameeyey xubin kasta ee nolosha, mana aha ujeeddada laga leeyahay arrimaha dhaqaalaha mid ka go'naan karta dhismaha iyo dejinta Caddaaladda Ijtimaaciga ah iyo aasaasidda bulsho ka fayow aqoondarri, gaajo iyo cudur, waayo Kacaankuba wuxuu u dhashay in uu ummadda ka xoreeyo arrimahaas iyaga ah.

Haddaba. himilada dhabta ee dhallinyaradu waa xoojinta istraateejiyada iyo bartilmaameedka Kacaanka oo ah dhismaha bulsho hantiwadaag ah. Si loo gaarana aragtidaas Kacaannimo. waxaa lagama maarmaan ah in la abuuro qof ka xor ah cadawyada dabeeciga iyo kuwa ijtimaaciga ahba, taasoo aan ku xaqiiqoobayn riyo nasiib, balse ay ku dhaboobi karto oo keliya hawlgalinta joogtada ah ee dhallinyarada guud ahaan dadweynaha Soomaaliyeed. Si taas u rumowdo, dhallinyaradu waxay tallaabooyin cad ka qaadayaan isna hordhigayaan ku baahinta beeraleyda, reer guuraaga iyo dadweynaha oo idil waxbarashada aqoonta guud, xoojinta iyo joogtaynta kacaanka aqooneed iyo hanashada farsamada cilmiga iyo teknolojiyada, si loo hormariyo loona hagaajiyo xiriirka bulshada iyo xaaladda nololeed ee dadweynaha Soomaaliyeed lana abuuro dhaqan iyo xiriir cusub oo hantiwadaag ah saamaynayana bulshada qoys kasta iyo qof walbaba.

Ururku wuxuu sare u qaadayaa horeyna u marinayaa dhaqanka iyo anshaxa suubban ee dadweynaha, wuxuuna horay u dhigayaa dhaqdhaqaaqa isboortiga iyo fanka, isagoo adkaynaya dhisaayana kalsoonida iyo aqoonta dhallinyarada ee xagga fanka iyo isboortiga. Iyada oo taas la xaqiijinayo, Ururku wuxuu diyaarinayaa abaabulayaana kooxo fan iyo kuwo isboorti ee raacsan Ururka iyo Xarumahooda waxbarashada isla markaana wuxuu ka xoojinayaa xagga qalabka iyo farsamooyinka ee la xiriira hawlahaas.

Ururku wuxuu dagaal naxariis la'aan ah ku qaadayaa dhaqannada xunxun sida: qabiilka, eexda, laaluushka, biroqradiyadda,, danaysiga iwm.

Ururku wuxuu kaalin weyn ka qaadanayaa xoojinayaana arrimaha waxbarashada, caafimaadka iyo nabadgelyada, isaga oo kaashanaya hay'adaha ku shaqada leh, Ururrada Bulshada kale iyo guud ahaan dadweynaha, si loo sugu daryeelka guud iyo arrimaha aasaasiga ah ee bulshada, loona gaaro horumar ballaaran iyo ilbaxnimo wada saameysa nolosha guud ee dadka iyo dagaankiisa.

Ururku isaga oo fulinaya Barnaamijka XHKS. Wuxuu xubnihiisa iyo guud ahaan dhallinyarada Soomaaliyeed ku baraarujinayaa ahmiyadda waxbarashada, kordhinta aqoonta guud iyo sare u qaadidda garaadka siyaasiga ah ee dhallinyarada. wuxuuna tallaabooyin muuqda ka qaadayaa arrimaha soo socda:



1. Kala dagaallanka wax qoris la'aanta iyo wax akhris la'aanta dhallinyarada dhexdooda iyo guud ahaan bulshada:
2. Kordhinta aqoonta farsamada iyo xirfadaha kala geddisan ee dhallinyarada:
3. Hagaajinta tayda iyo himilada waxbarashada ee bulshada:
4. Ka faa'iidaysiga deeqaha waxbarashada ee Machadyada iyo Kulliyadaha Jaamacadda ee gudaha iyo kuwa dibaddaba, iyada oo tixgelin gaar ah la siinayo dhallinyarada shaqaysa kuwa ugu firfircoon iyo xubnaha kale ee muujiya hawlkarnimo iyo kacaannimo dheeraad ah.
5. Abaabulidda iyo fidinta Maktabadaha wax akhriska Gobollada, Degmooyinka, Xarumaha waxbarashada iyo meelaha shaqada:
6. U gogol xaaridda abuuritaanka Machadka Tababarka hawlkareennada dhallinyarada:
7. Soo saaridda Buugaag, Wargeysyo iyo Qoraallo Dhallinyaro oo baahiya aqoonta iyo aragtida cilmiga ah una fura dhallinyarada himmada qoraalka iyo waxbarashada:
8. Qabanqaabin aqoon-isweydaarsiyo iyo dood cilmi ah ee dhex marta dhallinyarada iyo guud ahaan bulshada.

Abuuritaanka guutada hawlaha gurmadka (Birigaato) ee Ururka Dhallinyarada wuxuu ka qayb qaadan doonaa hawlaha lagu hirgelinaayo horumarka bulshada ee xagga dhaqaalaha, siyaasadda, dhismaha, caafimaadka iyo waxbarashada, wuxuuna dhallinyarada iyo bulshadaba ku abuurayaa ku dhiirranaanta shaqada waqti walba iyo goor kasta, wuxuuna taageero weyn ka geysanayaa xoojinta iyo hirgelinta Iskaashatooyinka, caafimaadka iyo nabadgelyada iyo mashaariicda dhismaha degdegga ah, iyada oo saldhiggoodu yahay mabda' ku tartanka shaqada hantiwadaagga ah iyo hirgelinta hal-ku-dhegga dhallinyarada «TACAB IYO TACLIIN».

## XEERKA URURKA DHALLINYARADA SOOMAALIYEED

### A R A R

Taariikhdu waxay in baraysaa in isbeddelka Bulshada Aadamiga aanu ku imaan karin rabid laabla-kac ah, ayse ku dhaboobi karto halgan joogta ah. iyada oo laga faa'iideysanaayo Xeerarka horumarka dabeecadda iyo Bulshada.

Isbeddellada kacaaneed ee ka dhashay adduunka ilaa iyo curashadii kacaankii weynaa ee Oktoobar 1917, bilowgii Casriga kala guurka. laga guuraayo Hantigoosadka loona guurayo Hantiwadaagga, waxay waa cusub u furtay dadyowgii dulmanaa ee lagu kadeedaayey habkii dhaqan-dhaqaale ee hantigoosadka ahaa, waxaana soo ifbaxay oo xaqiiqoobay lagama maarmaanimada iyo sarreynta habka Hantiwadaagga iyo kaalinta wax ku oolka ah ee ay dabaqadda Shaqaalaha adduunka ka ciyaareyso hoggaaminta siyaasadeed ee waayaha cusub.

Haddii Ummadi Dhallinyaradeedu kala daadsan tahay waxay ka soo ifbaxdaa heerka horumarkeeda, waxaana adkaata sidii loo xallin lahaa dhibaatooyinka dib u dhaca dhaqaalaha, siyaasadda iyo Bulshadaba. Halkaa waxaa ka muuqata in horumarka bulshadu si weyn ugu xiran yahay kaalinta dhallinyarada. Mana jirto Ummad dhallinyaradeedu ka fadhido wax qabadka, hase ahaatee, waxaa qiimeynta gaar ah lihi waa hadba sida ay uga qeyb qaataan hawlaha bulshada. firfircoonaantooda iyo fikirka ay haystaan, waxayna ku xiran tahay hadba heerka uu taagan yahay abaabulkooda iyo qaabkooda Ururnima.

Waxaa la ogsoon yahay in waayaha cusubi gaarsiiyey dhallinyarada inay si caalaminnimo ah uga qeyb galaan halganka loogu jiro madaxbannaanida, dimoqraadiyadda, nabadda iyo Hantiwdaagga, si loo xoojiyo Jabhadda ballaaran ee ka soo horjeedda, xabaashiisana qodeysa cadowga dadnimada ee Imberyaaliyadda, gumeysiga, gumeysiga cusub, fashiismada, sahyuuniyadda iyo midab kala sooca.

Haddaba, ka qayb qaadashada hawlaha ee dhallinyarada, ku xirnaanta iyo ku dhiirranaanta halganka noloshu codsanayso iyo u beddelidda wax qabadkooda runta la taaban karo, waxay salka ku haysaa siday u dareensan yihiin una abbaaraan dagaalka loogu jiiro horumarka, ha shaato lagdanka dabeecadeed ama loollanka dabaqadeed ee bulshada.

Isla markaasna qaabka iyo noocyada da'ada soo koreysa ee bulshadu waxay sawir cad ka bixisaa aayaha Ummaddaas, siduu Xoghayaha Guud ee XHKS ku yiri: «Adduunka, dal kasta waxaa qiimaha weyn lihi xarakada waddaniga abuura, u dagaallama horukaca iyo midnimada ummaddiisa, la dirira waxa dalkiisa iyo dadkiisa qeybinaaya oo cadawgiisa ah, waxaa ugu horreeya dhallinyarada».

Sidaas darteed, ayay baalasha hore kaalinta dhallinyarada kaga taal Barnaamijka iyo Xeerka Xisbiga Hantiwadaagga ah, iyo kuwa horusocodka ahba.

Waxay Xisbiyadaasi waajib isaga dhigaan dhismaha Ururada Bulshada, si ay ugu guuleystaan xilka taariikhiga ah ee horyaalla iyo waajibaadka laga fulinaayo hadba marxaladda la marayo.

Dhismaha Hantiwadaagga dalkeenna oo galay marxalad cusub oo taariikhi ah, taas oo maalin walba aynu goobjoog u nahay, kuna hawlan nahay isbeddellada kacaaneed iyo ka miro dhallinta hantiwadaagga, iyo gaaridda horumarka degdegga ah, taasoo ah laba kacleynta iyo kordhinta hawliga socodka kacaanka oo ay aasaasi u tahay abuuritaanka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, nooca cusub ah, oo u aqoonsaday Ururka dhallinyara kaydka iyo kaaliyaha ugu firfircoon ee Xisbiga, waxay dhallinyarada dusha ka saareysaa xil aad u culus iyo in ay la yimaadaan firfircooni, nafhurnimo iyo tayo wax qabad leh oo aan xad lahayn.

Ayada oo XHKS siinayo dhallinyarada iyo Ururrada kale ee bulshada aragti gooni ah, salna ay u tahay fulinta Barnaamijka Xisbiga, hanashada iyo hoggaaminta dadweynaha ee Xisbiga iyo ku guuleysiga dhismaha Hantiwadaagga, ayuu Kalfadhigiisii 3aad Golaha Dhexe ee XHKS xeershay dib-u-habaynta Ururka dhallinyarada Soomaaliyeed, si loo dhiso Urur dhallinyaro oo lixaad leh. qeyb horana ka qaata halganka loogu jiro horu-

marinta dhaqaalaha, siyaasadda iyo abuuridda ruuxa cusub oo dhallinyarada ah, xambaarsanna himilada Xisbiga iyo qofnimada Hantiwadaagga, una halgama oo daafaca dhismaha hantiwadaagga.

Si Ururku u guto xilkaas taariikhiga ee fulinta Barnaamijka XHKS, iyo ka dhabeynta ahaantiisa kaydka iyo kaaliyaha ugu firfircoon ee XHKS, waxaa lagama maarmaan ah in la hirgeliyo, si kasmo lehna loogu dhaqmo Xeerka Ururka dhallinyarada ee uu guddoonsaday Shirweynihii 1aad ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed. Hadba heerka lagu fuliyo, sida loo dhowro loona ilaaliyo sharciyada iyo qodobbada Ururka Dhallinyarada, aya ku xiran tahay ahaantiisa kaydka iyo kaaliyaha ugu firfircoon ee XHKS, iyo Ururka rasmiga ah ee mideeya Dhallinyarada J.D.S.; Sidaasi darteed, ayay waajib ku tahay xubnaha Ururka Dhallinyarada in ay ku camal falaan Xeerkan.

## MABAADI'DA GUUD :

Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waa Urur bulsheed hantiwadaag ah oo Ururiya Dhallinyarada Soomaaliyeed ee ka kala socota dhallinyarada meelaha shaqada iyo wax soo saaritaanka, dhallinyarada meelaha Waxbarashada, sida : Dhallinyarada Jaamicadaha, Machadyada iyo Dugsiyada Sare, dhallinyarada Iskaashatooyinka iyo Beeraleyda, dhallinyarada Guulwadayaasha Ummadda iyo da'ad soo koreysa, sida : Ubaxa Kacaanka Oktoobar, Kaaha Kacaanka Oktoobar iyo dhallinta Kacaanka. Ururkani wuxuu isu aqoonsanyahay inuu yahay Ururka dhallinyarada ee XHKS, ahna kaydka iyo kaaliyaha ugu firfircoon ee XHKS.

Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waxaa weeye isha ugu weyn ee soo saarta Kaadarka ugu firfircoon iyo hawlwadeenno la hubiyey oo waayo arag ah, isagoo Ururka Dhallinyaradu yahay fuliyaha shardi la'aaneed ee Barnaamijka XHKS, Qorshaha dalka iyo dhismaha hantiwadaagga, ahna abaabulaha iyo mideeyaha dhallinyaraweynta isugu jirta, kana kala timid kooxaha iyo dabaqadaha ay bulshadu ka kooban tahay, isla markaasna ka dhex fuliya ujeeddooyinka iyo mabaadi'da XHKS, taas oo u suurta gelineysa XHKS in uu ku baahiyo aydoloojiyadiisa iyo wax qabadiisa dhallinyarada iyo guud ahaan dadweynaha, iyo in meel bannaan oo aan ciriirsi lahayn la soo taago kooxaha kacaandiidka ah iyo dhiigmiirtayaasha.



Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waxaa hal-hayskiisu yahay «Tacab, Tacliin iyo difaaca Kacaanka Hantiwadaagga». Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waa Urur ay xubnihiisa kulmisay aragtida Hantiwadaagga Cilmiga ah, xubnihiisa ay waajib ku tahay barashadiisa, baahintiisa iyo ku dhaqankiisa.

Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waa Urur xubnihiisusu yihiin u horseedka hawlaha la xiriira kordhinta dhaqaalaha, gaar ahaan kordhinta tacabka, Warshadaha, Beeraha, Badda, Xoolaha iyo guud ahaan wax soo saaritaanka, gaarsiinta dadweynaha aqoonta guud iyo garaad siyaasadeed oo sarreeya, ku abuuridda xubnihiisa waddan jacayl, kacaannimo iyo kasmo dabaqadeed; ku beerista dhallinyarada shaqo-jaceyl, kala dambayn, disibliin adag iyo feejignaan kacaannimo, Barbaarinta iyo kalkaalinta U.K.O, horumarinta Xarumaha Dhallinta Kacaanka, horumarinta dhaqanka Hantiwadaagga, hiddaha, Anshaxa iyo asluubta suuban ee Dadweynaha Soomaaliyeed, la dagaallanka caadooyinka iyo dhaqammada dibusocoka ah, sida : qabiilka, gobolleysiga, xatooyada, eexda, iwm, ee ka haray hababkii dhaqan-dhaqaale ee isku dulnoolaadka, gumeysiga iyo gumeysiga cusub, iyo waxa dulleeya dadnimada, sida : Qaadka, Khamriga, iwm, horumarinta Fanka iyo Ishoortiga daafacaadda midnimada, xornimada hantiwadaagga iyo guulaha Kacaanka hantiwadaagga ah, Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed wuxuu dagaal qaraar oo aan naxariis lahayn kula jiraa cadowga gudaha iyo dibadda ee Ummadda, sida : imberyaaliyadda, gumeysiga, gumeysiga cusub, fashiismada, sahyuuniyadda iyo dabadhilifkooda, isla markaana taageerayaa dhallinyarada Ummadaha dulman ee gumeysiga ku hoos nool.

Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed wuxuu yahay qeyb ka mid ah oo aan marna ka go'i karin dhaqdhaqaaqa caalamiga ee dhallinyarada horusocodka ah, wuxuuna la yeeshaa xiriir caalaminnimo dhallinyarada waddammada hantiwadaagga ah iyo Ururrada Dhallinyarada ee Xisbiyada horusocodka ah ee ay xiriirka leeyihiin XHKS.

Mabda'a abaabuleedka lagu fulinayo waajibaadka kor ku xusan waa Dimoqraadiyada guddoonka dhexe, oo xubnaha u xaqiijinaysa inay si joogta ah, oo isdaba joog ah, u horumarinta, xiriirka dhexdooda ahna, cilaaqaadka hay'adaha sare, Guddiyada hoose iyo xubnaha ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed, salna looga dhigayo mabda'a iskaashiga, wada tashiga, mideynta siyaasadda iyo abaabulka, aragtida iyo hirgelinta dhaliilka iyo is-dhaliilka, xulka, diyaarinta iyo kala qeybinta hawl kareennada, kormeerka fulinta hawlaha.

## QODOBKA 1AAD

## MAGACA XARUNTA IYO ASTAANTA URURKA

Xarunta Ururka Dhallinyarada waa Magaala-madaxda JDS., «Muqdisho», waxaana lagu magacaabaa «URURKA DHALLINYARA SOOMAALIYEED».

Astaanta Ururka waa «Calan Buluug ah, dhexda koobin cad kaga taallo, oo ay ku dhex sawiran yihiin wiil iyo gabadh hollac gacanta ku sita, koobaabinta dusheeda waxaa ku sawiran Xiddig shan geesood ah oo tilmaamaysa Midnimada Ummadda Soomaaliyeed.

## QODOBKA 2AAD

## WAAJIBAADKA XUBNAHA

1. In uu dhiibo kaydka joogtada ah ee bil walba, iyo lacagta soo gelitaanka.

2. In uu u shaqeeyo si tusaale iyo ku dayasho leh, iyo in uu si habsami ah u barto, una darso Cilmiga iyo Teknolojiyada la xiriirta shaqadiisa, uuna horseed u noqdo himilooyinka hantiwadaagga, horayna u mariyo xoogagga wax soo saarka, isaga oo isticmaalaya aragtida ugu dambeysa ee cilmiga, si loo hirgeliyo himilada Xisbiga xagga horumarinta dhaqaalaha dalka.

3. In uu barto aragtida cilmiga ah ee Maarkiismada-Leninismada, horayna u mariyo kartida maskaxdiisa iyo jir-



kiisa., caafimaadkiisana ku tiiriyo xagga Isboortiga, iyo inuu noqdo qof asluub iyo anshax hantiwadaag leh.

## QODOBKA 3AAD

## XUQUUQDA XUBNAHA

1. In uu si buuxda uga qeybqaato doodaha ku saabsan hawlaha Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed, fadhiyada, kulammada, shirarka iyo Shirweynayaasha, isaga oo si cad u soo jeedinaya, daafacaayana fikradihiisa, isla markaasna ku muujin kara talooyinkiisa wargeysyada Dhallinyarada Soomaaliyeed.

2. In uu doorto, loona dooran karo, jagooyinka kala geddisan ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed.

3. In uu dhaliil ugu soo jeediyo hawlaha xubnaha iyo wax qabadka fuliyeyaasha hay'adaha hoggaaminta ee Ururka, fadhiyada, kulammada iyo Shirweynayaasha, salna uga dhigaayo dhaliilihiisa hagaajinta iyo horumarinta shaqada.

4. In uu goobjoog ka ahaado doodaha iyo dhaliilaha ku saabsan shaqadiisa ama loo soo jeedinaayo qof ahaantiisa.

5. In uu talooyinkiisa iyo su'aalihiisa gaarsiin karo hay'adaha sare ilaa Guddiga Dhexe ee Dhallinyarada Soomaaliyeed.

6. In uu ka faa'iideysto Golayaasha Dhallinyarada, xag aqooneed iyo xag ciyaaraba.

## QODOBKA 4AAD

## HABKA SOO GELITAANKA URURKA

1. Ururka waxaa ka mid noqon kara qof kasta oo Soomaali ah da'diisuna ka yarayn 15 (shan iyo toban) sano, isla markaasna aqoonsan Xeerka iyo ujeeddooyinka

Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed, kuna shaqeynaya waajibaadka loo xilsaaray iyo go'aannada hay'adaha Ururka si daacadnimo iyo hagar la'aan ah.

2. Waxaa loo soo geli karaa Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed si keli keli ah, oo khiyaari ah, marka ay da'doodu gaarto 15 sano.

3. Qofkii raba in uu ka mid noqdo Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed wuxuu arji u soo gudbinayaa Guddiga u-gu dhow ee Ururka, oo ay khasab tahay in uu baro codsadaha Xeerka iyo ujeeddooyinka Ururka, intaan loo-oggolaan Xubinnimada.

4. Codsadaha waxaa xubin ahaan loogu aqoonsan karaa go'aanka Guddiga arrintu khuseyso, kaddib markii la falanqeeyey, lana baaray arjigiisa.

5. Qofku wuxuu xubinnimada Ururka Dhallinyarada ku da oo ah 30 jir iyo isagoo dambi awgiis looga saaray waayi karaa isagoo ka gudbay da'da dhallinyarannima-Ururka, hase ahaatee, da'du ma xirayso Guddiyada iyo hawlwadeenka Ururka.

## QODOBKA 5AAD

## ANSHAX-MARINTA

1. Xubinta jebisa Xeerka, oo aanan fulin go'aannada Ururka Dhallinyarada, waxay mutaysanaysaa Anshax-marinta ah :-

a) Cannaan. b) Digniin. t ) Xil ka Wareejin j ) Urur ka saarid.

2. Xeer-nidaamiye u gaar ah anshax-marinta Ururka, waxaa soo diyaarinaaya Guddiga Fulinta, waxaana aqbali doona Fadhiga Guddiga Dhexe ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed.



## QODOBKA 6AAD

## QAABKA DHISMAHA URURKA DHALLINYARADA SOOM.

1. Qaabka dhismaha Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waxaa saldhig u ah Dimoqraadiyadda Guddoonka dhexe.

   a) Doorashada hay'adaha hoggaaminta Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waa min hoos ilaa kor.

   b) Hay'adaha hoggaaminta waxay warbixin joogto ah siiyaan kana helaan Laamaha iyo Guddiyada Hoose ee Ururka.

   t) Disibliin adag iyo u hoggaansanaanta inta yar talada inta badan waa ku khasab Ururka.

   j ) Go'aannada iyo amarrada hay'adaha sare ee Ururka waa ku khasab fulintooda hay'adaha hoose.

2. Ururka wuxuu u abaabulan yahay hab degaan, hab Dugsi iyo hab tacab intaba.

3. Hay'adaha hoggaaminta Ururka Dhallinyarada waa :-

   b) Kulanka — oo ah Guddiyada iyo Tuuloeyinka:

   t ) Shirka — oo ah Gobollada iyo Degmooyinka:

   j ) Shirweynaha — oo ah midka kulmiya dhammaan qeybaha kala duwan ee Ururka.

4. Kulammada, shirarka iyo Shirweynayaasha, waxaa lagu doortaa Guddiyada ku aadan heerkooda.

5. Dhammaan xubnaha hay'adaha hoggaaminta Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waxaa lagu dooranayaa si waafaqsan dimoqraadiyadda guddoonka dhexe.

## QODOBKA 7AAD

## SHIRWEYNAHA URURKA

1. Hay'adda ugu sarreysa Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waa Shirweynaha. Waxaa la qabtaa 3dii sanoba

mar, waxaana la soo bandhigayaa ajendihiisa muddo saddex (3) bilood ka hor.

Shirweyne aan caadi ahayn waxaa isugu yeeri kara Guddiga dhexe ee Ururka, ama haddey codsadaan (2/3) Guddiyada Gobollada, wuxuuna meelmar yahay haddii ay joogaan 2/3 in ka badan Ergooyinka Shirweynaha.

2. Ergooyinka Shirweynaha imaanaya waxaa laga soo doortaa shirarka Gobollada, Xarumaha waxbarashada iyo Goobaha Shaqada.

3. Shirweynuhu :-

b) Wuxuu dhageystaa, ka doodaa aqbalaana warbixinta Guddiga dhexe:

t) Wuxuu caddeeyaa hawlaha iyo xilka Ururka Dhallinyarada, Ubaxa Kacaanka Oktoobar iyo Xarumaha dhallinta Kacaanka, wuxuuna oggolaadaa Xeerka Ururka.

j) Wuxuu doortaa, gooyaana tirada Guddiga Dhexe ee Ururka Dhallinyarada, iyo xubin-sugayaasha Guddiga Dhexe.

4. Guddiga Dhexe :
Guddiga Dhexe ee Ururka waxaa uu fuliyaa go'aannada Shirweynaha, waana hoggaanka ugu sarreeya inta u dhexaysa labada shirweyne. Guddiga Dexe waxa uu mas'uul ka yahay xiriirka Dhallinyarada Soomaaliyeed la leeyihiin XHKS, Hay'adaha iyo Ururrada kala duwan ee bulshada, wuxuuna soo jeediyaa xubnaha loo qaadan karo XHKS.

5. Guddiga Dhexe fadhigiisu wuxuu dhacaa ugu yaraan sannadkiiba mar.

6. Guddiga Dhexe wuxuu doortaa Guddiga Fulinta iyo Guddiga Anshaxa iyo Baarista, wuxuuna habeeyaa hawlaha Ururka inta u dhaxaysa fadhiyadooda, wuxuu meelmariyaa arrimaha aasaasiga ah ee siyaasadda, aydoloojiyadda iyo dhaqaalaha, wuxuuna aqbalaa warbixinnada hay'adaha hoggaaminta.



7. Haddii xubin ka mid ah Guddiga Dhexe ka fariisato shaqada, ama laga fariisiyo, waxaa Guddiga Dhexe uu awood u leeyahay in uu ku buuxiyo jagadaas xubin suge Guddiga Dhexe. Xubin sugayaashu waxay xaq u leeyihiin in ay fadhiyada iyo doodaha Guddiga Dexe ka qeybgalaan, hase yeeshee cod kama dhiiban karaan.

## QODOBKA 8AAD

## GUDDIGA FULINTA

1. Guddiga Fulinta oo uu doorto tirada xubnihiisa uuna gooyo Guddiga Dhexe, wuxuu ka kooban yahay Madaxda Waaxyaha ka farcama Guddiga Dhexe, waana Xafiiska ugu sarreeya, fuliyana hawlaha Guddiga Dhexe, inta u dhaxaysa fadhiyadiisa.

2. Guddiga Fulintu wuxuu ka kooban yahay Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeennada kiiwaad, labaad, waaxyo uu tiradooda gooyo Guddiga Dhexe, ayna ka mid yihiin kuwa soo socda, iyo Guddigag Anshaxa iyo Baarista.

1. Guddoomiye
2. Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad
3. Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad
4. Waaxda Aydoloojiyada iyo Brobogaandada
5. » Xiriirka Dibedda
6. » Dhallinyarada Shaqeysa iyo Iskaashatooyinka
7. » Xarumaha Waxbarashada
8. » Guutada Hawlaha Gurmadka (Bergata)
9. » Ubaxa iyo Dhallinta Kacaanka
10. » Maamulka iyo Dhaqaalaha
11. » Isboortiga iyo Fanka
12. » Abaabulka iyo Kicinta
13. » Guddiga Anshaxa iyo Baarista.

## QODOBKA 9AAD

## GUDDOOMIYAHA URURKA

1. Guddoomiyuhu waa hoggaanka Sare ee Ururka, waxaana doorta Guddiga Dhexe, wuxuuna Ururka wakiil uga yahay, shar'i ahaan. Hay'adaha Dawladda, Shirkadaha. Ururrada Bulshada dalka gudihiisa iyo dibeddaba.

2. Guddoomiyaha waxaa xilkiisu yahay :

   b) inuu hoggaamiyo hawlaha taagan ee Guddiga Fulinta, fadhiyada Guddiga Dhexe, iyo hawsha Guddiga Anshaxa iyo Baarista.

   t) wuxuu si toos ah mas'uul uga yahay xoojinta Xiriirka ka dhexeeya Ururka iyo Xisbiga.

## QODOBKA 10AAD

## GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA 1AAD

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad waxaa doorta Guddiga Dhexe, wuxuuna qabanayaa jagada Guddoomiyaha marka uu Guddoomiyuhu maqan yahay, ama uu xilkiisa gudan kari waayo, wuxuuna Guddoomiyaha kaaliye uga yahay arrimaha aydoloojiyada iyo Barobogaandada, abaabulka iyo Kicinta, Dhallinyarada shaqeysa iyo Iskaashatooyinka. Dhallinyarada Xubnaha Waxbarashada, Ubaxa Kacaanka Oktoobar iyo Xarumaha Dhallinta Kacaanka. Wuxuuna xiriiriyaa, kormeeraana hawlaha Xoghayayaasha Waaxyaha u qaabbilsan waxyaabahaas asaga toos ugu xirma.

## QODOBKA 11AAD

## GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA 2AAD

Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad waxaa doorta Guddiga Dhexe, wuxuuna qabtaa xilka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad. Wuxuu ka kaaliyaa Guddoomiyaha arrimaha la xiriiraa Dibadda, Guutada hawlaha gurmadka (Bregato), Isboortiga iyo Fanka, wuxuuna xiriiriyaa, kormeeraana hawlaha Xoghayayaasha Waaxyaha u qaabbilsan waxyaabahaas oo asaga toos ugu xirma.



## QODOBKA 12AAD

## WAAXDA AYDOLOOJIYADA IYO BROBAGAANDADA

Waaxdani xilkeedu ugu weyni wuxuu yahay diyaarinta kaadarka u bisil hawlaha Ururka, iyadoo fulinaysa waajibaadka soo socda :-

1. Qabanqaabinta tababarro iyo seminaarro kala duwan oo kor loogu qaadayo, laguna faafinayo mabaabi'da hantiwadaagga, dhallinyarada dhexdeeda.
2. Soo saaridda Wargeysyo iyo qoraallo ku saabsan arrimaha Dhallinyarada, isla markaasna taabanayo horumarka dalkeenna, guulaha Kacaanku gaaraayo iyo xaaladda guud ee Adduunka.
3. Waxay faafinaysaa borobogaandada cilmiga ah ee hantiwadaagga, isla markaana waxay ka hortageysaa dacaayadaha imberyaaliyadda, dibusocodka, gumeysiga, gumeysiga cusub iyo wixii la halmaala.
4. Waxay abuuraysaa farsamayaqaankeeda gaar ahaaneed. xagga wargeysyada, qoraallada, filimada, sawirrada, isloogannada, daabacaadda, iwm.
5. Waxay u tabaabushanaysaa abuuridda Machadka Tababarka Siyaasadda ee Dhallinyarada Soomaaliyeed, iyadoo la xiriiraysa lana kaashanaysa Machadka Culuunta Siyaasiga ee Xisbiga iyo Machadka Sare ee Ururrada Dhallinyara Hantiwadaagga ah.

## QODOBKA 13AAD

## WAAXDA ABAABULKA IYO KICINTA

1. Waaxdani waxaa xilkeedu yahay abaabulka, isku xirka guddiga Dhexe iyo Guddiyada Gobollada iyo Degmooyinka, isla markaasna isla socodsiinta dhaqdhaqaaqa hawleed ee kala geddisan ee Dhallinyarada Gobollada iyo Degmooyinku ay ku wadaan goobahooda:

2. Kaydinta tira-koobka iyo xafidaadda dukumentiga Ururka iyo warbixinnada Gobollada iyo Degmooyinka:

3. Qabanqaabinta kulannada Dhallinyarada iyo Festifaalladooda heer Gobol iyo heer Degmo.

## QODOBKA 14AAD

### WAAXDA ARRIMAHA DIBEDDA

1. Waaxdani xilkeedu wuxuu yahay, xoojinta iyo horumarinta xiriirka iyo magaca wanaagsan ay J. D. Soomaaliya ku leedahay ummadaha horusocodka ee adduunka.

2. Isku xirka Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed iyo Ururrada Dhallinyarada horusocodka ah iyo kuwa dalalka hantiwadaagga, iyadoo ka qeybqaadanaysa shirarka iyo kulanmada dhallinyarada horusocodka ah ee adduunka, muujinaysana kaalinteenna Caalaminnimo.

3. Ku baahinta dhallinyarada adduunka hawlaha iyo dhaqdhaqaaqa Ururka dhallinyarada Soomaaliyeed iyo dareensiinta, ka raarididda dhallinyarada adduunka qaddiyadda dalalka Soomaaliyeed ee weli ku hoos nool midiidinnimada gumeysiga.

4. In ay la socodsiiso dhallinyarada Soomaaliyeed dhaqdhaqaaqyada dunida iyo halganka dhallinyarada adduunku ugu jirto sidii dalalkooda ay horumar u gaarsiin lahaayeen.

5. La socodka iyo wax ka qabashada arrimaha ardada Soomaaliyeed ee dibadda wax ku barata iyo u tabintooda wararka dalka iyo dhaqdhaqaaqa hawleed ee Ururka Dhallinyarada.

6. Isku xirka iyo adkaynta iskaashiga dhallinyarada Soomaaliyeed ee weli ku hoos nool gumeysiga iyo kuwa ku nool J. D. S.



## QODOBKA 15AAD

### WAAXDA DHALLINYARADA SHAQAYSA IYO DHALL. ISKAASHATOOYINKA

Waaxdani waxaa waajibaadkeedu yahay :

1. Ku dhiirrigelinta dhallinyarada shaqeysa iyo dhallinyarada Iskaashatooyinka barashada iyo aaminsanaanta aragtida cilmiga ah ee hantiwadaagga, si ay u yeeshaan kasmo dabaqinnimo iyo anshax hantiwadaag.

2. Diyaarinta aqoon isweydaarsiyo lagu kala kororsanaayo waayo-aragnimada shaqada, laguna hagaajinayo xiriirka iyo wada shaqeynta jaallennimo ee dhallinyarada shaqeysa, dhallinyarada Iskaashatooyinka, xoogsatada iyo guud ahaan dadka muruqooda maalka ah, iyadoo lala kaashanayo hay'adaha Hoggaaminta Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo Iskaashatooyinka.

3. Ilaalinta hantida dadweynaha iyo shaqada, iyadoo sare loo qaadayo awoodda wax soo saaridda iyo kobcinta dhaqaalaha, lana fulinayo, sida ugu habboon, qorshaha dalka ee lagu horumarinayo dhaqaalaha, siyaasadda, bulshada, daafacaadda, iwm.

4. Sare u qaadidda aqoonta iyo barashada farsamooyinka kala duwan, iyadoo sal looga dhigaayo mabda'a ku tartanka shaqada hantiwadaagga.

## QODOBKA 16AAD

### WAAXDA XARUMAHA WAXBARASHADA

Waxay waaxdani wakiil ka tahay, guud ahaan, arrimaha dhallinyarada Dugsiyada Sare, Jaamicadaha iyo Macaahidda Sare, xilkeeduna waa :-

1. Ku dhiirrigelinta ardayda waxbarashada iyo ka soo bixidda waajibaadka waxbarashadooda.

2. Dareensiinta ardayda waayaha dalkooda iyo dadkooda, si laysu waafajiyo waxbarashada iyo degaanka dalkeenna.

3. Sare u qaadidda garaadka siyaasadeed ee ardada iyo ku boorrinta ka qaybqaadashada hawlaha lagu horumarinayo dalka;

4. Ka abuuridda xarumaha waxbarashada Guddiyada iyo Xubnaha Ururka iyo hirgelinta ujeeddooyinkiisa iyo Xeerkiisa intaba.

5. Ka abaabulka xarumaha waxbarashada tartamo Isboorti iyo Fan intaba.

6. Isku xirka Macallimiinta, waalidka iyo ardada, si loo horumariyo, loona xoojiyo wada shaqeynta iyo iskaashiga dhexdooda ah.

7. Diyaarinta bandhigyo tartamo waxbarasho oo sare loogu qaadayo aqoonta iyo kasmada siyaasiga ee ardada.

8. Hawlgelinta ardayda xilliyada fasaxa, iyo u abaabulidda ka qeybqaadashada baabi'inta aqoon darrida iyo joogteynta Kacaanka aqooneed ee dalka ka socda.

## QODOBKA 17AAD

## WAAXDA UBAXA IYO DHALLINTA KACAANKA

Waaxdani waxaa waajib ku ah ayna Guddigga Dhexe uga mas'uul tahay in ay ka dhex fuliso Ururka Ubaxa Kacaanka iyo Xarumaha dhallinta Kacaanka, arrimaha soo socda :-

b) Uruurinta iyo barbaarinta toosan ee Ubaxa Kacaanka Oktoobar iyo kormeerka Xarumaha dhallinta kacaanka.

t ) Uruurinta iyo habeynta taariikhda Ubaxa Kacaanka, hagaajinta iyo ballaarinta Xarumaha UKO iyo dhallinta Kacaanka.

j ) Ku abuuridda Carruurta jacaylka waalidka, waddanka Madaxda Kacaanka iyo shaqada.

x ) Ku gargaaridda Ubaxa iyo dhallinta Kacaanka xagga waxbarashada Dugsiyada, Fanka iyo Isboortiga, Muusikada, iwm.

kh) Xoojinta iskaashiga iyo isku xirnaanta Macallimiinta, Waalidka iyo xarumaha Ubaxa K. O. abuuridda xiriir saaxiibtinnimo iyo iskaashi lala yeesho Xarumaha Ubaxa K., dalalka hantiwadaagga iyo kuwa horusocodka ah.

## QODOBKA 18AAD

## WAAXDA MAAMULKA IYO DHAQAALAHA

1. Waxaa xilkeedu yahay in ay kaydiso hantida Ururka, diiwaan gelin adag u yeesho maamulka lacagta iyo qalabka.

2. In ay hagaajiso qaabka uruurinta lacagta, ogaalka dakhliga iyo kharashka lacagta.

3. In ay kaydiso xafidaad adagna u samayso dokumentiga Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed.

4. In ay ilaaliso, daryeeshana qalabka iyo xarumaha dhallinyarada Soomaaliyeed.

5. In ay habeyso maamulka shaqaalaha joogtada ah ee Ururka iyo la socodka arrimahooda.

6. In ay daraasad iyo baaritaan ku samayso habka maalgelinta kaydka Ururka iyo sahmiska ilo dhaqaale cusub oo lagu kobciyo hantida Ururka.

## QODOBKA 19AAD

## WAAXDA GUUTADA GURMADKA (BERGAATO)

1. Waxaa xilkeedu yahay in ay diyaariso hannaankii iyo qalabka gurmadkii hawlaha iyo goobihii shaqada, isla markaasna ku shaqa geliso qeybaha kala duwan ee Ururka, sarena u qaaddo niyadda shaqada iyo hawlkarnimada dhallinyarada.

2. In ay diyaariso tartamo shaqo iyo barnaamijyo lagu hirgelinaayo hawlaha degdegga ah.

3. Inay sahmiso, qorshaysana meelaha lagu hawlgelin ka-

ro ardada waqtiyada fasaxa ay ku jiraan.

4. Waxay heegan uga dhigtaa dhallinyarada shaqa kasta ee degdeg ah iyo xil kasta oo culus. markastana waxay u habaysaa sidii ay firfircooni ugu gudan lahaayeen

## QODOBKA 20AAD

## WAAXDA FANKA IYO ISBOORTIGA

1. Waxaa xilkeedu yahay sare u qaadidda heerka aqoonta iyo jacaylka Fanka iyo Isboortiga ee dhallinyarada, waxay diyaarisaa tababarro ku saabsan barashada iyo horumarinta Fanka iyo Isboortiga.

2. In ay habayso sidii loo suurtagelin lahaa helitaanka qalabka Fanka iyo Isboortiga iyo dhismaha xarumaha la xiriira hirgelintooda.

3. In ay habayso dhisidda koox fan iyo Isboorti ee Ururka Dhallinyarada raacsan. lehna qaab iyo dabeecad hantiwadaagnimo.

4. Ka hirgelinta Isboortiga iyo Fanka meelaha shaqada, xarumaha waxbarashada, Gobollada iyo Degmooyinka, iyo sare u qaadidda qiimaha isboortiga iyo Fanka ay u leeyihiin iyo bulshada.

5. In ay diyaariso tartamo Isboorti iyo Fan oo dhexmara kooxaha Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed iyo Ururrada dhallinyarada dalalka kale ee saaxiibka aynu nahay, iyadoo lala kaashanayo maskaxda hay'adaha dawladda u dhisan Isboortiga iyo Fanka.

## QODOBKA 21AAD

## GUDDIGA ANSHAXA IYO BAARISTA

1. Guddiga Anshaxa iyo Baarista waxaa doortà, tirada xubnihiisana gooya Guddiga Dhexe ee Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuuna ka soo tabiyaa warbixintiisa fadhiyada Guddiga Dhexe.



2. Xubnaha Guddiga Anshaxa iyo Baarista waxay dhexdooda ka doortaan Guddoomiye iyo Guddoomiye Ku-xigeen, Xubnaha Guddiga Anshaxa iyo Baarista waxay ka mid yihiin Guddiga Dhexe ee Ururka, waxayna la shaqeeynayaan Guddoomiyaha Ururka, inta u dhaxaysa fadhiyada Guddiga Dhexe.

3. Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu kormeer iyo baaris ku sameeyo dhammaanba hawlaha Ururka dhallinyarada, wuxuuna isla markaas kormeeraa maamulka iyo Xarumaha dhallinta Kacaanka, wuxuu si joogto ah oo sharci ah u baaraa hawlaha soo socda :-

b) Dedejinta sida saxa ah ee loo horgeliyo go'aannada, abaabulka, disibliinka iyo nidaamka shaqada.

t ) Ilaalinta nidaamka soo gelitaanka xubnaha cusub. qalabka shaqada ee Ururka iyo hantidiisa.

j ) In si habsami ah loo habeeyey qoraallada. doodaha, tallaabooyinka, dacwadaha, iwm.

x ) In la adkeeyo maamulka Lacagta, ilaalinta kaydka Ururka, xil iska saaridda uruuriinta lacagta dhigaalka iyo in ay lahaato diiwaangelin adag, si waxtar lehna loo isticmaalo. ayadoo la tashiilayo dhaqaalaha.

## QODOBKA 22AAD

## URURRADA HOOSE EE DHALLINYARADA

1. Wuxuu ka koobmaa guddiyada Gobollada iyo Degmooyinka, Tuulooyinka iyo Guddiyada xarumaha shaqada iyo waxbarashada.

2. Guddiyadu iyagoo ku shageynaya go'aannada shirweynaha iyo ka Guddiga Dhexe waxaa xilkoodu yahay :-

b) hirgelinta ujeeddooyinka iyo fulinta hawlaha Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed ee ku aadan heerkooda.

t ) kicinta, xamaasad ku beeridda xubnaha Ururka iyo dhallinyarada guud ahaan, si ay u hirgeliyaan waajibaadka ka saaran dhismaha, dhaqaalaha, daafaca

qarannimada, kor u qaadidda hiddaha iyo dhaqanka, Fanka iyo Isboortiga iyo barashada cilmiga aqoonta, baarista iyo teknoloojiyada lagu horumarinaayo xiriirka bulshada hantiwadaagga.

j) u soo gudbinta talooyinka iyo warbixinta joogtada ah Guddiga ka sarreeya.

x) in ay u bandhigaan, baahiyaan fikradaha iyo waayo aragnimada xubnaha ugu firfircoon, kuna boorriyaan dhallinyarada ku dayashadooda.

kh) in ay ka fiirsadaan qof kasta xilka loo dhiibayo inuu kartideeda leeyahay iyo in la baro aragtida Maarkismada-Leninismada si uu daacad ugu noqdo dadkiisa iyo dalkiisaba, una yeesho kasmo dabaqi ah, si xilkasnimo ahna u guto hawsha loo xilsaaray, si geesinimo ahna ugaga hortago caadaadka iyo dhaqannada xunxun.

d) in ay barbaariyaan Ubaxa Kacaanka iyaga oo ka dhex fulinaayo barnaamijka XHKS, lana kaashanaya ku abuuraaya Carruurta firfircooninimada xagga waxbarashada iyo shaqadaba.

## QODOBKA 23AAD

## SHIRARKA GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

Hay'adda ugu sarreysa Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka waa shirka ay isugu yimaadaan Ergooyinka ku beegan heerkooda, Shirka Tuulada (Ergooyinka Guddiyada), Shirka Degmada (Ergooyinka Tuulada, Xaafadaha, Dugsiyada iyo Xarumaha Shaqada), Shirka Gobolka (Ergooyinka Degmooyinka).

1. Shirka Gobolka iyo kan degmadu wuxuu noqonayaa hal mar 3dii sanaba, Shir kasta waxaa la sii sheegayaa qodobbada doodda ugu yaraan 3 bil ka hor.

   Shir walba isagaa awood u leh inuu soo magacaabo Ergada uga qeybqalaysa shirka ka sarreeya. Shirweynaha



Ergooyinka waxaa soo magacaabaa Shirka Gobolka shirka waxaa lagu falanqeeyaa arrimaha la xiriira nolosha dhallinyarada ee heerka iyo fulinta go'aannada hay'adaha Sare. Shirka gobolka iyo kan Guddiga Degmada, waxaa tirada xubnihiisa go'aya Guddiga Dhexe ee Ururka.

2. Labada shir dhexdooda waxaa hawlaha wada Guddiga ku aaddan, guddiga Gobolka iyo guddiga degmada waxay iska dhex doortaan Xafiiska fulinta.

3. Xafiiska Fulinta ee Gobolka waxaa lagu magacaabaa fadhiga Guddiga Gobolka, waxaana aqbala Guddiga Dhexe ee dhallinyarada Soomaaliyeed.

   Xafiiska fulinta ee Degmada waxaa lagu magacaabaa fadhiga Guddiga Degmada, waxaa oggolaada Guddiga Gobolka. Xafiiska fulinta ee tuulada waxaa doorta Guddiga Tuulada, waxaa oggolaanshuhu ku xiran yahay Guddiga Degmada. Guddiga Gobolka wuxuu fadhi isugu imaanayaa ugu yaraan 6dii biloodba mar, kan degmada iyo tuuladana wuxuu fadhigooda dhacaa ugu yaraan... Degmada waxaa isugu yeera Xafiiska fulinta ku aaddraan bishiiba hal mar. Fadhiga Guddiga Gobolka iyo dan heerka fadhigaas, waxaana fadhiga Guddiyada looga doodaa hawlihii la qabtay labadii fadhi inta u dhaxaysay, isla markaana waxaa lagu guddoonsadaa hawlaha la qaban doono.

4. inta u dhaxaysa labada fadhi ee Guddiga Gobolka iyo Degmada waxaa hawsha isku xira fulinayana go'aannadii la gaaray Xafiiska fulinta Gobolka iyo Kan Degmada.

## QODOBKA 24AAD

## URURKA UBAXA KACAANKA OKTOOBAR

1. Ururka Ubaxa Kacaanka Oktoobar waa urur ay leeyihiin Carruurta Jamh. Dimoqraadiga Soomaaliya (U. K. O.). wuxuu mideeyaa, kulmiyaa carruurta da'doodu u dha-

xayso 7 ilaa 14 sano.

2. Ururka UKO waxaa hoggaamiya hawlihiisa Ururka Dhallinyarada, wuxuuna leeyahay barnaamij iyo xeer muujinaya qaabka dhismihiisa, abaabulka arrimihiisa iyo maamulka xarumihiisa.

3. Carruurta UKO marka ay ka baxaan da'da Ubaxa waxay si toosa ayey ugu gudbiyaan xubinnimada U. Dhallinyarada, iyadoo la soo raacinayo warbixintooda.

## QODOBKA 25AAD

## DHAQAALAHA URURKA DHALLINYARADA SOOMAALIYEED.

Dhaqaalaha Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed wuxuu ka kooban yahay :-

1. Kaydka joogtada ah ee dhallinyarada Soomaaliyeed, daabacaadda buugaagta, wargeysyada, Isboortiga. Riwaayadaha, Lacagto soo gelitaanka iyo deeqda loo fidiyo.

2. Bixinta dhigaal bileedka joogtada ah, waxay waajib ku tahay dhammaan xubnaha Ururka Dhllinyrada, taas oo ah sida soo socota :-

   B) Xubnaha dhallinyarada shaqaysa wuxuu bixinayaa qof kasta bishii hal shilin (1, sh.).

   t ) Qof kasta oo dhallinyaro ah oo aan shaqayn ama aan arday ahayn, xubinna ka ah Ururka, wuxuu bixinayaa bishiiba nus shilin (0,50).

3. Xubnaha cusub ee ku soo biiray Ururka dhallinyarada Soomaaliyeed, waxay bixinayaa (2) shilin oo ah lacagta soo gelitaanka.

4. Kaydka Ururka dhallinyarada Soomaaliyeed waxaa loo



isticmaalaa arrimaha khuseeya dhallinyarada, kuwaas oo ah, tababarrada, horumarinta Isboortiga iyo Fanka, xiriirka dibedda, Wargeysyada iyo Daabacaadda, maamulka iyo shirarka, waxaana lagu soo saari doonaa Xeer-nidaamiye u gaar ah.

## QODOBKA 26AAD

## WAX KA BEDDELIDDA XEERKA URURKA DHALLINYARADA SOOMAALIYEED.

Xeerka Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waxaa wax laga beddeli karaa oo keliya marka saddex meelood laba shirweynuhu isku raaco waxaana isla markaas inta labada shirweyne u dhaxaysa awood wax ka beddelka iyo fasiraadda Xeerka leh Guddiga Dhexe ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed.



Dhallinyaro rag iyo dumar leh, oo ah injinneerro, takhaatiir iwm. ayaa Jaamacaadkeennu soo saaraan, mahad waxaa ku leh arrintaas Kacaankii Oktoobar ee 1969kii.



Dhallinyarada Jaamacaduhu waa kaadirkii Kacaanka, waa gaashaanka Ummadda, waa aayatiinka Soomaaliya.





Iskaa wax u qabso iyo jacaylka Ummadda u qabto mabda'aas ay dhallinyarada tusaaleeyaan Shisheeyaha.



Gabdhuhu waa mujtamaca barkiis, waa lagama maarmaan kaalinteedu.




Fanka waxay ku muujiyaan hoballada dhallinyarada ahi shucuurta dhabta ah ee dadweynaha Soomaaliyeed.



Aayatiinkii dalka ee hubaasha ahi waa iyadoo la carbiyo dhallinyarada laguna koriyo waddan jacaylka.



Haye, haa iyo [illegible] diyaar baannu u nahay dhismaha dalkeenna iyo daafaciisa ayay leeyihiin dhallinyarada Soomaaliyeed.




Dhallinyarada Soomaaliyeed maya, maya ayay ku yiraahdeen gardarrada Ruushka, kuuba iyo dabadhilifyada kale.

# WARBIXINTA GUUD EE URURKA DHALLINYARADA SOOMAALIYEED EE SHIRWEYNAHA 1aad EE U. DH. K. S.

Jaalle Xoghayaha Guud ee Xisbiga HKS ahna Madaxweynaha J. D. S. Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee Xisbiga HKS. Xildhibaannada Golaha Dhexe ee Xisbiga HKS iyo Madaxda dawladda. Wakiillada Ururrada Bulshada:

Martida Shirweynaha ee ka kala socota Ururrada Dhallinyarada Caalamiga ah iyo kuwa dalalka saaxiibka nahay:

Dhammaan Ergooyinka Shirweynaha 1aad ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed kana kala socota : Gobollada iyo Degmooyinka dalku ka kooban yahay Dhallinyarada Shaqaysa, Dhallinyarada Jaamacadaha iyo Dugiyada Sare, Dhallinyarada Ciidammada, Dhallinyarada Beeraleyda, dhallinta Kacaanka iyo Ubaxa Kacaanka Oktoobar, iyo dhammaan dhageystayaasha Shirweynaha 1aad ee Ururka Dh. S.

Waxaa ayaan wanaag iyo farxad ballaaran u ah Dhallinyarada Kacaanyahaniinta ah ee Soomaaliyeed iyo inta jecel horumarka iyo Midnimada Ummadda Soomaaliyeed, in maanta goobtaan loo fadhiyo Shirweynihii 1aad ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed, kaddib markii ay ka soo wareegtay 34 (Soddon iyo afar) sano dhismihii Urur Dhallinyaro kii ugu horreeyey (SYL) oo si Ururnimo uga dhismay dalka, kaasoo halgankiisii hakaday guushii Gobannimada kaddib.

Jaalle, Xoghaye, Jaallayaal ii oggolaada in aan magaciina salaan iyo hambalyo ugu gudbiyo dhammaan Dhallinyarada Soomaaliyeed ee horusocodka ah ee aan fursad u helin in ay nagala soo qayb galaan Shirweynaha 1aad ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed.

Waxaa waajib ah inaynu magaca iyo himilada Shirweynaha 1aad ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed ku salaanno kuna xusno Halyeeyadii u geeriyooday Gobannimada iyo geesiyaashii shaqada qaranka Naftooda u huray.

Waxaannu kaloo magaca Shirweynaha iyo dhammaan Dhallinyarada ku nool Jamhuuriyadda ku salaamaynaa una muujinaynaa taageeradeenna, Dhallinyarada iyo dadweynaha Soomaaliyeed ee ku hoos nool Gumaysiga iyo dhallinyarada Adduunka ee horu-socodka ah halgenkana ugu jirta xaqiijinta xuriyadda, Nabadda, Dimuqraadiyadda iyo horu-kaca bulshada.

Jaallayaal, Saaxiibayaal,

Taariikhdu waxay ina faraysaa in isbeddelka bulshada aadamiga aannu ku imaan karin rabid laab-la-kac ayse ku dhaboobi karto halgan joogta ah ayada oo laga faa'iideysanayo xeerarka horumarka dabeecadda iyo bulshada.

Isbeddelada Kacaameed ee ka dhashay adduunka ilaa iyo curashadii Kacaankii weynaa ee Oktoobar 1917kii, bilowgii casriga kala guurka, laga guurayo Hantigoosadka loona guurayo Hantiwadaagga, waxa ay waa cusub u furtay dadyowgii dulmanaa ee lagu kadeedayay habkii dhaqandhaqaale ee Hantigoosadka. Waxaana soo ifbaxay oo xaqiiqoobay lagama maarmaannimada iyo sarreynta habka Hantiwadaagga iyo kaalinta wax ku oolka ah ee ay dabaqadda shaqaalaha ee adduunku ka cayaarayso hoggaaminta siyaasadeed ee waayaha.

Waxaan kaloo muran ka taagnayn, hubantina ah in Ummad walba horumarka iyo xaqiijinta isbeddelka nololeed ku xiran yahay, marka aan loo eegin habka dhaqan dhaqaale ama Siyaasadeed ee bulshadaasu ku sugan tahay, heerka uu taagan yahay aqoonta, Abaabulka iyo dhismaha qofnimo ee ruuxa dhallinyarada ah.

Isla markaasna qaabka iyo noocyada dabaqadda soo koraysa ee bulshadu waxay sawir cad ka bixisaa aayaha Ummaddaas, siduu Xoghayaha Guud ee Xisbiga HKS u yiri :

«ADDUUNKA DAL KASTA WAXA QIIMAHA WEYN LAHI, XARAKADA WADDANIGA ABUURTA, UNA DAGAALANTA HORUKACA IYO MIDNIMADA UMMADDIISA, LANA DIRIRTA WAXA DALKEEDA IYO DADKEEDA QAYBINAYA OO CADAWGEEDA AH, WAXAA UGU HORREEYA ARDAYDA IYO DHALLINYARADA WEEYE».

Haddii Ummad Dhallinyaradeedu kala daadsan tahay

waa ay ka soo ifbaxdaa heerka iyo xawliga horumarkeeda, waxaa adkaata sidii loo xallin lahaa dhibaatooyinka dib u dhaca dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshadaba. Halkaa waxaa inooga muuqanaysa in horumarka bulshadu si weyn ugu xiran yahay kaalinta Dhallinyarada. Mana jirto Ummad dhallinyaradeedu ka fadhido wax qabadka hase ahaatee waxaa qiimaynta gaar ah lahi waa hadba sida ay uga qayb qaataan awlaha bulshada, firfircoonidooda iyo fikirka ay haystaan, waxayna ku xiran tahay hadba heerka uu taagan yahay abaabulkoodu iyo qaabkooda Ururnimo.

Ka qayb qaadashada hawlaha dhallinyarada ku xirnaanta iyo ku dhiirranaanta halganka noloshu codsanayso iyo u beddelidda wax qabadkooda run la taaban karo, waxay salka ku haysaa siday u dareensan yihiin una abbaaraan dagaalka loogu jiro horumarka, ha ahaato la dagaallanka dabeecadeed ama lool lanka dabaqadeed ee bulshada. Sidaas darteed ayay baalasha hore kaalinta dhallinyaradu kaga taallaa barnaamijka iyo xeerarka Xisbiyada Hantiwadaagga ah iyo kuwa horusocodka ahba. Waxay Xisbiyadaasu waajib isaga dhigaan dhismaha Ururrada Bulshada si ay ugu guulaystaan xilka taariikhiga ah ee horyaalla iyo waajibaadka laga fulinaayo hadba marxaladda la maraayo.

Ururka Dhallinyarada ee Xisbi Hantiwadaag ah ama horusocod ah waxaa weeye warshaddii soo saaraysay kaadarka ugu firfircoon iyo hawlwadeenno la hubiyey oo waayo-arag ah, asagoo Ururka Dhallinyarada ee Xisbigu yahay fuliyaha shardi la'aaneed ee barnaamijka Xisbiga ahna abaabulaha iyo barbaariye dhallinyara weynta isugu jirta, kana kala timid kooxaha iyo dabaqadaha ay bulshadu ka kooban tahay, isla markaasna ka dhex fuliya ujeeddooyinka iyo mabaadi'da Xisbiga. Taasoo u suuragelisa Xisbiga in uu ku baahiyo aydoloojiyadiisa iyo waxqabadkiisa dadweynaha, iyo in meel bannaan oo aan ciirsi lahayn la soo taago kooxaha Kacaandiidka ah iyo dhiigmiirtayaasha. Natiijooyinkaasi waxay si cad uga muuqdaan beesha Hantiwadaagga oo dhallinyaradu heerka sare ee dhismaha Hantiwadaagga meel hore uga jiraan.

Waxaannu ogsoonnahay maskaxdana ku haynaa in Waayaha cusubi gaarsiiyey dhallinyarada in ay si caalaminnimo ah uga qayb galaan halganka loogu jiro madaxbannaanida, Dimuqraadiyadda, Nabadda iyo Hantiwadaagga. Si loo xoojiyo jabhadda ballaaran ee ka soo horjeedda, xabaashiisana qodaysa cadowga dadnimada ee imbaryaaliyadda, Gumeysiga. Gumeysiga cusub, fashiismada, sahyuuniyadda iyo midab kala sooca.



Adduunka saddexaad baahida loo qabo wax qabadka dhallinyarada waa mid si aad ah loogu baahan yahay, weliba waddammada Afrika iyo Carabta, dalalkaas oo dabaqaddooda shaqaalaha ahi aysan koboc sanayn tiro iyo tayo ahaanba, haatanna ku hawlan sidii ay u reebi lahaayeen dib u dhicii dhaqaalaha iyo raadadkii gumeysiga.

Dhallinyarada waddammada la gumaysan jiray waxay dadweynaha u hoggaamiyeen ka hortaggii iyo sidii loo tuuri lahaa heeryada gumeysiga loona xaqiijin lahaa Gobannimada dalalkooda. Dhallinyarada Soomaaliyeed oo qayb ka mid ah ahayd dhallinyarada dalalka la gumaysan jiray waxay qayb libaax ka qaateen halgankii dheeraa ee Ummadda Soomaaliyeed ugu soo jirtay daafacaadda qarannimada, midnimada Ummadda iyo horumarka shaqada, kaalinta dhallinyarada adduunka saddexaad ka qaadatay ka hortaggii gumeysiga iyo diididdii gunnimada waxaana tusaale gaar ahaaneed uga soo qaadan karnaa dhallinyarada Soomaaliyeed.

«Geesigii Axmed Garaad Ibraahim (Gurey)» isagoo dareensan dibindaabyadii gumeysiga ayuu wuxuu si nafhurnimo ah ugu horgalay dhallinyaradii Soomaaliyeed ka hortaggii weerarkii dhul ballaarsiga ahaa boqortooyadii Xabashida oo ay ka dambeeyeen Kaniisadda iyo Gumeystayaashii reer Yurub gaar ahaan burtuqiiska. Inkasta oo Ciidammadii boqortooyadii Xabashadu haysatay taageeriddii gumeysiga burtuqiiska haddana goobo badan ayuu uga gacan sarreeyey.

Da'dii Axmed Guray ku billaabay ka hortagidda Gumeysiga oo ahayd 1524kii asagoo 23 jir ah, waxay ina garansiinaysaa dawrkii, hormoodnimada ahaa ee dhallinta Soomaaliyeed weligood uga soo jireen ilaalinta iyo daafacaadda qarannimada Ummaddooda.

Soo jiriddii taariikhda iyo waayaha aadamigu waxay na

baraysaa in halganka Ummadi uusan marnaba damin balse ay dhacdo in uu hakado.

Kaddib markii ay xoogaysatay Burjuwaasiyadda Caalamiga ah ayey waxay bilowday in ay doonto dalal ay gumeysato si ay uga hesho alaabo cayriin, suuq iyo xoog jaban oo aysan ka heli karin dalalkooda. Si ay taas u gaaraan ayey waxay bilaabeen weerarkii Afrika, Aasiya iyo Laatiin-Ameerika. Ummadihii ku noolaa qaaradahaas la soo weeraray isma aysan dhigan kamana aysan raalli noqon gumeysiga, bal gaashaanka ayey u dhigeen ayagoo daafacayey haybadda qarannimadooda.

Ayadoo la wadaagtay waddammadii la gumysanayey ayaa Ummadda Soomaaliyeed ay soo martay halgan dheer oo ay ku doonayso xurnimadeeda Ummadnimo iyo xuquuqdeeda aadaminnimo, waxayna taariikhdeennu qiraysaa in Ummadda Soomaaliyeed ka hor tagtay talisyadii isbahaystay ee gumeysiga ayadoo xoog iyo xeeladba ka tabar yarayd, waxaana marag ma doonto u ah halgankii taariikhiga ahaa ee dhaqdhaqaaqii gobannimadoonka ee daraawiishta oo uu hoggaaminayey Sayid Maxamed Cabdulle Xasan.

Sayidku asagoo dareensan dhibihii gumeysiga garwaagsanna guul darrada gunnimada ayuu wuxuu abaabulay Ciidammo dhallinyaro ah. Ciidammadii Daraawiishta ayagoo ku hiranaya himilada gobannimada bay dagaallo joogta ah ku qaadeen gumeystayaashii. Dagaalladaas waxay gaarsiiyeen gumeystayaashii in ay goobo badan kala kulmaan guul darro, goobahaas oo ay ka mid ahaayeen (Dulmadoobe, Gallaadi, Daratoole, Cagaar-weyne) taasoo ku kalliftay in ay diyaarado ku soo weeraraan daraawiishtii markii ay si kale uga guulaysan waayeen. Weerarkaas dayuuradaha ee 1921kii oo ahaa kii ugu horreeyey ee gumeystayaashu kula isticmaalaan gobannimodoonka Qaaradda Afrika wuxuu muujinayaa tayo adkaantii ciidammadii Daraawiishta.

Si la'eg waxay na baraysaa muddadii rubac qarniga ku dhaweyd ee uu halgankii daraawiishtu socday ku adkaanta iyo aaminsanaanta yoolkooda oo ahaa gaarsiinta Ummadda Soomaaliyeed gobannimo buuxda.

Hakadkii iyo dhaawacii gaaray dhaqdhaqaaqa gobannimodoonka ee daraawiishta ee uu hoggaaminayey Sayid Max'd Cabdulle Xasan ma noqon kuwo qumiya ruuxa wadanninimo iyo Kacaannimo ee dadweynaha Soomaaliyeed, balse Kacaanyahanniinta Soomaaliyeed waxay u noqotay waayo aragnimo hor leh iyo u diyaar garow dhaqdhaqaaq cusub.

Dagaalkii labaad ee dunida intii uu socday iyo markii uu dhammaadayba waxaa waddamadii la gumeysan jirey ka shidmay halgenkii dhaqdhaqaaqa gobannimo-doonka, waxaana dhiiri geliyey in uu meelo badan ka abuurmo jabkii naasiga iyo fashiistada, iyo xoogaysigii Kacaannada Hantiwadaagga. Waxaa kaloo suuro geliyey in Ururro gobannimadoon ah oo abaabul adag leh dhismaan, wiiqii iyo dhabar-jabkii ka soo gaaray gumeysiga iyo imbaryaaliyadda Caalamiga ah dagaalkii adduunka ee labaad.

Ayadoo la wadaagta Ummadda Soomaaliyeed waddammadii la gumeysan jiray bay 15kii Maajo 1943kii koox dhallinyaro ah oo ka kooban 13 (Saddex iyo toban) furtey Urur Siyaasi ah oo la magac baxay (Naadiga Dhallinyarada Soomaaliyeed). Aragtidii isku keentay kooxdaas dhallinyarada waddaniga ah waxay ahayd ka danqashadii dacdaradii dalkooda iyo dadkooda, dareemidii qaybsanaantii dalkooda iyo u muhashadii macaanka gobanimada. Dhabtu waxay tahay ma dhisanto bulsho dhallin la'aanteed. Hawlwadeennadii Ururku waxay ahaayeen kooxo dhallinyaro naftooda hurayaal ah oo la magac baxay HORSEED.

Sharcigii Gumeysiga ma oggoleyn in Urur Siyaasi ah ka abuurmo dalka sidaas darteed bay dhawr sanno ku qaadatay xarakadii in ay dibadda uga baxdo magaalada Xamar kuna faafto dalka intiisa kale ayagoo ka gabanayey gumeysigu in uu minjaxaabiyo inta aan weli gaarin hadafkooda.

Ka dib markii dhawr magaalo laga furay Ururka, Gumaysiga oo ay u muuqatay waxtarka xoogsatada u yeelan karto fulinta himilada Ururka xag tiro iyo tayaba, buu soo saaray sharci ka mamnuucayo shaqaalaha ka mid noqoshada Ururka gaar ahaan Booliiska, hase yeeshee, ma hirgelin sharcigaas.

Maalinba maalinta ka dambeysay awoodda Ururku way sii xoogaysanaysay waxaana laga furay Ururka 1946kii magaa-

looyinka ay ka mid ahaayeen Marka, Baydhabo, Jawhar. Jammaame iyo Buulo burde. Magaalooyinkaas oo taliskii gumeysiga ku xoog badnaa. Si uu xarakada ku hor istaago gumeysiga Ingiriisku wuxuu la soo baxay tab cusub oo ahayd in dadka laga qaado cashuur madax (Koodhi), se nasiib wanaag arrintaas waxay fursad u siisay ururka in uu qaado tallaabadii ugu horreysay ee siyaasiga ahayd, taas oo si bareer ah uu ku hor istaagay hindisihii koodhiga. Waxaanna maalintaa uu Muqdisho ka dhacayo dagaalkii (Hanoolaato) ee 8 Maarso 1946kii. Dagaalkaas KOODHIDIID oo saameeyey dalka oo dhan wuxuu dhaawac weyn u geystay qabiilkii, wuxuuna adkeeyey isku soo dhawaanshihii iyo midnimada Ummadda.

Kaddib markii uu xoogaystay, magicii naadiga ee SYC waxaa loo beddelay Ururka dhallinyarada Soomaaliyeed (SYL) sannadku markuu ahaa 15kii Maajo 1947kii. Waxaa si bareer ah daboolka looga qaaday ujeeddadii ururka, wuxuuna caddeeyey in uu yahay Urur gobanimo doon ah una halgamaya xoreynta iyo mideynta Ummadda Soomaaliyeed.

Bayaanka Ururku wuxuu gantaal iyo eebo ku noqday Gumeysigii oo isla markiiba ku qaaday dagaal caddaan iyo qarsoodiba leh.

Si gumeysiga u wiiqo kalsoonida dadweynuhu ku qabo Ururka iyo isku duubnidoodaba ayuu furay asxaab ku sheeg badan oo ka soo horjeeda SYL, gundhiggooduna yahay qabiil iyo dariiqooyin, kuwaas oo si toos ah u fulinaya ujeeddooyinkii gumeysiga, Xisbiyo ku sheeggaasi ayagoo adeegsanaya qabiilka iyo diinta ayay dacaayad ku fureen SYL iyagoo u kala qaybiyey dadweynihii dariiqooyin kuna andacoonayey qofka wata astaanta Xisbiga (SYL) in uu yahay mid ka fog diinta isla markaasna salaaddii ayan ka ansaxi karin. Balse Marna way ku guulaysan waayeen in ay xooggii dadweynaha kala daadiyaan.

Jaallayaal, Saaxiibayaal,

Waxaa xusid iyo qaddarin gaar ah naga mudan kaalinta lama ilaabaanka ah ee ay suugaantu ka cayaartay guuleysigii xarakadii Gobannimo doonka, waxay ahayd qalabka ugu door roon ee loo adeegsanayey dareensiinta dadweynihii gumeysigu



aqoonta kala dagaalamay himilada Ururka, dhagarta gumeysiga iyo macnaha gobannimada. Ma tilmaamayn arrimahaas oo keliya balse waxaa sifo cad looga bixin jirey dhiiladii qabiilka, guusha midnimada iwm. Haddaan tusaale u soo qaadano tixdaas oo loogu tilmaamayey dadweynaha sidii gumeysigu u qaybiyey dalkooda waxay oranaysaa :-

«TIRO ARIYOHOO DHAXALAA
SIDEED LAYNA SOO TUBANYOO
NINBA TOBAN LA MEEL MARAYOO
CADOWGIIN IDIIN TALINEE»

Xisbigii Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed waxaa garab taagnaa door weynna ka cayaarayey hirgelinta ujeeddooyinkiisa haweenka, shaqaalaha iyo ganacsatada yar yar ee Soomaaliyeed.

Dhallintii gobannimada daakhliga ahayd 1956kii iyo doorashadii golaha sharciga ee baarlamaanka 1957kii.

Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed SYL wuxuu ahaa iftiinka ay ku soo hirtaan, motoorkii iyo itaalkii dhaqaajinayey xoogaggii dadweynaha Soomaaliyeed meel kasta oo ay ku noolaayeen, asagoo sabab aasaasi ah u ahaa hoggaamintii dhaqdhaqaaqa gobannimodoonka iyo xaqiijinta mideynta labada qaybood ay jamhuuriyadda ka kooban tahay, in kastoo wixii ka dambeeyey doorashadii 1954kii Xisbigu dhuminayey dabeecaddiisii kacaannimo, taasoo ka dhalatay doorashadii saldhigeedu ahaa qabiilka iyo qorsho ku talo gal la'aantii gobannimada ka dib iyo ayadoo xoogaggii dib u socodka ahaa ay ku soo bateen Hoggaanka Xisbiga.

Halgenkii dheeraa ee Ummadda Soomaaliyeed ugu jirtay madaxbannaanideeda wajigiisii hore wuxuu dhammeystirmay 1960kii, taas oo laba qaybood oo ka mid ahaa shantii qaybood ee gumeysigu u qaybiyey dalkeennu ka madaxbannaanaadeen ayna midoobeen. In kasta oo 1dii Luuliyo 1960kii la abuuray dawladdii Jamhuuriyadda Soomaaliyeed haddana ma aysan xalismin dhibaatooyinkii iyo cadaadiskii lagu hayey dadweynaha

iyo Dhallinyarada balse way sii xoogeysteen.
Jaallayaal, Saaxiibayaal,

Waayo aragnimada taariikhdu waxay ina tustay in uusan gumeysigu si dhib yar xuriyad ku dhiibin, wuxuuse isku dayaa inuu wajigii hore ee uu lahaa beddelo si uu u sii waariyo una dheereeyo jiritaankiisa. Taasi waxay ka muuqataa dalalka dhowaan madaxbannaanaadey ee Afrika, Aasiya iyo Laatiin-Ameerika.

Haddaba Soomaaliya madaxbannaanidii Siyaasiga ahayd ka dib waxay ka mid noqotay dalalkii gacanta u galay nidaamka Gumeysiga Cusub xukunkana u qabteen talisyo dib u socod ah oo u adeega danaha Hantigoosiga iyo Imberyaaliyadda Caalamiga ah. Talisyadii dabadhilifka ahaa ee dalka maamulayey Kacaanka ka hor waxay u jiheeyeen Ummadda jidkii habowga iyo dib u dhaca, waxayna xoojiyeen Qaskii, Jahawareerkii iyo kadeedkii isticmaarku noo dhaafay. Weliba waxay kala firdhiyeen oo colaad iyo uurxumo joogta ah ku beereen dadweynaha iyo gaar ahaan dhallinyaradii isku duubneyd una soo halgantay xornimada iyo mideynta Ummaddooda.

Ururkii Dhallinyarada Soomaaliyeed SYL oo ujeeddadiisuna ahayd in uu mideeyo gobannimo taam ahna gaarsiiyo dalka iyo guud ahaan Ummadda Soomaaliyeed, waxaa loo beddelay Urur ay ku danaystaan rajciyaddu looguna adeego danaha Gumeysiga Cusub iyo Imbaryaaliyadda Caalamiga ah.

Taasi waxay dhaxalsiisay dhallinyarada in ayan arag mirihii ka dhashay halgankoodii taxnaa, balse waxay noqdeen kuwo ay ku sii kordheen dhibaatooyinkii ijtimaaciga ahaa iyo raadadkii laga dhaxlay gumeysiga ee ay horeyba uga dagaalameen.

Dhallinyarada markii laga reebo tiradii yareyd ee ka soo jeedday qoysaskii ladnaa, ma ay helin wax tacliin ah. Dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya oo ka koobnaa 8 (Siddeed gobol) Kacaanka ka hor waxaa jiray 231 dugsi hoose, 26 dugsi oo ah kuwa sare iyo seddex dugsi ee farsamo. Tiradaas yar ee dugsiyada dalka ka jiray waxay ahaayeen kuwo loogu talo galay carruurta dadka maalqabeenka ah waxayna ku xirnaayeen manaahijta dugsiyada dawladihii gumeysigan jiray dalka. Dugsiyadaasi waxaa loogu talo galay in ay soo saaraan dad aad u tiro yar oo aqoon kooban leh, fulinayana danaha gumeysiga cusub. Waxaana lagala dagaallami jirey in ay dugsiyadaas wax ka dhigaan bareyaasha Soomaaliyeed ee horusocodka ah. Waxaannu xusuusan nahay in ayada oo la heli karo barayaal Soomaali ah laga keeni jirey dalalka Hantigoosiga ah barayaal ku sheeg loogu talo galay in ay jahawareeriyaan dhallinyarada dalalka soo koraya kuwaasoo ay ka mid ahaayeen kooxihii loo yiqiinnay «Peace Corps» kuwaasi waxay dhaawac u geysteen akhlaaqdii, dhaqankii iyo tayadii dhallinyaradii wax baraneysay.



Jaallayaal, iyo Saaxiibayaal,

Dhallinyarada Soomaaliyeed tacliin la'aan ka sokow waxaa haystay shaqo la'aan ballaaran iyo talisyadii dibusocodka ahaa ee ka dambeeyey midkoodna iskuma dayin in shaqo loo abuuro dhallinyarada, ayadoo uu dhaqaalihii dalku gacanta u galay koox yar oo dhiigmiirad ah. Shaqooyinkii yaraa ee ka jirey dalka waxay ahaayeen kuwo aan loo sinnayn ee lagu maamuli jirey qabiil, eex, iyo Danaysi ayada oo aan loogu danayn danaha dadka xoogsatada ah. dhallinyarada iyo guud ahaan dadweynaha.

Waxaa marag ma doonta ah in suuqyada iyo baararka ay ku bilnaan jireen dhallinyarada Soomaaliyeed ee aqoonta leh. Halkaasna ay ku baaba'sanayd noloshii guud ee dadweynaha.

Dhibaatooyinkaas aan soo sheegnay ka sokow, waxay talisyada dib u socodka ahaa dhallinyarada u qaybiyeen koox koox, qabiil, Gobolaysi si ay ugu sahlanaato cadaadiska iyo dhiigmiiradka lagu hayey xoogsatada iyo bulshada inteeda badan. Cadaadiskaa faraha badan, xaqdarra iyo kadeedka aan xadka lahayn ee ku jiray dalka muddadii ku sinnayd 9kii sanno ee gumeysiga cusub, waxay ku qasabtay dadweynaha iyo dhallinyarada in ay halgan adag u galaan sidii loo burburin lahaa talisyadaas ka hor vimid danaha dadka Soomaaliyeed intiisa badan. Madinkana u noqday Gumeysiga cusub iyo Imbaryaaliyadda Adduunka.
Jaallayaal, iyo Saaxiibayaal,

In kasta oo dhallinyarada Soomaaliyeed kala kulantay

dhibaatooyin badan iyo dacdaro aan lagu koobi karin halkaan talisyadii xukumay dalka iyo nidaamkii gumeysiga cusub ee ina kadeedayey 9kii sanno ee ka dambeeyey gobannimada haddana dhallinyaradu waxay xoojiyeen oo sare u sii qaadeen halgankooda ay ugu jiraan xaqiijinta madaxbannaani run ah iyo abuurid nolol horeysa ee bulshanimo. Waxaannu tusaale cad u soo qaadan karnaa bannaanbaxyadii diidmada ahaa ee dhallinyarada iyo dadweynaha sameynayeen sannooyinkii 1962-69. Kuwaas oo ay ku diidanaayeen Siyaasadihii iyo maamulkii dawladihii dahabkii iyo dib-u-dhicii ijtimaaciga ahaa ee bulshada, waxay ahayd muhimaddii ballaarneyd ee hortiillay Kacaankeenna.

Arrimahaas iyo kuwo kalaba waxay diyaarisay duruuf kacaaneed iyo bisayl Siyaasadeed isla markaana waxay tusaale cad iyo astaan u ahaayeen baahida dhallinyarada iyo dadweynuhu u qabeen Caddaaladda, **Sinnaanta, Horumarka** iyo Hantiwadaagga.

Markii uu guulaystay Kacaanka caweysan ee 21ka Oktoobar 1969kii waxaa Dhallinyaradu isu diyaarisay xilka weyn ee kala soo gudboonaaday halganka wajigiisa labaad ee xoreynta Siyaasadda iyo Dhaqaalaha. Waajibaadka Kacaanka oo ahaa in horey loo mariyo xubnaha dhaqaalaha, Waxbarashada, shaqada iyo Maamulka salkana ku haysa abuuridda garaad sarreeye oo xoojiya himiladaasi, si loo carro-rogo loona xaddido siiba habkii iyo dib-u-dhicii ijtimaaciga ahaa ee bulshada, waxay ahayd muhimaddii ballaarneyd ee hortiillay Kacaankeenna.

Kacaanku wuxuu isku keenay abaabulay, Hoggaamiyey, dagaalgeliyeyna qaybihii iyo xoogaggii kala firirsanaa ee dadweynaha wuxuuna ahmiyad ballaaran iyo dadaal gaar ah siiyey arrimaha Dhallinyarada, una diyaariyey kaalinta ay kaga jiraan difaaca miraha Kacaanka. Dhabeynta himilada Kacaanka oo ku xiran ka qayb qaadashada dadweynaha iyo foojignaantooda ay ku daafacayaan danahooda, wuxuu Kacaanku taabsiiyey Dhallinyarada Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed in ay si lixaad leh ugu xirmaan nolosha Halgenka, Dagaal joogta ahna u galaan sare u qaadidda heerka nololeed iyo garaadka siyaasadeed ee dadweynaha iyo Dhallinyarada. Maadaama ay dabiici tahay qaadashada dhallinyarada himilooyinka iyo afkaarta cusub ee u horseedaya horumarka iyo abuuridda dhaqan cusub ee hufan, salkana ku haya aragtida cilmiga ah ee maadiyadda diyalektikada iyo teknikada casriga ah.



Jaallayaal, iyo Saaxiibayaal,

Waxaa in la xuso muddan kaalinta ay dhallinyaradeennu ka soo gashay Halganka lagu beddelayey qaabka nololeed ee bulshadeenna laguna furfurayey xiriirka ijtimaaciga ah ee bulshada. In kasta oo taariikhda aadamigu aysan ku fillayn in la beddelo oo la wada dhammeystiro dhibaatooyinka bulshada ama dalka muddo toddobo sanno iyo siddeed bilood gudahood ah, haddana waxaa Kacaankii Oktoobar ka xaqiijiyey guulo iyo horumar ashqaraar leh taariikhda bulshadeenna baal cusub u furtay.

Guuridda laga guurayo nidaamka hantigoosiga ah, reebidda haraaga gumeysiga; gumeysiga cusub, dib u dhac; dhammaan dhaqammada dambeeya iyo guud ahaan calaamooyinka isku dul noolaadka iyo kadeedka, iyo dhanka kale u guuridda nidaamka hantiwadaagga abuuridda garaadka cusub ee dadweynaha iyo dhaqan sarreeya, aasidda dhidibbada lahaanshaha guud iyo qalabka wax soo saaritaanka, u isticmaalidda sayniska iyo teknikada cusub ee beeraha, waxbarashada, xoolaha, badda iyo guud ahaan wax soo saaritaanka, horumarinta, safeynta iyo hanashada dadweynaha ee maamulka dawladda, hagaajinta habka waxbarashada iyo baahinta aqoonta guud iyo cilmiga dadka dan yarta ah ee shaqaalaha, beeraleyda, kalluumeystada, reer-guuraaga dhammaan dadweynaha Soomaaliyeed miyi iyo magaaloba, adkaynta gaashaandhigga qarannimada, xasilinta nabadgelyada dadweynaha iyo difaacidda kacaanka, waxay ahayd xil weyn oo horyiillay Kacaanka.

Waxaan wada qirsannahay guulaha Kacaankeennu ka soo hooyay arrimahaas toddobadii sano iyo siddeeddii bilood ee taariikhda Kacaankeenna. Si loo furfuro mashaakilkii iyo dhibaatooyinkii bulshadeenna haysatay waxaa Kacaanku ku tallaabsaday xaqiijiyeyna abuuritaanka saldhigga maadiga ah ee dhaqaalaha iyo gogoldhigidda dhaqanka hantiwadaagga.

**Tolleynta, horumarinta iyo abuuritaanka halboowlayaa-**

siga dibedda iyo gudaha, hagaajinta nidaamka dhulka iyo abuuritaanka iskaashatooyinka beeraleyda, farsamada iyo kalluunka xoolaha iyo hirgelinta barnaamijka cuntada degdegga ah,xaqiijinta beeraha danwadaagaha ee beeraleyda iyo kalluumaysatada rorumarinta kasmada siyaasadda ee dadawaynaha salna u tahay baahinta iyo dimoqraadiyaynta hannaanka waxbarasho ee dalkeenna iyo qorista farta Soomaaliyeed, waxay aasaas adag iyo dhiddibbo ma guuraan ah u dhigeen hirgelinta Hantiwadaagga cilmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Guulahaas uu Kacaanku ka xaqiijiyay xagga dhaqaalaha, siyaasadda iyo arrimaha bulshada waxay daliil cad oo la taaban karo u yihiin habboonaanta iyo lagama maarmaannimada ku dhaqanka aragtida hantiwadaagga cilmiga ah, taasoo awood inoo siisay garashada duruufta aan ku noolnahay iyo beddelaadda dabeecadda inagu wareegsan, sidii uu horeyba u tilmaamay Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre «Waxaan doorannay Hanatiwadaagga cilmiga ah, maxaa wacay waa jidka keliya oo horumar degdeg ah lagu gaari karo, laguna dhisi karo ummad dhaqaalaheedu horey u marsan yahay».

Ka gungaaridda arrimahaas iyo horumarka la xaqiijiyey muddadii kacaanku jirey waxay ku rummoobeen kaalinta lixaadka leh ee ay ka gashay xoogsatada Soomaaliyeed iyo Isku duubnaanta dadweynaha oo mar kasta heegan u ahaa hirgelinta iyo ka libkeenidda ujeeddooyinka kacaanka, ayada oo la higsanayo ka gudbidda marxaladda adag ee kala guurka iyo dhismaha bulsho hantiwadaag kobocsan ah.

Guulaaas iyo horumarka lixaadka leh ee Kacaanku ka fulinayey marxaladaha kala geddisan ee waayaha kala guurka waxay wadajir u danaynayeen dadweynaha dan yarta ah ee la kadeedi jirey iyo dhammaan dhallinyarada oo si gooni ah uga faa'iideysatay iyadoo kacaankeennu uga dhigay hubanti waxbarashada ilaa heer Jaamacadeed, meelaynta shaqada, abuuridda xarumaha dhallinta kacaanka, hirgelinta barnaamijka cuntada degdegga ah, xarumaha dallinta Ceel-Jaalle iyo mahrajaannada kala duwan ee dhallinyarada, tababarrada maamulka iyo siyaasadda ee Dugsiga Xalane iyo kan Booliiska, abaabulidda xarumaha Ubaxa Kacaanka Oktoobar, dhismaha Guulwadayaasha Ummadda, baahinta iyo hirgelinta dhaqdhaqaaqa isboortiga iyo fanka, ka qayb gelinta hanashada Sare maamulka ku soo tababariddii dhallinyarada Machadyada Sare ee Siyaasadeed ee dalalka aan saaxiibka nahay, nidaamka waxbarashada khasabka ah ilaa dugsi dhexe, fidinta waxbashada dadka waaweyn, abuuridda kulliyadaha kala duwan ee Jaamacadda Ummada, deejinta iyo horumarinta qaabka waxbarashada D. hoose. Dhexe, Sare, dhismaha Machadyada iyo dugsiyada sare ee farsamada iyo xirfadaha kala duwan, kuna habaysn beddelidda nidaamka waxbarashada laga dhaxlay gumeysiga cusub lana waafajiyey waayaha deggaanka gaar ahaaneed ee dalkeenna, kuna qotonta aragtida cilmiga ee hantiwadaagga, buuxinaysana baahida dadweynaha iyo abuuritaanka qofka cusub iyo aqoonyahanno sare oo ku xeeldheer cilmiga dhaqaalaha, bulshada iyo siyaasadda intaba.

Waxaa habboon inaan dib u jaleecno heerkii waxbarashada ee dalkeenna markii uu ka dhasay kacaanku si aan u fahanno horumarka laga xaqiijiyey xagga waxbarashada ayada oo aynu soo qaadanayno tirakoobka hoos ku qoran :-

QORITAANKA WAXBARASHADA HOOSE-DHEXE IYO SARE SANNAD DUGSIYEEDKA

| Ardada | Mac. | T | Ardada | T. Mac. | T. Ardada | T. Mac. |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 69/70. | » | | 75/76 | » | 80/81 | » |
| H/DH | 48609 | 542 | 219517 | 3192 | 500.200 | 15,382 |
| SARE | 6412 | 334 | 7046 | 346 | 42.100 | 2678 |
| Isu. | 55021 | 1876 | 226,568 | 3541 | 542,300 | 18,060 |

Muddadii Kacaanku ka curtay dalka waxaa abuurmay Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed oo si deg deg ah loo ballaariyey kulliyadeheeda waxayna maanta gaarayaan 10 kulliyadood tirada ardayda ku jirtaana yihiin 2.500.-

Muddadii u dhaxeysay 1970 — 1976dii waxaa tirada ardayda Hoose/Sare guud ahaan ku korortay 312%. Gaar ahaan boqolkiiba tirada ku korordhay ardayda Dugsiyada Hoose/Dhexe waxaaa gaareysaa 352%. Qoorshaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta wuxuu saadiyey inta u dhaxeysa 1975—

1981 in tirada ardayda Hoose/Sare ku kordhi doonto Boqoqlkiiba 139%.

Isla muddadaas waxay tirada Macallimiinta kordhi doontaa boqolkiiba 410%. Tirakoobyadan waxaan ku jirin ardayda iyo Macallimiinta Waxbarashada dadka waaweyn iyo aqoondirsadka. Xawliga kororka tiradda ardayda iyo baahidda waxbarashada waxaa sawir cad naga siin kara tiraddii ardaydii la qaatay ka dib markii taclliinta khasab laga dhigay gaar ahaan sannadkii waxbarashada 1976 — 1977 oo loo qaatay dugsiyada arday tiraddoodu dhan tahay 100.000 (boqol kun) oo fasaladoodu la dhismeen isla sannadkaas. Waxaa ayaduna door weyn ka cayaaray hanaqaadidda waxbarashada barnaamijka shaqada qaranka oo laba siba faa'iido ugu leh dalka.

Si nolosha loogu xaqiijiyo ujeeddada dheer ee Kacaanka daryeelidda, iyo sare u qaadidda nolosha dadweynaha gaar ahaan tan dhallinyarada dabaqadaha hoose ee dadweynaha. Kaddib curashadii Kacaanka waxaa la billaabay horaantii 1970kii uruurintii carruurtii dar xumadu ku tabaalaysay suuqyada magaalooyinka. Kuwaas oo dilnaan u ahaa daryeel la'aantii dadweynaha ee dawladihii dibusocodka ahaa.

Kacaanku wuxuu ka dhisay Gobollada dalka xarumo lagu diyaariyo ruux dhallinyaro oo xayi ah kana mid noqda kaadirada fulin lahaa himilada Kacaanka Hantiwadaagga ah. Xarumaha dhallinta Kacaanka ee ilaa hadda ka hana qaaday dalka waa toban (10), dhallin dhan 4.139 ayaa iminka lagu carbiyaa.

Dhallintaas waxay ka helaan xarumahaas waxbarasho aqooneed, tu xirfadeed u diyaarin aragtiyeed iyo carbinba. Waxaa maanta guul u ah Kacaanka in dhallintii shalay mustaqbalkoodu mugdiga ku jiray ay maanta kooxo ka mid ah dalka ka yihiin hawlwadeenno xubno muhiim ah. Waxaa iyaduna farxad u ah ummadda in qaarkood maanta gaareen waxbarasho heer jaamacadeed.

**Jaallayaal, Saaxiibayaal,**

Ayadoo aan lagu koobi karin warbixintaan Kacaanka wuxuu qabtay iyo horumarka uu gaarsiiyey Dhallinyarada iyo guud ahaanba bulshada oo si cad uga muuqata nolol maalmeedka joogtada ah ee qof walba, hase ahaatee waxaa arrimaha aan kor ku soo xusnay iyo kuwo kale oo badanba ee laga hirgeliyey goobaha nolosha ijtimaaciga ah, waxay waa cusub u furtay tayana u yeeshay waxbarashada iyo himilada Kacaaneed ee dhallinyarada maanta iyo aayatiinka la hubo ee berrito:

Waxaa si la taaban karo u soo ifbaxay awoodda iyo kaalinta dadka dhallinyarada ahi kaga beegan yihiin Kacaanka hantiwadaagga ah. Dhallinyaradu waxay fuliyeen xilal taariikhi ah, guul weynna ka soo hooyeen hirgelinta warqaddii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka ayaga oo si geesinnimo leh ku fulinayey barnaamijkii ballaarnaa ee OHRM. Barnaamijka OHRM oo ahaa bilowgii Kacaanka aqoonta isuguna dhafnaa la dagaallanka akhris-qoris la'aanta, sare u qaadidda garaadka siyaasiga ah ee reer guuraaga, hagaajinta xaaladdooda nololeed, la dagaallanka cudurrada iyo tiro koobka dadka iyo xoolaha dalkeenna.

Waxaa dhallinyarada si mintidnimo ah uga soo baxeen guulana ka soo hooyeen shaqadaas waddaniga ahayd, hawshaas socotayna muddada 7ba bilood ah waxaa ka qayb galay 15.000 ee ardayda dugsiyadda Sare iyo kuwo dhexe iyo 10.000 ee ka kala socotay dhallinyarda Shaqeysa. Dhallinyarada Ciidammada Qalabka Sida iyo Guulwadayaasha Ummadda markii la isu geeyana ah 25.000 oo qof oo dhallinyaro ah iyo xoogagga kale ee Kacaanka ah ee bulshada.

Fulinta xilkaas oo ay dhallinyaradu ku mutaysatay billado iyo abaalgudyo kala duwan oo qaali ah, geesiyaal iyo hawlkareenno dhab ah u geeriyoodeen, waxay guulihii ay ka soo hooyeen ku cad yihiin tilmaamahan tiro-koobkan muujinaya qaar ka mid ah hawlihii la qabtay.

| | |
|---|---|
| DADKA WAX KU BARTY OHRM | 1,272.000 |
| XOOLAHA LAGU DAWEEYEY | 11,048.176 |
| DADKA LAGU DAWEEYEY AMA LA TILAALAY | 1,418,798 |

Jaallayaal, Saaxiibayaal,

Ka sokow shaqada qaayaha leh ee dhallinyaradu ka soo hooydey barnaamijkii ballaarnaa ee OHRM, waxaa noloshooda joogto ku noqday 7dii sanno ee na soo dhaaftay wax-qabad iyo firfircooni dheeraad ah waxayna hawl dhaxal gal ah ka muujiyeen waxbaridda dadka waaweyn iyo Ololaha Magaalooyinka. Sannadaha shaqada qaranka ee kacaanku ugu tala galay dhallinyarada dugsiydda Sare ka soo baxda inay maraan waxay xubin hore uga jirtaa itaalka waxqabashada ee dhallinyarada, ayada oo dhan kale ka wadata u tababarashada Maamulka. Hawshiisi waxay muujisay natiijooyin lixaad leh ee ay dhallinyaradu uga qayb galaan horumarinta iyo dhismaha bulshada hantiwadaagga ah.

Abaartii Dabadheer ee dalkeenna ka dhacday oo dadkiisu u badan yihiin xoolo dhaqato, sannadkii 1973 — 1975kii waxay dhaawac lixaad leh u geysatay dhaqaalihii iyo noloshii dadka reer guuraagga ah, waxayna saameysay oo ay dhibaatooyin culus ku ridday dhaqaalihii guud ee dalka, si loo badbaadiyo looguna abuuro nolol cusub wuxuu Kacaanku isugu geeyey awood dhaqaale iyo cudud wixii la hayey. Tijaabadaas iyo imtixaanka dabeecaddu ina hordhigtay, waxaa rajeiyadda guduhu abaabushay sidii ay uga faa'iidaysan lahaayeen waqtiga adag ee hor yimid dadweynaha Soomaaliyeed, hase yeeshee waxaa Kacaanka Oktoobar si geesinnimo iyo karti ku dheehan tahay uga gudbay marxaladdii adkayd ee abaarta iyo dhibaatooyinkii dabeecadda, badbaadiyeyna dadkii ku tabaaloobay ayadoo maanta ka hirgaleen beelaha danwadaagaha beeraleyda iyo kalluumaysatada, salna u noqday soona dedejiyey himilada Kacaanka ee dejinta reer guuraagga.

Dhallinyarada Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxay hawshaas uga qayb gashay si lixaad leh gaar ahaan ardayda Jaamacadda iyo dhallinta shaqada qaranka oo ka muujiyey firfircooni iyo hawlkarnimo dheeraad ah. Hawshaas taariikhiga ah ee hirgeliyey dalkeenna markii ugu horreysay waxaa ku xaqiiqoobay lana dejiyey dad tiradoodu dhan tahay 120.000 oo qof ahaan jireyna dad reer guraa ah, maantana kaalin sare ugaga jira dhismaha hantiwadaaggana iyo abuuridda beesha cusub ee Soomaaliyeed. Waxaana wax ka barta beerahaas arday tiradoodu dhan tahay 45.022 oo ku jirta waxbarashada heerka hoose iyo kan dhexe.



Sidaas si la mid ah waxay dhallinyaradu uga qayb gashay Ololayaashii iyo barnaamijyadii shaqo ee kala duwanaa lagana fuliyey bulshada dhexdeeda muddadii Kacaanku dalka ka talinayey. Sida Ololihii hirgelinta hantiwadaagga cilmiga ah, Ciribtirka akhris iyo qoris la'aanta ee magaalooyinka meel kasta, la dagaallanka qabiilka iyo shaqooyin kala duwan oo aan xad lahayn. Waxay dhallinyaradu intaba ka soo hooyeen guulo taabbo gal ah ayna xooggooda ku baajiyeen malaayiin lacag ah ee la hubaa in lagu fuliyey mashaariic kale ee bulshada lagu horumariyey.

Waxaan wada xusuusan nahay, mudanna in la qaddariyo kaalintii ballaarnayd ee dhallinyaradu ka qaadatay Ololihii bacaad celinta, waliba gaar ahaan dhallinyarada shaqeysa, dhallinyarada gobolka Banaadir iyo Dhallinyarada Shabeellada Hoose oo ka muujisay xamaasad iyo karti, ayna ku geeriyoodeen jaallayaal ku xusnaan doona taariikhda halgenka Ururkeennu ugu jiro dhismaha Hantiwadaagga iyo reebidda dhaqan dhaqaalaha dambeeya ee bulshada.

Guulaha lixaadka leh ee Kacaanku ka xaqiijiyey marxaladihii kala geddisnaa iyo horumarka laga dheliyey dhinaca dhaqaalaha, Siyaasadda iyo Bulshada, kuna fadhiyey abuuridda saldhigga aasaasiga ah ee dhismaha Hantiwadaagga, waxay ku dhaboobeen dadaalka wada jireed ee dadweyneheenna, iyadoo dhallinyaradu si la taaban karo uga muuqatay fulinta xilikaas muujiyeyna firfircoonaan iyo Kacaannimo dhab ah.

Jaallayaal, iyo Saaxiibayaal,

Inkastoo Ururka dhallinyarada Soomaaliyeed leeyahay waayo aragnimadii SYL oo 34 sanno ka soo wareegtay aasaaskiisa, haddana talisyadii dib u socodka ahaa sidaan horeyba u soo tilmaannay waxay kala firdhiyeen kala dhantaaleen isku duubnaantii iyo kaalintii wax qabashada ee dhallinyaradu uga jirtey bulshada.

Iyada oo xaaladdaas ay ku sugan tahay heerka Ururnimo ee dhallinyarada ay nala wadaagtay Ururrada kale ee bul-

shada, ayuu Kacaanku markii uu curtay ku dhaqaaqay sidii uu u abaabuli lahaa isuguna keeni lahaa xoogga dadweynaha abuuritaankii Laanta dhallinyarada ee Xafiiska SMGSK 1972dii oo ahayd hay'addii u qaabilsaneyd ka dhex fidinta dhallinyarada Siyaasadda. kor u qaadidda garaadka siyaasiga ah ee dhallinyarada iyo abaabulka Ururka Dhallinyarada, ka gadaalna isu bed deshay laanta dhallinyarada ee Hoggaanka Abaabulka ee XISBIGA HKS.

Waxayna diyaarisay iskuna dubbaridday qaybihii kala duwanaa ee Ururka ayada oo u abaabushay salna uga dhigtay koritaanka shaqada Ururka hab deegaan. iyo tacab waxbarasho.

1971kii waxaa si fiican u hawlgalay guddiyadii dhallinyarada ee Xaafadaha, Degmooyinka, Gobollada. Xarumaha Waxbarashada iyo Ubaxa Kacaanka Oktoobar, sidoo kale waxaa abuurmay dhallinyarada Ciidammada Guulwadeyaasha Ummadda. Guddiyada dhallinyarada shaqeysa waxay ayaguna ka dhismeen dhammaan hay'adaha shaqada Noofembar 1973kii.

Laantii dhallinyarada oo ay ka shaqaynayeen hawlwadeenno loo soo tababaray arrimaha dhallinyarada iyo abaabulidkooda iyadoo ka tallaabo qaadeysa baahida degdegga ah oo loo qabo dhismaha Urur dhallinyaro oo lixaad leh iyo horumarinta kaalinta dhallinyaradu ka qaadaneyso sare u qaadidda heerka nololeed ee dadweynaha, meel horena ka gasho difaaca Kacaanka iyo xoojinta siyaasadda gudaha iyo dibadda J. D. S. Waxay kaloo qabanqaabisay abaabushay, hawlgelisayna dhallinyarada qaybaheeda kala geddisan, ayada ay sal u ahayd abaabulkii ballaarnaa iyo diyaarintii dadweynaha ee XSMGSK ka dhex fulinaayey bulshada kana shiidaal qaadaneysa Siyaasadda Kacaanka ee lagu hormarinayo ururrada bulshada iyo abaabulkooda.

Muddadaas aynu kor ku soo xusnay, in kasta oo ay jireen dhaliilo ka imaanayey heerkii abaabul iyo dabiicaddii adkayd ee ku shaqeyneysay laantu, haddana waxaa guddiyada kala geddisan ee ururka dhallinyaradu muujiyeen waxqabad iyo firfircooni waacinimo ee ay uga qayb galayeen hawlaha bulshada sida iskaa wax u qabso, saray u qaadidda kasmada siyaasiga ee dhallinyarada iyo dadweynaha, ka qayb galka iyo abaabulidda banaan baxyo iyo taageerooyin Qaran iyo kuwo caalamiba, qabashada siminaaro, aqoon isweydaarsiyo lagu xoojinaayo la dagaallanka afkaarta iyo borobogaandada dibusocodka dibadda iyo gudaha laguna baahinayo mabaadii'da Markism iyo Leninism.

Shirarkii heer qaran ee la qabtay 1975kii iyo kii 1976kii bilihii Mey, ayna ka soo qayb galeen wakiilo ka kala socdo qaybaha kala duwan ee dhallinyarada ayna abaabushay laanta dhallinyaradu waxay muujiyeen kasmada iyo biseylka runta ah ee dhallinyaradu, iyada oo ay ka soo baxeen go'aammo dhaxal gal noqday iyo talooyin meel mar ah laguna xoojiyey baahida loo qabo horumarinteeda abaabuleed ee ururka. Halkudheggii shirkii Ururka ee 1976kii ka soo baxay ee ahaa «TACAB IYO TACLIIN» waxa uu noqday mid ku cheehan noloshooda joogtada ah iyo wax qabadkooda ay ugu jiraan horumarka dalka. Isla sannadkaas dhammaadkiisii waxaa la qabtay oo ay abaabushay laantu Shirkii lagaga hadlayey waxyeeladda Suuqa xaaraanta ah, xoojinta xubnaha iyo halbawlayaasha kala duwan ee dhaqaalaha dalka, waxayna dhallinyaradu ku muujiyeen kaalintii ay ka qaadanayaan ciribtirka dhaqdhaqaaqa iyo muuqaalka calaamadka suuqa xaaraanta ah.

Jaallayaal. iyo Saaxiibayaal.

Abaabulka iyo horumarinta qaabka dhismo ee ururkeenna waxaa garab socday oo hanaqaadayaa ururka Ubaxa Kacaanka Oktoobar.

Ururka Carruurta Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ayadoo barnaamijka Kacaanku ku daryeelaayey la fulinayo, waxaa uu ku baahay dhammaan Gobollada iyo Degmooyinka Dalka oo dhan. 18ka Juun maalinta UKO waxaa looga dabbaal-degaa oo laga xusaa Xarumaha UKO, Dugsiyada iyo dhammaan dalka oo idil.

7dii sanno iyo Siddeedii bilood ee Kacaanku jirey waxaa UKO yeeshay maamul, Barnaamij, Hawlwadeenno iyo hoggaamayaal si gooni ah ugu xilsaaran hawlaha Ururka Carruurta.

Ururka Ubaxa Kacaanka Oktoobar waxaa uu ka koray guula la taaban karo ka soo dhaliyey xagga Fanka, Isboortiga, waxbarashada farsamooyinka kala geddisan iyo Hanuuninta

dadweynaha. Arrimahaas oo dhan iyo kuwo kale oo aan la soo koobi karin intuba waxay ka mid yihiin nolosha maalin kasta ah ee carruurta Ubaxa Kacaanka Oktoobar iyadoo ay dhanka kalana uu ururka UKO yeeshay Xiriir Caalaminnimo ee uu la leeyahay Carruurta Adduunka, gaar ahaan kuwa waddamada Hantiwadaagga. Horumarkaas Ururka Carruurtu sameeyey oo uu ku hoos barbaaray kalgacalada iyo xannaanaada ee Xoghayaha Guud ee Xisbiga HKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo qaddarinta horumarka iyo barbaarinta carruurta waxay xoojisay himilada iyo dadaalka loo qabo UKO. Waxaa mudan in la xuso kaalintii wax ku oolka ahayd ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarintaa ay ka qaadatay hirgelinta himilada Kacaanka iyo Xisbiga iyo Carruurta Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Jaallayaal, iyo Saaxiibayaal,

Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed isaga oo ku shaqaynaya Siyaasadda Kacaanka, wuxuu ballaariyey xiriirka uu la leeyahay Ururrada Dhallinyarada Horusocodka ah ee adduunka, isagoo xoojinaaya kaalinta Ururkeennu ka qaadanayo Siyaasadda iyo dhaqdhaqaaqa dadweynaha iyo xoogagga horusocodka ah ee Adduunka.

Ururkeennu wuxuu xiriir ballaaran ee saaxiibtinimo la leeyahay Ururro badan oo kala duwan kuwo dal iyo kuwo Caalami ahba. Ururradaas oo maalinba maalinta ka dambeysa ay sii xoogoobeyso iskaashiga iyo wax wada qabsiga naga dhexeeya. Isla markaasna waxaynu xubin rasmi ah ka nahay Xiriirka Dhallinyarada Dimuqraadiga ah ee Adduunka, Ururka Ardayda Adduunka Ururka Dhallinyarada Afrika, Ururka Ardayda Afrika, Ururka Dhallinyarada Carabta iyo Ururka Ardayda Carabta. Waxaannu kaloo ka qayb qaadanay shirar, kulanno iyo bandhigyo Caalami ah oo ay ka mid ahaayeen tusaalana loo soo qaadan karo Fastifaalladii Berliin ee Dhallinyarada, kii Tuunis, Liibiya iyo Alaksandariya, ka sokow isu diyaarinta festifaalka 11aad ee dhallinyarada iyo ardayda adduunka laguna qaban doono dalka Kuuba 1978da haddana hawlihiisii iyo borobogaandadiisii ay soodaan.

Waxaynu xusuusan nahay shirar dhallinyarada horusocodka ah ee adduunka ay ku qabteen dalkeenna Ururkeenna marti geliyey ayna ka mid ahaayeen shirkii xiriirka Dhallinyarada Dimuqraadiga ee Adduunka 1874kii 24ka Abriile ee ku saabsanaa ka soo horjeedka Gumeysiga iyo imberyaaliyadda Caalamiga ah iyo kii Guddiga fulinta ee WFDY 1975kii laguna qabtay Muqdisho magaalo madaxda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya isla shirkaas la qabtay 1974kii waxaa uu guddoonsiiyey Ururka Dhallinyarada Dimuqraadiga adduunka Billadda Nabadda iyo u halganka Xuriyada iyo horumarka dadyowga adduunka Xoghayaha Guud ee Xisbiga HKS Jaalle Siyaad.

Ayada oo la tixgelinayo kaalinta Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed iyo Siyaasadda qeexan ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxaa ururkeenna loo doortay Guddiga fulinta ee Ururka dhallinyarada Dimuqraadiga Adduunka iyo adkeynta Ururka ardayda adduunka, Guddiga Fulinta ee Baan Afrika isla markaasna ay noo joogaan wakiilo ka tirsan Ururkeenna taas oo sii xoojineysa xiriirka iyo kaalinta aynu ka qaadanayno ururradaas. Waxayno kaloo madax ka nahay Xoghaynta bariga Afrika ee Ururka Ardayda Afrika.

Jaallayaal iyo Saaxiibayaal.

Sannadkii ina soo dhaafay waxaa lagu qabtay Midowga Soofiyeeti toddobaadkii labaad ee saaxiibnimada Ururkeenna iyo Ururka Dhallinyarada Shuuciga ah ee Midowga Soofiyeeti. taas oo ka dambeysa, xiriirka walaaltinnimo ee ka dhexeeya labada ummaddood iyo labada Xisbi, waxaanna dhallinyarada Shuuciga ah ee Midowga Soofiyeeti iyo Ururkeennu kala saxiixdeen bishii Oktoobar 1976kii barnaamijka shaqada ee sannadkaan 1977ka isla sidoo kale waxaynu ka saxiixnay barnaamij shaqo iyo iskaashi Ururka dhallinyarada Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee dalka Yaman.

Horumarka uu ururkeennu ka sameeyey dhinaca xiriirkiisa dibadda iyo ahmiyadda dhallinyarada horusocodka ee adduunku ina siinayso waxay ka muuqataa barnaamijka shaqada ee Sannadkaan, ayadoo laga soo dalbay Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed in ay marti geliyaan Shir ku saabsan tacliinta deegaanka iyo waayo aragnimadii Soomaaliya ee Ololaha HRM. Dejinta reer guuraagga iyo bacaad celinta: shirkaas oo ay wada

abaabulayaan U. DH. S. Xiriirka dhallinyarada Dimuqraadiga Adduunka iyo laanta Qaramma-da Midoobay u qaabbilsan tacliinta mashaariicda deegaanka. laguna qaban doono bisha soo socota ee Juun 1977ka dalka. Sida oo kale waxaa la filayaa in Siminaar ballaaran lagu qabto dalkeenna bisha Luuliyo 1977ka oo ay ka soo qayb galaan ergooyin ka kala socda Ururrada dhallinyarada horusocodka ah ee adduunka iyo dalalka aannu saaxiibka nahay. Ayada oo ay wada jir u abaabulayaan ururka ardayda adduunka iyo ururka dhallinyrada Soomaaliyeed.

Arrimahaas aan kor ku soo xusnay iyo qaar kaloo aan la soo koobi karin, intuba waxay tusaale cad u yihiin sida Ururka dhallinyarada Soomaaliyeed heegan ugu yahay xoojinta kaalintiisa iyo gudashada waajibaadka caalaminnimo ee ka saaran dagaalka dhallinyarada horusocodka ah ee adduunka ugu jirto xurnimada. iskaashiga, nabadda iyo horukaca bulshada.

Jaallayaal iyo Saaxiibayaal:

Dhismaha Hantiwadaagga dalkeenna wuxuu galay marxalada cusub oo taariikhi ah, taas oo maalin walba aynu goobjoog ka nahay kuna hawlannahay isbeddelada Kacaaneed, ka miro dhalinta hantiwadaagga iyo gaaridda horumar degdeg ah. Laba kaclaynta iyo kordhinta xawliga ah socodka kacaanka oo ay aasaasi u tahay abuuritaanka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed oo u aqoonsaday Ururka dhallinyarada kaydka iyo kaaliyaha ugu firfircoon Xisbiga. waxaa dhallinyaradu dusha ka saaran xil aad u culus iyo in ay la yimaadaan firfircooni, nafhurnimo iyo tayo wax qabad leh oo aan xad lahayn.

Ayadoo Xisbigu siinayo dhallinyarada iyo Ururrada kale ee bulshada aragti aqooni ah salna ay u tahay fulinta barnaamijka Xisbiga, hanashada iyo hoggaaminta nolosha cusub iyo ka guuleysiga dhismaha hantiwadaagga, ayuu kalfadhigii 3aad ee Golaha Dhexe Xisbiga HKS ku guddoonsaday dib u habeynta ururka dhallinyarada Soomaaliyeed. Si loo dhiso Urur Dhallinyaro oo lixaad leh qeyb weynna ka qaata halgenka loogu jiro horumarinta dhaqaalaha, Siyaasadda iyo abuuridda ruux cusub oo dhallinyaro. Xambaarsanna himilada Xisbiga iyo qofnimada Hantiwadaagga.

Shirweynaha 1aad ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed wuxuu yahay tallaabadii 3aad ee XISBIGA HANTIWADAAGGA KACAANKA SOOMAALIYEED ka ebyo kuna dhammeystirayo hawlaha la xiriira dib u habeynta Ururrada Bulshada, ka dib markii lagu soo guuleystay qabashadii Shirweynaha 1aad ee Ururkeenna.

Qabashada shiweynaha 1aad ee Ururka Dhal. Soomaaliyeed, isla markaasna u furayaa baal cusub halganka dhallinyarada iyo waxqabadka firfircoon oo ay ku gudannay xilalka iyo waajibaadka cusub oo ka saaran dalkooda. u halganka xurnimada qaybaha Soomaaliyeed ee weli la gumeysto iyo midnimada ummaddooda.

Waayaha cusub ee ururkeennu galay waxay si la taaban karo oo mug leh uga muuqatay qabanqaabadii iyo isu diyaarintii shirweynaha 1aad ee aynu maanta u fadhinno. Isu diyaarintiisuna ay isugu jirtey dhinaca qaban qaabada hawshiisa iyo xagga abaabulka, waxaana intii hawshu socotay la soo ebyey shaqadii la xiriirtay xagga baabulka iyo dib u habeynta qaybaha kala duwan ee Ururka. Shirarkii lagu soo dhisay guddiyada degmooyinka Gobollada, meelaha shaqada, Jaamacadda Ummadda iyo xarumaha waxbarashada laguna soo doortay ergooyinkan ka soo qayb galay shirweynaha 1aad lagagana soo dooday shirarkaas xeerka Ururka. Waxaanna laga soo jeediyey shirarkaas talooyin dhaxal gal ah oo naaxinaya nuxurka ujeeddooyinka Xeerka Dhallinyarada Soomaaliyeed ku dhisan yahay Dimuqraadiyadda guddoonka dhexe ayna xubnihiisa ka dhexeyso Jaallanimo iyo wada tashi.

Intii ay socotay qabanqaabada iyo is diyaarinta hawsha taariikhiga ah ee shirweyneheenna waxaa barbar socotay baraarujin. kicin heeso iyo xamaasada ay dhallinyaradu ugu tabaabushaysanysay shirweynaha kuwa soo dhaweyneyso farxad xuska maalinta dhallinyarada 15ka Maajo sannad guuradda 34aad ee Ururkii ugu horreeyey dhallinyarada Soomaaliyeed.

Waxaan hubnaa in shirweynaha 1aad ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed kuna soo beegmay waayo gaar ah oo taariikhda bulshadeenna qiimo gooni ah u leh, ayna horyaalliin shirweyneheenna waajibaad ballaaran oo ay ka mid yihiin :-

— Fulinta Barnaamijka Xisbiga HKS iyo qorshaha dalka,

— Kordhinta tacabka Warshadaha. Beeraha, Badda iyo Xoolaha

— Barashada, Baahinta iyo ku dhaqanka afkaarta Maarkiisim, Leninisim.

— Gaarsiinta Dadweynaha aqoonta guud: abuuridda dhammaan dhallinyarada waddan jaceyl, Kacaannimo iyo kasmo dabaqadeed, ku beeridda dhallinyarada shaqo jaceelka, kala dambeyn. disibliinka adag iyo feejegnaan Kacaannimo, barbaarinta iyo kal kaalinta UKO, horumarinta xarumaha dhallinta Kacaanka, difaaca dalka hooyo iyo ilaalinta miraha Kacaanka: horumarinta Hiddaha iyo Anshaxa Suuban ee Dadweynaha Soomaaliyeed; la dagaallanka caadooyinka iyo dhaqammada dib u socodka sida qabiilka, Xatooyada, Eexda, Goboleysiga, iwm, ee ka haray hababkii dhaqan dhaqaale ee isku dul noolaadka, Gumeysiga iyo Gumeysiga Cusub: Taageeradda dhallinyarada Soomaaliyeed ee weli ku hoos nool gumeysiga; horumarinta xiriirka caalamiga ah ee Ururkeennu la leeyahay Ururrada Dhallinyarada waddammada Hantiwadaagga, Ururrada Dhallinyarada Horusocodka ah ee caalamiga ah iyo kuwo aan saaxiibka nahay; garabsiinta dhallinyarada weli ku hoos nool talisyada isku-dul noolaadka, Gumeysiga Midabtakoorka, Sahyuuniyadda iyo Fashiistada.

Waxaa muddan in la xuso oo hortiina laga sheego kaalinta dhallinyarada Gobolka Banaadir ka qaadatay qaban qaabadda iyo xamaasad gelinta martida iyo ergooyinka kala duwan ee ka soo qayb galay shirweynaha. Taas tu la mid ah waxaan u soo jeedineynaa Ubaxa Kacaanka Oktoobar iyo Guddiyadii kala duwanaa ee muddada ku hawlanaa diyaarinta iyo sidii loo najixin lahaa shirweynaheyna qaayaha leh.

Waxaannu u rajeynayaa in shirweyneheenna lagu guulaysan doono, aynuna ka dhabeyn doonno ahaanteenna kaydka iyo kaaliyaha ugu firfircoon ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

«HA GUULEYSTO SHIRWEYNAHA 1AAD EE U. DH. S.

HANOOLAADO XOGHAYAHA GUUD EE XHKS.

HA MIDOWDO UMMADDA SOOMAALIYEED».

URURRADA BULSHADA SOOMAALIYEED WAA U HEEGAN HAD IYO JEER DAAFACAADDA DALKOODA IYO HORUMARINTA NOLOSHA DADWEYNAHA SOOMAALIYEED

WAXAA LAGU DAABACAY
WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

FARSAMAYAQAAN **Sadiq**